

Ayaa IDEA Leh?

***Hagaha Waalidka Dadka Naafada Ka Ah
Waxbarashada ee
Xeerka Hagaajinta ee 2004
(A Parent's Guide to the Individuals
with Disabilities Education
Improvement Act of 2004, IDEA)***

*Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
25 South Front Street, 2nd Floor
Columbus, Ohio 43215-4183*

Juun 14, 2010

(La saxay Ogost 29, 2008: Fiiri bogga 10 iyo Foomka Nidaamka Cabashada iyo Codsiga Nidaam Jira.)

Somali

TUSMADA

HORDHAC

MAXAA DHACA HADDII CUNUGEYGA UU DHIBAATO KALA KULMO WAXBARASHADA DUGSIGA?

TALAABOYINKA HELISTA ADEEGA

SU'AALAHAA BADANAA YIMAADA

CODSI TAAGEERO

RIFARAL

OGAYSIISKA

WAALIDIINTA KORSADA ILMO AANAY DHALIN

OGOLAANSHAHA

QIIMAYN

DIB U QIIMAYN

QIIMAYN WAXBARASHO OO MADAX BANAAN

BARNAAMIJKA WAXBARASHADA SHAQSIGA (IEP)

ADEEGA SANAD-DUGSIYEEDKA LA FIDIYAY

BEDELKA ARDAYDA

KALA GUUR

DIIWAANADA

DHEXDHEXAADIN

DAADIHINTA IEP

HABKA CABASHADA

XUQUUQDA MUWAADINKA

ANSHAXA

DUGSIYADA AAN DAWLIGA AHAYN (GAARKA AH)

FOOMAMKA DHEX DHEXAADINTA, ASHTAKADA IYO HABKA SHARCIGA

CODSIGA TOOSKA AH EE DHEXDHEXAADINTA

CABASHADA NIDAAM JIRA IYO CODSIGA DHAGAYSIGA NIDAAM JIRA

FOOMKA NIDAAMKA JIRA IYO/AMA CABASHADA

HORDHAC

Haddii aad tahay waalidiinta ilmo qaba naafo dhib ku ah waxbarashaddiisa ama waxbarashadeeda, ama haddii ilmahaaga lagu tuhuran yahay inuu qabo naafonimadan, buugan wuxuu kuu noqon shay qiimo badan oo waxtara waxbarashada ilmahaaga.

Daabacaadii 2008-dii ee ahayd Yaa leh IDEA-dan? Waxay isugu soo ururtay luuqada Xeerka Horumarinta Waxbarashada Dadka Curyaamiinta ah qodobo muhiim ah kuwaas oo kaa dhigaya saxiib waxtar u leh waxbarashada ilmihiisa. Buuggan waxaa diyaarisay Xafiiska Caruurta Gaarka ah ee Waaxda Waxbarashada ee Ohio (ODE/OEC).

Bogaga soo socda ayaa kuu sheegi doona sida aad ula shaqaynaysid dugsiga degma iyo hay'adaha'addaha kale ee dawliga ah si loo go'aamiyo bal in ilmahaagu qabo awood daro Wuxuu sidoo kale hoosta taxayaa talaabooyinka go'aanka looga gaadhayo bal awood daraddu geyi-siinayso ilmahaaga waxbarasho gaar ah iy adeegyo la xidhiidha.

Qoraalkan oo sidoo kale la yidhaa "Ogeysiiska nidaamka dhowrista" wuxuu aasaasayaa xuquuqdaada inaad hesho "Waxbarasho dawladeed oo lacag la'aan oo haboon". Wuxuu kuu sharaxayaa sida adeegyada waxbarashada gaarka ah loo bixiyo waxaanu sidoo kale taxayaa macluumaadka dhinaca xidhiidhka ee aad u baahan tahay.

Madaama xuquuqaha iyo nidaamka ku qoran buugan markii hore lagu xusay xeerka federaalka, waxaa laga yaabaa inaad aragto sharciga la xidhiidha oo kugu cusubSi aan macluumaadka uga dhigno mid fahamkiisu fudud yahay, waxaanu fududaynay afkan sharciga mar kasta oo ay suurto gal tahay Erey sharciyeed kasta oo la sii waddo isticmaalkiisa si buuxda ayaa loogu sharaxay qaybta buuga ee ciwaaankeedu yahay "Qeexdimo" iyo gudaha inta qoraalku socdo. Xataa iyadoo ay sidaa tahay, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad daqiiqado yar ku qaadato la-qabsashada ereyadan ka hor inta aanad bilaabin. Waxaad ka heli doontaa iyaga qaybta "Qeexdimaha" ee ka bilaabmaysa bogga 56.

FIIRO: Buugan waalidiintu wuxuu soo koobayaa xeerarka waxbarashada khaaska ah ee cutubka 3301-51 ee qanuunka maamulka, halbeega hawlgalka Hay'addaha Waxbarashada Ohio ee u adeega Caruurta Curyaamiinta ah. buuga kuma jiraan qodobada xeerka oo dhan mana bixinayo talo sharci ama tafsiiir xeerka ah. fiiri halbeega hawlgalka lagu qoray mareegta internetka ee Waaxda Waxbarashada Ohio (ODE), www.ode.state.oh.us, raadinta ereyga furaha ah: *halbeega Hawlgalka Curyaamiinta, ee shuruucda oo dhan*. Sidoo kale kala tasho garyaqaankaaga wixii talo sharci ama tafaasiil ah. Halbeegyada hawlgalku wuxuu ku salaysan yahay sharciga gobolka (Cutubka 3323 ee qanuunka dib loo eegay), sharciga federaalka (Xeerka Horumarinta Waxbarashada Dadka Curyaamiinta ee 2004) iyo shuruucda federaalka (C.F.R) qaybta 300) ee waxbarashada caruurta curyaamiinta ah. Macluumaadkan waxaa sidoo kale lagu qoray bogga edresourcesohio.org.

MAXAA DHACA HADDII CUNUGEYGA UU DHIBAATO KALA KULMO WAXBARASHADA DUGSIGA?

Sharciga Horumarinta Waxbarashada Shakhsiyaadka Itaalka Darran ee 2004, Sharciga gobolka oo inta badan loogu yeedho IDEA wuxuu sameeyay nidaam go'aan looga gaadhayo baahida waxbarasho ee ilmahaaga iyo helista adeegyada waxbarasho khaas ah, haddii awood daradu ilmahaagu u baahan tahay adeegyadaas. Waatan hoos ku qoran sida , qiyaas ahaan, loo kala horaysiinayo nidaamka fulinta:

1. **Codso taageero**— Talaabadani waxay kaa caawinaysaa inaad xidhiidh la bilowdo dugsiga degaankaaga si aad si wadajir ah wax uga qabataan calaamad kasta oo soo ifbaxda oo muujinaysa in ilmahaaga dhibi ka haysato waxbarashada.
2. **Codso qiimayn**— dugsiyada degaanku waxay waayo argnimo badan u leeyihiin go'aan ka gaadhista sida fiican ee ilmahaagu wax u baranayo iyo hawshiisa dugsiga. Sababtan awgeed, waxay keeni karaan agab qiimo way u leh hawsha qiimaynta ilmahaaga.
3. **Qiimaynta**—tani waa talaabada kuu ogolaanaysa dugsiga degaanka inuu tilmaamo bal in ilmahaagu qabo awood daro u baahan waxbarasho gaar ah (awood darooyinka oo dhami uma baahna). Qiimayntu waxay jeedin doontaa noocyada waxbarasho ee gaarka ah ee ilmahaagu u baahan yahay ama waxay xaqiijin doontaa in ilmahaagu u awoodi doono inuu wax ku barto fasal caadi oo uu la galo arday kale Qiimayntu maaha shay ay “ilmahaagu ku samaynayaan” khabaro gooni socod ahi. Waxaad qayb ka noqon doonaa hanaanka qiimaynta waxaadna xubin ka noqonaysaa kooxda qiimaynta ilmahaaga..
4. **Dejinta Barnaamij Waxbarasho qof ahaaneed (IEP)**—Haddii qiimayntu soo saarto in ilmahaagu yahay naafo u baahan waxbarasho gaar ah, barnaamij khaas ah ayaa la dejin doonaa si hadaf loogu sameeyo barashada ilmahaaga isla markaana looga war hayo ilmaha.
5. **Gorfaynta sanadlaha ah**— Sanad kasta dugsiyada degaanka ayaa gorfayn doona sida fiican ee barnaamika khaaska ah ee ilmahaagu u shaqaynayo waxaana loo diyaar garoobi siddii loo sargoyn lahaa qorshaha si loo habsado in ilmahaagu samaynayo horumarka haboon.
6. **Dib u qiimayn**— sharciga IDEA wuxuu ilmahaaga u ogol yahay in mar kale la qiimeeyo saddexdii sannaba hal mar si loo ogaado isbedel kasta oo muhiim ah oo ku dhacay awoodiisa waxbarasho ”Dib u qiimayntani” waxay kuu sheegaysaa adiga iyo dugsiga degaankaba bal in taageerada iyo adeegyada ilmahaagu helayaa ay yihiin kuwii saxda ahaa. Kadibna dugsigu wuxuu ka duulayaa wixii soo baxa.
7. **Qiimaynta waxbarasho ee madaxa banaan (IEE)**— haddii aanad si buuxda ugu qanacsanayn in qiimaynta dugsigu ee ilmahaagu sax tahay, waxaad diyaarsan kartaa qiimayn ilmahaaga uu ku sameeyo aqoonyahan aqoon u leh arintan oo aan u shaqayn dugsiga. Arrimaha qaarkood, tan waxaa laga samayn karaa kharashaadka dugsiga.

TALAABOYINKA HELISTA ADEEGA

Shaxahan soo socdaa waxay muujinayaan soo koobis todobada talaabo, ee ku xusan kor, ee loogu heli karo adeeg waxbarasho ilmahaaga naafada curyaanka ah Waxaad macluumaad aad u faahfaahsan oo ku saabsan badi talaaboyinkan ka heli doontaa foomka su'aalaha iyo jawaabaha ee xaga dambe ee buuga. Qayb lixaad leh ka qaado hawshan adigoo waydiinaya su'aalo, bixinaya macluumaad ama gacan ka gaysanaya go'aan ka gaadhisata waxbarashada ilmahaaga.

	WAALIDIINTA	DUGSIGA DEEGAANKA
CODSI TAAGEERO	★ La xidhiidhayaan waalidiinta si ay u falanqayaan bal in ilmuhu qabo naafanimo. ★ Waxay bixinayaan macluumaad waxtar leh. ★ Dugsiga degaanka ayay waydiisanayaan caawin. ★ Waxaad dugsiga ka caawinaysaa inuu go'aan ka gaadho bal in ilmuhu qabo naafonimo.	★ Wuxuu waalidiinta kala xidhiidhayaa warbixinta haddii ilmaha lagu tuhmo bal inuu qabo naafonimo. ★ Wuxuu isku dayayaa istaraatiyado wax baris oo kala duwan kuwaas oo ilmaha ka caawinaya inuu waxbarto waxaana loo haynaa diiwaanka natiijooyinkiisa. ★ Wuxuu kala xidhiidhayaa waalidiinta inuu ka qaybgalo kulan go'aan lagaga gaadhayo bal in ilmaha loo qiimaynayo adeeg waxbarasho oo gaar ah. ❑ Wuxuu adeegsanayaa “kooxda caawinta wax-ka-qabashada” (Ka fiiri qaybta “Qeexdimaha” waxa u yihiin <i>Kooxda caawinta wax-ka-qabashadu</i>).
CODSI TAAGEERO	★ Waxay qoraal ama af ahaan ku codsanayaan in ilmahooga lagu sameeyo qiimayn naafonimo ah. Waxaa lagu talinayaa in codsiga aad ku doonayso qiimayntu noqdo mid qoraal ah si aad u ogaato degdegsiimada jawaabta dugsiga. ★ Codsasha macluumaad ku sahabsan kooxaha taageera waalidiinta. ★ Waxay bixiyaan ogolaansho (idan) qoraal ah oo ah in ilmahooda la qiimeeyo. Bixinta ogolaanshaha macnaheedu waxa weeyi in si buuxda lagu ogeysiisay dhamaan macluumaadka lama huraanka u ah qiimaynta ilmaha. Markaad aad bixisid ogolaanshaha in ilmahaaga la qiimeeyo, maaha inaad dugsiga u siisay ogolaansho inuu u bilaabo ilmaha waxbarasho gaar ah.	★ Wuxuu bilaabayaa hawsha qiimaynta. ★ La xidhiidhida waalidiinta, sharaxaada nidaamka codsiga (dirista) iyo siinta nuqul ka mid ah Yaa leh IDEA-dan ? ★ Waxay siiyaan waalidiinta nuqul ogaysiis hor maris ah. Degmadu waxay ogaysiiskan u diraysaa waalidiintaka ka hor inta aanay soo jeedin wax talaabo oo la xidhiidha ku haboonaanta ilmahaaga ee amase helista waxbarasho gaar ah Sidoo kale degmadu waxay u diraysaa waalidiinta foomka ogaysiiska hordhac ah marka ay diidaan wax talaabo ah oo la xidhiidha ku haboonaanta ilmahaaga ee waxbarashada gaarka ah (Faahfaahinta ka eeg qaybta “ogeysiiska”) ★ Waalidiinta ayay waydiisanayaan ogolaansho qoraal ah si ay u qiimeeyaan bal in ilmaha lagu tuhmayo naafonimo. ★ Wuxu helayaa ogolaanshaha qiimaynta waalidiinta
★ Dalabkawaalidiinta	❑ Dalabka dugsiga	★ Doonista dugsiga

	WAALIDIINTA	DUGSIGA DEEGAANKA
QIIMAYN	★ Waxay ka qaybgalaan hawlaha kooxda qiimaynta, taas oo ay ka mid tahay go'aan ka gaadhista in ilmahaagu uu istaahilo adeegyada waxbarashada gaarka ah. ★ Waxay warbixin siiyaan hawsha qiimaynta (sida taariikhda qoys, waxbarasho iyo caafimaad iyo aragtida ilmahaaga ee meelaha uu ku fiican yahay iyo baahiyihiisa. ★ Haddii la go'aamiyo in ilmahaagu aanu ku haboonayn waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha oo adiguna aanad ku raacsanayn, waxaa laga yaabaa: ★ Inaad codsato “qiimayn waxbarasho oo madax banaan” (Tani waa qiimayn uu samaynayo qof aan u shaqayn dugsiga Wixii tafaasiil ah fiiri “Qeexdimaha”) ★ Inaad codsato “dhegaysi dacwad nidaamka lacag bixinta ah” (Tani waa nooc dacwad ah oo loogu talo galay xalinta is-maandhaafka Wixii tafaasiil ah fiiri “Qeexdimaha”)	★ Waxay la xidhiidhayaan waalidiinta si ay uga qayb qaataan hawsha qiimaynta. ★ Waxay la shaqaynayaan waalidiinta si ay u sameeyaan qorshe qiimayneed kaas oo lagu soo koobayo warbixinta kooxda qiimaynta. ★ Waalidiinta waxay siinaysaa qoraal ogaysiis oo hordhac ah kaas oo ay ka mid tahay sharaxaad qiimaynta la qorsheeyay. ★ Ka soo ururinta macluumaadka ku sahabsan ilmaha waalidiinta, macalimiinta iyo dadka kale. ★ Ku dhamaystirada qiimaynta muddo 60 maalmood ah gudahood marka la helo ogolaanshaha waalidiinta ee in qiimayn la sameeyo. ★ Fulinta kulan koox qiimayneed kaas oo waalidiinta lagu casuumayo ★ Soo koobida iyo turjimida natiijada qiimaynta. ★ Haddii ilmahaagu u ku haboon yahay barnaamijka waxbarashada khaaska ah, IEP-ga waxaa lagu soo dhamayn doonaa muddo 120 maalmood ah gudahood ee riferalka qiimaynta ama 90 maalmood gudahood marka aad saxeexo ogolaanshahaaga. Ka qaybgalayaasha shirka waxaa loogu yeedhi doonaa “Kooxda IEP” (fiiri “ Qeexdimaha”). ★ Waalidiinta wuxuu siinayaa koobi ka mid ah warbixinta kooxda qiimaynta muddo 14 maalmood gudahood ah ama ka hor kulanka barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah, kolba kan soo horeeya. ★ Haddii ilmahaagu aanu ku haboonayn waxbarashada gaarka ah, dugsiga degmadu: ★ Wuxuu waalidiinta siinaya koobi ka mid warbixinta kooxda qiimaynta. ★ Wuxuu go'aan ka gaadhayaa isbedelada kale ee haboon iyo “wax ka qabashada” (noocyada taageerada) si loo caawiyo ilmaha, ★ Waxay tix gelineysaa in ilmahaagu uu xaq u leeyahay adeegyada iyadoo la eegayo sharci kale oo qaran, Cutubka 504 ee Rehabilitation Act of 1973
★ Dalabkawaalidiinta	☐ Dalabka dugsiga	★ Doonista dugsiga

	WAALIDIINTA	DUGSIGA DEEGAANKA
KA HOR KULANKA IEP	★ Waxay codsanayaan koobi ka mid ah talo soojeedinta dugsiga ee barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah. ★ Haddii loo baahdo, xubin qoyska ka mid ah, saxiib, ama u doode ayay waydiisanayaan inuu kala qaybgalo kulanka adiga. ★ Haddii loo baahdo, waxay casuumayaan mid ama laba qof oo leh khibrad gaar ah ama aqoon u leh ilmahaaga si uu kaagala qaybgalo kulanka. ★ Waxay diyaarsanayaan cabasho, su'aal ama soo jeedin ku aadan barnaamijka waxbarashada ee shaqsiga ah oo qoraal ah kaas oo ay la wadaagayaan dugsiga ka hor kulanka IEP.	★ Waxaa la ogaysiinayaa waalidkawaalidiinta iyo/ama ardayda kulanka IEP iyo cida ka qaybgalaysa. (Faahfaahinta ka fiiri qaybta “ogeysiiska”) ★ Waxay go'aaminayaan goobta iyo goorta kulanka ee dhamaan la isku wada raacay. ❑ Waxay diyaarinayaan oo ay la sii wadaagayaan waalidiinta cabasho, soo jeedin iyo su'aallo qoraal ah oo ku aadan barnaamijka waxbarashada shaqsiga. ★ Wuxuu caruurtaada ku casuumayaa kulanka IEP, marka ay haboonaato, iyo had iyo goor marka laga hadlayo xiliga kala-guurka ee ilmahaagu ka wareegayo dugsiga sare ilaa. (Ka fiiri “Qeexdimaha” waxay tahay kala-guur)
INTA LAGU JIRO KULANKA IEP	★ Waxay ka qayb qaadanayaan kulanka IEP oo uu ka mid yahay: • Wadaaga macluumaadka ku saabsan meelaha ilmuhu ku fiican yahay iyo baahiyaha; • Caawinta samaynta ujeedooyinka sanadlaha ah iyo kuwa mustaqbalka dhow ee la cabiri karo; • Go'aan ka gaadhaan dugsiga waxbarashada gaarka ah ee haboon iyo adeegyada la xidhiidha ee ilmahaagu heli doono ★ Waxay ogolaansho siiyaan ilmahaaga si uu u helo waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha si ilmahaaga looga caawiyo ka qayb qaadashada horumarka manhajka guud (taas oo machnaheedu yahay in ardayda darajooyinka qaarkood wax bartaan). • Haddii aad diido inaad ogolaansho siiso hal adeeg, degmadu ma dafiri karto adeegyada kale ee ilmaha. • Haddii aad diido ogolaanshaha dhamaan adeegyada, degmadu maaha inay ku siiso “Waxbarashada dawliga ah ee bilaashka ah” (FAPE), ilmahaagu ma helayo dhowrista IDEA. (fiiri <i>qeexdimaha</i>) <i>public education</i>). • <i>IEP-ga hore oo kaliya</i>, waxaad fursad u haysataa in aad diiddo sixiixa mid ama in ka badan oo ka mid ah adeegyo tilmaaman	★ Waxaad natiijada qiimaynta la gorfayaan waalidiinta iyo su'aasha in ilmaahaagu ku haboon yahay ★ Haddii ilmahaagu ku haboon yahay, wuxuu u samaynayaa barnaamij waxbarasho shaqsi ah kaas oo ka hadlaya: • Baahiyaha iyo meelaha ilmuhu ku fiican yahay; • Ujeedooyin sanadle ah oo la cabiri karo iyo ujeedooyin mustaqbalka dhow ama bartilmaameed; • Waxbarasho gaar ah oo haboon iyo adeegyo la xidhiidha oo ilmahaagu inuu ku lug leeyahay manhajka guud; • Tixgelinaha kale ee ku salaysan baahiyaha ilmahaaga. ★ Waxay waalidiinta siiyaan ogeysiis hore oo qoraal ah oo ah ku talogalka dugsiga ee inuu bixiyo adeeg waxbarasho gaar ah ★ Waalidiinta wuxuu siinayaa koobiga kama dambaysta ah ee barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah xili aan ka dambayn 30 maalmood kadib kulan IEP. ★ Wuxuu xaqiijinayaa in barnaamijka waxbarashada gaarka ee ilmahaaga uu u gacan banaan yahay macalin kasta oo joogta ah iyo adeege kasta oo kale oo masuul ka ah waxbarista ilmaha
★ Dalabkawaalidiinta	❑ Dalabka dugsiga	★ Doonista dugsiga

	WAALIDIINTA	DUGSIGA DEEGAANKA
GORFAYNTA SANADLAHA AH	★ Waxay codsanaynaa koobi ka mid ah talo soojeedinta dugsiga ee barnaamika waxbarashada shaqsiga ah. ★ Waxay soo ururinayaan waraaqaha ilmaha ee dugsiga iyo warbixinaha kale ee laga yaabo inay wax tar u leeyihiin kulanka. ★ Waxay keeni karaan hal ama ka badan oo qof, haddii loo baahdo. ★ Waxay dib u eegayaan barnaamijka imika ee waxbarashada shaqsiga ah. ★ Waxay diyaarinayaan oo ay la sii wadaagayaan dugsiga degaanka wixii cabasho qoraal ah, su'aalo iyo soo jeedino ee ku aadan waxbarashada shaqsiga ah. ★ Haddii aad khilaafsan tahay IEP-da cunugaada, waxaad adeegsan kartaa hababka xallinta khilaafka si aad isugu daydid in aad xallisid khilaafka.. ❑ Waxay bixinayaan ogolaansho qoraal ah haddii ilmahaaga ay tahay in loo raro waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xidhiidha Ogolaanshahaaga looma baahna haddii ilmahaaga loo raray sababo la xidhiidha sharciga dugsiga oo uu jabiyeey oo qayb ka ah anshaxa dugsiga.	★ Wuxuu la xidhiidhayaa waalidiinta si ay uga qayb qaataan gorfaynta sanadka si la mid ah sida kulankii hore (bilowgii) ee IEP. ★ Waxay macluumaad ka ururinayaan horumarka ilmaha. ❑ Waxay diyaarinayaan oo ay la sii wadaagayaan waalidiinta wixii cabasho, su'aalo iyo soo-jeedin ah ee qoraal ah. ★ Kulanka gudihiisa, waxaan gorfaynaynaa barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah dibna way u eegayaan, haddii ay haboonaato. ★ Haddii, kulanka IEP kadib, qof walba aanu waafiqin waxyaabaha ku jira barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah, waxaa qoraal ahaan waalidiinta lagu sii ogaysiinayaa kulanka gorfaynta sanadlaha ah. ★ Wuxuu waalidiinta muddo 30 maalmood ah gudahood waalidiinta lagu siinayaa koobiga kama dambaysta ee barnaamijka waxbarashada shaqsiga ★ Wuxuu xaqiijinayaa in barnaamijka waxbarashada gaarka ee ilmahaaga uu u gacan banaan yahay macalin kasta oo joogta ah iyo adeege kasta oo kale oo masuul ka ah waxbarista ilmaha
★ Dalabkawaalidiinta	❑ Dalabka dugsiga	★ Doonista dugsiga

	WAALIDIINTA	DUGSIGA DEEGAANKA
DIB U QIIMAYN	★ Waxay ka qayb qaadanayaan dib u eegista macluumaadka ilmahaaga. ★ Waxay ka qayb qaadanayaan hanaanka dib u qiimaynta. ★ Waxaa laga yaabaa inay codsadaan qiimayn saa'id ah Qiimayntu waxay ka kooban tahay hawlo maraaxil kala duwan si loo cabiro hawl-karnimada ilmahaaga, horumarkiisa, curyaannaafonimada ama ku haboonaanta (Ka fiiri qeexdimaha wixii faahfaahin dheeri ah.) ★ Waxay ogolaansho qoraal ah siinayaan ama u diidayaana ogolaanshaha qiimaynta dheeriga ah. ★ Waxay gacan ka gaysanayaan bal in ilmuhu sii wadanayo ku haboonaanta adeegyada waxbarashada gaarka ah. ★ Waxay codsanayaan qiimayn ka horaysa xiligii caadiga ahayd ee saddexda sano ahayd haddii isbedel ku yimaad ilmaha.	★ Waxay waalidiinta ku casuumayaan inay ka qayb qaataan hawsha dib u qiimaynta. ★ Wuxu sharaxayaa hawsha dib u qiimaynta oo ay ka mid tahay xaq waalidku u leeyahay qiimayn saa'id ah oo go'aan looga gaadhayo in ilmahaagu ku sii haboon yahay. ★ Wuxuu waalidiinta sii siinayaa ogaysiis qoraal ah ku sahabsan dib u qiimaynta ilmahaaga. ★ Inaan helno ogolaansho qoraal ah haddii qiimayn cusubi daruuri noqoto amase haddii aad adiguba codsato. ★ Wuxuu siinayaa waalidiinta macluumaad ku sahabsan xubnaha shaqaalaha samaynaya qiimaynta ilmaha iyo noocyada qiimayneed , haddii ay jiraanba, ee la samaynayo. ★ Wuxuu fulinayaa kulan IEP kaas oo waalidiinta lagu casuumayo ★ Waalidiinta wuxuu siinayaa fursada ay go'aan kaga gaadhi lahaayeen bal in ilmahoodu uu ku haboon yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha. ★ Waalidiinta wuxuu siinayaa koobi ka mid ah warbixinta kooxda qiimaynta muddo 14 maalmood ah gudahood marka waalidku la kulmo dugsiga si loo falanqeeyo warbixinta.
★ Dalabkawaalidiinta	□ Dalabka dugsiga	★ Doonista dugsiga

	WAALIDIINTA	DUGSIGA DEEGAANKA
QIIMAYNTA WAXBARASHO EE MADAX BANAAN	✱ Dugsiga wuxuu ogaysiinayaa khilaaf kasta oo ka yimaad qiimaynta. ✱ Waxaa laga yaabaa inay codsadaan tiro koox qiimayneed oo madax banaan iyo shuruudaha qiimaynaha waxbarasho. Shuruudahan waxaa ka mid ah arimaha ay ka midka yihiin goobta, kharashka qiimaynta tabobarka iyo khibrada qofka samaynaya qiimaynta. ✱ Waxaa laga yaabaa inay helaan qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo ilmahaaga ah ilaa dugsigu fayl gareeyo cabasho nidaamka lacag bixinta ah si ay u tusiso in qiimayntoodu aanay haboonayn Cabashada lacag bixintu waa cabasho la xidhiidha ku haboonaanshaha ilmaha ee waxbarasho gaar ah ama helista waxbarasho gaar ah. (Ka fiiri “Qeexdimaha” dacwadaha cabashada nidaamka lacag bixinta).	✱ Wuxuu waalidiinta ogaysiinayaa xuquuqda qiimayn waxbarasho oo madax banaan haddii waalidku waafiqi waayaan qiimaynta dugsiga. ❑ Waxay waydiinayaan waalidiinta sababta ay u diideen qiimaynta dugsiga. (Lagaagama baahna inaad ka jawaabto codsigan.) ✱ Waxay macluumaad ka bixinayaan halka qiimayn waxbarasho oo madax banaan laga heli karo. ✱ Waxay bixinayaan qiimayn waxbarasho oo mamdax banaan ama waxay siinayaan waalidiinta ogaysiis hore. Ogaysiiskani wuxuu waalidiinta ogaysiinayaa in degmadu ay codsanayso dhagaysi dacwo lacag bixineed maxaa yeelay dugsiga degaanku wuxuu rumaysan yahay in qiimayntoodu sax tahay.
✱ Dalabkawaalidiinta	❑ Dalabka dugsiga	✱ Doonista dugsiga

CODSI TAAGEERO

Maxaan sameeyaa haddii ilmahayga dhibi ka haysato waxbarashada dugsiga?

Waxaa laga yaabaa:

- o Inaad la xidhiidhi macalinka si aad u gala hadasho danahaaga iyo inaad bixiso macluumaad waxtar yeelan kara;
- o Inaad codsato taageero; iyo
- o Attend a meeting to help determine if your child is suspected of having a disability.

Ka waran haddii macalinku ku soo war bixiyo in ilmahaygu uu dhib ku qabo waxbarashada dugsiga?

Waxaa laga yaabaa in dugsigu:

- o Kula soo xidhiidho si uu war kaaga helo;
- o Isku dayo istaatiijiyado kala duwan oo ilmaha wax loo barayo kadibna la qoro natiijada;
- o La adeegsado kooxda taageerada wax-ka-qabashada si loo keeno fikrado dheeri ah oo ilmahaaga wax lagu barayo isla markaana lagu qorayo natiijada; iyo/ama
- o In lagula soo xidhiidho si looga qayb qaato kulan lagu go'aaminayo bal in ilmahaaga lagu tuhmayo inuu qabo naafoimo.

Mar kasta oo aad ilmahaaga ku tuhunto naafonimo, waxaa laga yaabaa inaad codsato in ilmahaaga la qiimeeyo. Codsigan waxaa la yidhaa "Rifal/referral."

Qiimayntu waxay ka kooban tahay habab kala duwan oo loo soo ururinayo sida ilmahaagu u korayo iyo sida ilmuhu u baranayo ee uu shaqaynayo.

RIFARAL

Yaa ii samayn kara rifal (codsiga qiimaynta)?

Haddii adiga ama qof kale u malaynayo in ilmahaagu uu qabo naafoimo oo uu baahan

yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha:

- o Adiga oo waalidkii ah;
- o Shaqaalaha dugsiga; ama
- o Waaxda waxbarashada ee Ohio ama hay'ad kale oo dawli ah.

Haddii adigu, waalid ahaan, aad samaysid rifal:

- o Waxaa laga yaabaa inaad codsato in ilmahaaga la qiimeeyo oo la eegay naafonimada lagu tuhmay af ahaan ama qoraal ahaan. Waxaa lagu talinayaa in codsiga aad ku doonayso qiimayntu noqdo mid qoraal ah si aad u ogaato degdeggiimada jawaabta dugsiga.

Haddii shaqaalaha dugsiga, Waaxda Waxbarashada ee Ohio ama hay'ad kale oo dawli ahi ay samayso rifaralka (codsiga qiimaynta):

- o Waxaa kula soo xidhiidhi doona qof ka socda degmada.

Kadib marka codsiga la sameeyo iyo ka hor inta aanay qiimayntu bilaabmin:

- o Waa inaad bixisaa "ogaysiis hore oo qoraal ah" muddo 30 maalmood ah gudahood oo ka bilaabmaysa maalinta codsiga. Ogeysiiska hore ee qoraalka ahi wuxuu kuu sheegayaa laba midkood oo kala ah in dugsigu talaabo la xidhiidha ku haboonaanta ilmahaaga ee waxbarasho gaar ah ; ama in dugsigu uu diidan yahay inuu wax talaabo ah ka qaado su'aashaada, labada goorbaana waxaa lagu sharaxayaa go'aanka degmada.
- o Haddii dugsigu tuhmo in ilmahaagu qabo awood darro oo uu u baahan yahay qiimayn, waa in degmadu heshaa ogolaanshaaga oo qoraal ah si loo qiimeeyo.
- o Haddii aad diido inaad ogolaansho siiso ilmahaaga in la qiimeeyo waxaa laga yaabaa in dugsigu isticmaalo hababk "dhexdhexaadinta" ama " nidaamka lacag bixinta" si ay u helaan ogolaanshaha qiimaynta ilmaha. (Ka fiiri sharaxaada erayadan qaybta "Qeexdimaha".)

Shuruudaha in ilmuhu ku haboonaado wax barasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha waxaa lagu xusay naafonimada ku qoran sharciga federaalka iyo kan gobolka. Naafonimada waxaa lagu qeexay qaybta dokumentiga ee ciwaankeedu yahay, “Qeexdimaha Ereyada Naafonimada.”

OGAYSIISKA

Muxuu yahay ogaysiiska dhowrista nidaamku?

Sharcigu wuxuu doonayaa in waqtiyada qaarkood waalidiinta la siiyo “ogaysiiska dhowrista nidaamka”. Ogaysiiskani wuxuu tilmaamayaa xaq aad u leedahay inaad u hesho ilmahaaga naafo ka ah waxbarasho dawladeed oo bilaash ah waxaanu kugu hanooniya samaynta xuquuqdan. Buugan aad hayso ee, Yaa leh IDEA-da?, wuxuu yahay ogaysiis dhowris nidaam. Sidoo kale buugan waxaa ku qoran meelaha aad la xidhiidhi karto haddii aad u baahan tahay taageero. (Sidoo kale eeg qaybta “Sida loo Xalinayo Khilaafaadka ama Cabashooyinka.”)

Goorma ayay tahay in dugsigu I siiyo ogaysiiska dhowrista nidaamka?

Dugsigu waa inuu ku siiyaa koobi ah Yaa leh IDEA? hal mar oo kaliya sanadkii. Waa in lagu siiyaa koobi dheeraad ah marka ay yimaadaan xaaladahan soo socda:

- Imaatinkaaga hore, badanaa waxaa loo yaqaan codsiga “bilow” ah;
- Marka u horaysa ee sanad-dugsiyeedka marka aad dacwad ka fayl garayso Waaxda Waxbarashada ee Ohio (Fiiri qaybta “Cabashada”);
- Marka u horaysa ee aad fayl garayso cabashadaada nidaamka lacagta ee sanad dugsiyeedka hore;
- Marka la bedelo goobta waxbarasho ee ilmahaaga (waxaa inta badan la yidhaa “meelaynta” ilmaha) sababo la xidhiidha anshaxa ama edebka oo dhan ka ah ilmahaaga
- Marka aad codsato.

Dugsigu wuxuu dhigi karaa buugan *Yaa leh IDEA?* internetka haddii uu bog ku leeyahay. Laakiin dugsigu waa inuu sii wadaa siinta

waalidiinta koobi daabacan oo ogaysiiska dhowrista nidaamka waqtiyada kor ku xusan.

Muxuu yahay ogaysiis hore oo qoraal ah?

Waxaad macluumaadka ku helaya, qoraal ahaan, muddo macquul ah gudahood ka hor inta aanu dugsigu soo jeedin wax talaabo ah oo la xidhiidha in ilmahaaga ay ku haboon tahay waxbarashada gaarka ahi iyo in kale. Waxaad sidoo kale heli doontaa warbixino qoraal ah marka degmadu diido inay qaado wax talaabo ah oo la xidhiidha ilmahaaga oo ku haboonaada waxbarasho gaar ah iyo helista adeega waxbarashada gaarka ah. Macluumaadkaas ayaa la yidhaa ogaysiis hore oo qoraal ah..

Dugsigu waa inuu sidoo kale kugu siiyaa qoraal hore oo ogaysiis ah:

- Muddo 30 maalmood ah gudahood; ama
- Ka hor meelaynta ilmahaaga ee la xidhiidha codsiga.

IEP-ga ilmahaaga ayaa noqon karta ogaysiiska hore ee qoraalka ah haddii aanad diidin IEP. Haddii aad diido IEP, dugsiga waa inuu ku siiyaa qoraal ogaysiis ah oo gaar ah ka hor inta aan la fulin IEP-ga ilmahaaga.

Ogaysiiska hore ee qoraalka ahi waa inuu :

- Sharaxaa talaabooyinka dugsiga uu soo jeedinayo ama waa inuu diidaa;
- Waa inuu sharaxaa sababta degmadu ama hay'addu u soo jeedinayso ama u diidayso inay talaabo qaado;
- Waa inuu sharaxaa doorar kale kuwaas kooxda IEP ay tixgalisay iyo sababaha loo diiday doorarkan;
- Waa inuu sharaxaad ka bixiyaa nidaam kasta oo qiimayneed, diwaan ama warbixin kasta oo dugsigu u isticmaalay inuu ku saleeyo go'aankiisa;
- Waa inuu sharaxaad ka bixiyaa qodobada kale ee keenay go'aanka dugsiga;
- Ku daraa macluumaad odhanaya in xuquuqdi waalidiinta u dhowray nidaamka dhowristu. (Haddii ogaysiiska hordhaca ah ee qoraalkani aanu ahayn codsigii u horeeyay ee ilmahaaga, dugsiga loogama baahna inuu keeno koobi kale oo ah ogaysiiska dhowrista nidaamka ee Yaa leh IDEA?), si kastaba ha ahaatee,

degmada ayaa kuu sheegi doonta sida loo
helayo koobi buugan ah ; iyo

o aqoonsiga ilaha aad la xidhiidhi karto si aad u
fahanto xuquuqdaada ogaysiis hore oo qoraal
ah.

Ogeysiiska hore ee qoraalka ah ee waalidiintu
waa inuu ku qornaadaa luuqada ay fahmi karaan
dadka caadiga ahi. Waa in degmadu ogaysiiska
kugu siisaa afkaaga hooyo ama hab kale oo
wada xidhiidh, iyadoo suurtoagal noqon wayda
mooyaane. Haddii luuqadaada ama habka kale
ee wada xidhiidh aanu ahayn mid qoran, waa in
dugsigu uu qaado talaabooyin ogeysiiska loogu
turjumayo af ahaan ama luuqad kale oo qoran si
aad u fahanto ogeysiiska. Waa in dugsigu uu
hayaa diiwaan qoran oo ah inay talaabooyinkan
qaadeen.

Haddii aanad dugsiga ku raacin macluumaadka
ku qoran ogaysiiska, eeg qaybta “ Sida loo
xaliyo Khilaafaadka ama Cabashooyinka”.

Ma dooran karaa inaad ogaysiisyada ku helo iimay ahaan (e-mail)

Haa, waa dooran kartaa inaad ogeysiisyada ku
hesho iimayl ahaan haddii dugsigu leehay
doorkaa.

WAALIDIINTA KORSADA ILMO AANAY DHALIN

Waa maxay waalid korsanaya ilmo aanu dhalin?

Waalid korsanaya ilmo aanu dhalin waa shaqsi
laga yaabo inuu ilmo u metelayo dhamaan
arimaha la xidhiidha naafonimada ee ku
taxaluqa ku haboonaanta waxbarashada gaarka
ah iyo helista waxbarashada gaarka ah.

Dugsiga ayaa magacaabaya waalidiintan marka
ay dhacaan xaaladahan soo socda:

- o Marka waalidiinta la garan waayo;
- o Marka dugsigu, kadib dedaal badan uu waayo
waalidiinta;
- o Marka ilmahu yahay cidlaawe dhalinyar ah;
ama
- o Marka ilmuhu darbi jiif dawladu gacanta ku
hayso.

FIIRO: Waalidiinta ilmaha ah darbijifka waxaa
laga yaabaa inay magacaabaan xaakinada dusha
kala socda daryeelka ilmaha halkii uu dugsigu
ka eegi jiray, ilaa iyo inta waalidiinta korsanayaa
ay buuxinayaan shuruudaha lagu xusay qodobka
koowaad iyo afraad ee liiskan soo socda:

Waalidiinta korsanaya ilmo aanu dhalin waa
inuu noqdaa qof:

- o Waaxda Waxbarashada ee Ohio ama hay’ad
kale oo ku lug leh daryeelka iyo waxbarashada
ilmaha, kuwaas oo ay ka mid yihiin
hay’addaha adeega caruurta. (Waxaa jira
qodobo ka reeban heshiiskan marka
waalidiinta korsanaya ilmaha ee ku
meelgaadhka ah loo magaacaabo ilmo darbijif
ah);
- o Aan lahayn dano shaqsi iyo kuwo mihnadeed
oo khilaafaya danta ilmaha uu metelayo;
- o Uu leeyahay aqoonta iyo xirfada uu si ku filan
ugu metelayo ilmaha; iyo
- o Uu si guul ah ku dhameeyay tabobarka
gobolku aqoonsan yahay ee noqoshada waalid
korsada ilmo aanu dhalin.

Qof gaadhay sideed iyo toban jir wuu codsan
karaa inuu noqdo waalid korsada ilmo aanu
dhalin.

Waalidiinta korsanaya ilmuhu wuxuu ilmaha
meteli karaan dhamaan arimaha la xidhiidha ku
haboonaantiisa waxbarashada gaarka ah iyo
adeegyada la xidhiidha. Waalika korsanaya
ilmaha waa in loo magacaabaa sida ugu
dhaqsaha badan ee suurtoogalka ah waana in aanu
ka dambayn 30 maalmood maalinta la
go’aamiyo in ilmuhu u baahan yahay waalid
korsada.

Dugsiga ilmaha, gudida wadanka ee arimaha
gaabisnimada maskaxda iyo naafonimada
korniika, ama hay’ad waxbarasho kasta oo kale
waxaa laga yaabaa inay magacowdo waalid
korsada haddii dugsigu codsado dhinacyaduna
isku raacaan.

OGOLAANSHAHA

Muxuu yahay ogolaanshuhu?

Ogolaanshaha macnahiisu waxa weeyi:

- In si buuxda laguugu ogaysiiyay dhamaan macluumaadka lagama maarmaanka u ah gaadhista go'aanada eek u sahabsan hawlaha la soo jeediyay. Macluumaadkan waa in laguugu siiyaa afkaaga hooyo ama qaabka kale ee wada xidhiidh ee aad isticmaasho.
- Waa inaad qoraal ahaan ku sheegtaa inaad akhriday oo aad fahantay. Ogolaanshaha aad saxeexday waa inuu sharaxaa hawsha la soo jeediyay. Sidoo kale waa inuu sharaxaa cida helaya diiwaankan.
- Waa inaad fahantaa in bixinta ogolaanshuhu ay tahay arin mutadawacnimo ah taas oo aad mar walba ka noqon karto .
- Waa inaad fahantaa in haddii aad ka noqoto ogolaanshahaaga, in ka noqoshadu aanay soo celinayn hawl qabsoontay kadib markii aad ogolaanshaha bixisay laakiin ka horaysay laalista ogolaanshaha.

Goorma ayuu dugsigu helayaa ogolaanshahayga?

Dugsigu waa inuu sameeyaa dedaal macquul ah si uu u helo ogolaanshahaaga:

- Ka hor inta aan qiimaynta hore bilaabmin;
- Ka hor inta aan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha la bixin marka u horaysa;
- Ka hor inta aanay qiimayni bilaabmin, haddii tijaabin cusub la bilaabo taas oo qayb ka ah qiimaynta
- Ka hor inta aanu jirin isbede ku yimaad meesha adeega (Wixii tafaasiil ah fiiri *Taxanaha Ikhtiyaarka Doorarka Meelaynta* ee ku qoran qaybta “Qeexdimaha”).Waxaa jira wax ka reeban: dugsiga loogama baahna inuu helo ogolaanshahaaga haddii ilmahaaga la kaxaynayo goobta uu imika degan yahay sababo la xidhiidha anshaxa awgeed (fiiri qaybta “anshaxa”).

Dugsigu waa inuu hayaa diiwaanka isku daygooda inay helaan ogolaanshahaaga.

Marka aad bixiso ogolaanshahaaga qiimaynta koowaad ee ilmaha, ogolaanshaha ma siinaysid degmada ogolaansho ah inay u bilowdo waxbarasho gaar ah iyo adeega la xidhiidha ilmahaaga.

Maxaa dhacaya haddii aanan ogolaan qiimaynta u horeysa ee ilmahayga?

Dugsigu waa inuu sameeyaa dedaal macquul ah oo uu ku helayo ogolaanshahaaga qiimaynta u horaysa si go'aan looga gaadho in ilmahaagu yahiiin “ilmo naafo ah.” (“Ilmo waa ilmo naafo ah “ waa afka sharciga taas oo si fudud marka loo dhigo noqonaysa in ilmuhu leeyahay naafonimo ku keenaysa isaga ama iyada inuu u baahdo adeeg waxbarasho oo gaar ah si ay u bartaan. Dhamaan caruurta curyaamiinta ahi uma baahna ama ma istaahilaan waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xidhiidha.)

Haddii aanad ogolaansho siin qiimaynta u horaysa ee ilmahaaga, dugsigu waxaa laga yaabaa inuu:

- Fayl gareeyo dacwada "hawsha lacag bixinta". (Fiiri qaybta “ Qeexdimaha”).
- Codsado inaad timaad dhegaysi dhexdhexaadin oo aad la gasho dugsiga oo ay samaynayso Waaxda Waxbarashada Ohio. Ujeedada dhexdhexaadintu waa in dugsiga iyo adigu aad ku heshiisaan waxa la qabanayo si ilmahaaga looga caawiyo inuu wax barto.
- Go'aansado joojinta sii daba socoshada qiimaynta. Marka sidani dhacdo, waxaa laga yaabaa in dugsigu u tixgeliyo ilmahaagu inuusan ku haboonayn waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Maxaa dhacaya haddii aanan ogolaansho u siin dugsiga degmada ama hay'addaha kale ee dawliga ahi inay sii yaan ilmahayga waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha?

Haddii qiimaynta hore tusiso in ilmahaagu yahay ilm,o naafo ah, dugsiga ayaa kaala hadli doona siinta ilmaha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha Dugsiga waa inuu sameeyo dedaal macquul ah oo uu ku doonayo ogolaanshahaaga in ilmaha la siiyo waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Haddii aad jawaabi waydo, ama haddii aad diido marxaladan inaad ogolaansho siiso dugsiga si waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha loo siiyo ilmahaaga, waxaa laga yaabaa inuusan dugsigu fayl garayn cabasho dacwad lacag bixineed oo kaa dhan ah. Sidoo kale waxaa laga yaabaa inuusan dugsigu ku

waydiisan inaad dugsiga kala qaybgasho dhexdhexaadin heer gobol ah si aad ugu raacdo in la bixiyo waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Haddii aad diido inaad degmada siiso ogolaansho waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha, ama haddii aanad ka soo jawaabin codsiga ogolaansha, dugsiga degmada loogama baahna inuu siiyo ilmahaaga waxbarasho dawli ah oo bilaash ah The district also is not required to provide your child with an IEP. intaa waxaa dheer:

- Dugsiga meel ka dhac ku samayn mayo rabitaanka in ilmahaaga loo diyaariyo waxbarasho dawli oo bilaash ah haddii ay ilmahaaga uu siin waayo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha; iyo
- Dugsiga degmada loogama baahna inuu isku yeedho kulan kooxda IEP ama in loo dejiyo ilmahaaga barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah.

Maxaa dhacaya haddii aan diido qayb ka mid ah adeega laakiin aan ogolaado qayb ka mid ah barnaamijka waxbarashada shaqsiga?

Dugsi ama hay'addaha kale ee dawliga ahi lagama yaabo inay u isticmaalaan diidmadaada inaad ogolaansho bixiso hal adeeg ama hawl inay kuu diidaan adiga ama ilmahaaga adeegyada kale ama hawlaha kale ee ilmahaagu istaahilo.

Inta ku saabsan IEP-da hore oo keliya, waxaad fursad u leedahay in aad diidid in aad ogolaatid hal adeeg ama ka badan, kaddibna cunugaada waxaa la siin doonaa adeegyo kale ee ku jira IEP-da.

Maxaa dhaca haddii aan rabin in aan ogolaado adeeg khaas ah ama hawl muddada fiirinta sannadka IEP-da cunugeyga?

Dhamaan IEP-yada ka dambeeyo IEP-da hore, haddii aadan waafaqsaneyn in loo baahan yahay in la bixiyo adeeg khaas ah, waa in la xalliyo khilaafkaas iyada oo la adeegsanaayo hababka xallinta khilaafka.

Maxaa dhaca haddii aan baddalo fikradeyda oo aan rabo in aan la noqdo ogolaashadeyda ku saabsan waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira?

Waad la noqon kartaa ogolaashada aad bixisay, waxaadna cunugaada ka saari kartaa dhamaan waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira. La noqoshada ogolaashada waa in ay ahaato mid qoran. Marka dugsiga dagmada uu qoraal ahaan helo la noqoshadaada ogolaashada, waxaa dhixi doona waxa soo socda:

- Dugsiga dagmada wuxuu sii wadi doonaa in uu hirgeliyo IEP-da cunugaada sida ay u qoran tahay ilaa dugsiga dagmada uu qoraal ahaan kuu siiyo ogeeysiis qoran;
- Ogeeysiiska hore ee qoran waxaa ka mid ah macluumaadka soo socda:
 - Baahida waxbarasho ee canuga oo kooban.
 - Dhamaan taageerada iyo adeegyada aysan carruurta dib u heli doonin oo kooban. iyo
 - Xaqiiqda ah in xuquuqda iyo difaaca la siiyo carruurta itaalka darán ee la siiyo carruurta laga saaro waxbarashada khaaska ah; iyo
- Marka dugsiga dagmada ku siiyo ogeeysiis hore oo qoran, dugsiga dagmada ma hirgelin doono IEP-da cunugaada, wuxuuna cunugaada ula dhaqmi doonaa sida cunug kastae oo aan qabin itaal darri. Tan macnaheeda waxay tahay:
 - In dugsiga dagmada uusan sameeyn doonin dib u qiimeynta saddaxda sanno;
 - In dugsiga dagmada uusan qaban doonin shirarka IEP; iyo
 - In cunugaada loola dhaqmi doono sida arday ku jira waxbarashada caadiga xagga dhamaan ujeedooyinka, kana mid ah dishibiliinka iyo imtixanaadka..

Haddii aad go'an ku gaartid in aad la noqotid ogolaashadaada, lama noqon kartid ogolaashada la xariirta qeyb ka tirsan IEP-da cunugaada. Waa in aad la noqotid ogolaashada IEP-da oo idil. Haddii aad khilaafsan tahay qeyb ka tirsan IEP-da cunugaada oo keliya, markaas waxaad raaci doontaa hababka xallinta khilaafka si aad u xallisid khilaafka. (Fiiri "Sida loo Xalliyo Khilaafaadka iyo Arrimaha.")

Haddii aan la noqdo ogolaashada waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira, cunugeyga xaq ma u yeelan doonaa in

la siiyo “waxbarashada dadweynaha lacag la’aanta ah ee ku habboon” (FAPE)??

Maya. Dugsiga dagmada wuxuu cunugaada ula dhaqmi doonaa sida ay ula dhaqmaan cunug kasta oo aan qabin itaal darri, mana loo qabsan doono in uu cunugaada siiyo “waxbarashada dadweynaha lacag la’aanta ah ee ku habboon.”

Haddii aan la noqdo ogolaashadeyda, dugsiga dagmada miyuu diiwaanka waxbarashada cunugeyga ka saari doonaa dhamaan tixraaca in cunugeyga uu qaatay waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira??

Degmada iskuulka lagama doonayo in ay wax ka baddasho diiwaanka waxbarasho ee ardayga si looga saaro wixii tilmaamaya in canugu uu qaato waxbarasho khaas ah iyo adeegyada la xiriira la noqoshada oggolaanshaha awgeed.

Marka aan la noqdo ogolaashadeyda, ma baddali karaa fikradeyda, mana codsan karaa waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira??

Haa. Haddii aad baddashid fikradaada, cunugaada waxaa loola dhaqmi doonaa sida tixraac ku cusub waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira. Dagmada waxay raadin doontaa ogolaashadaada si ay u fuliso qiimeynta bilowga ah, waxayna ku dhaqaaqi doontaa qiimeynta bilowga ah ka hor inta aysan cunugaada siinin adeegyada.

Maxaa dhacaya haddii aanan ogolaan dib u qiimaynta ilmahayga?

Dugsiga ka masuulka ah bixinta waxbarasho dawladeed oo bilaash ah oo ilmahaaga curyaannaafoka ah u diyaara waa inuu sidoo kale ku dedaalaa inuu helo ogolaanshahaaga marka ilmuhu u baahan yahay dib u qiimayn. (Fikradan waxaa si aad ah loogu faahfaahinayaa qaybta “dib u qiimaynta”).

Haddii aanad jawaabin ama haddii aad diido inaad ogolaanshahaaga siiso ilmahaaga in dib loo qiimeeyo, dugsigu waxaa laga yaab:

- o Inuu hore ugu sii socdo dib u qiimaynta isagoo muraajicaynaya macluumaadka dugsigu hore uga hayay ilmahaaga, oo aan samaynin wax tijaabo ah oo cusub;

- o Ask that you come to mediation with a state-appointed mediator to try to resolve the issue;
- o Inuu codsado dhegaysiga dacwad halkaas oo sarkaal uu go’aan ka gaadhi doono bal in ilmahaagu u baahan yahay dib u qiimayn; ama
- o Inuu go’aansado inuu faraha ka qaado dib u qiimaynta mMarka arrintu sidan tahay, waxaa laga yaabaa in degmadu u tixgeliso ilmahaaga inuusan ku haboonayn adeegyadan.

Maxay tahay shuruuda ku xidhan in ogolaansho loo helo caruurta darbijiiifka ah?

- Qiimaynta u horaysa oo kaliya: Haddii ilmuhu yahay darbijiiif oo aanu la noolayn waalidkiisa, dugsiga lagama rabo inuu ogolaansho ka helo waalidkiisa qiimaynta u horaysa si loo go’aamiyo bal in ilmuhu yahay ilmonaafka ah:
- o Dedaal macquul ah kadib, dugsiga degmadu heli waayay waalidiinta ilmaha;
 - o Xuquuqda waalidiinta ilmaha la laalay iyadoo la raacayo sharciga gobolka;
 - o Haddii la raaco qaanuunka gobolka, xaakin uu waalidiinta ka qaaday gaadhista go’aanada waxbarasho ee ilmaha oo la siiyay qof kale xuquuqda ogolaanshaha qiimaynta.

Goorma ayaa qiimaynta ama hawsha dib u qiimaynta ogolaanshaheeda aan loo baahnayn?

Ogolaanshahaaga looma baahna:

- o Marka dugsigu dib u eegayo macluumaadka uu markii hore soo ururiyey ee qaybta ka ahaa qiimaynta ama dib u qiimaynta; ama
- o Marka dugsigu uu tijaabinayo ama qiimaynayo dhamaan caruurta, haddii aan loo baahan qof walba ogolaanshihiisa.

Maxaa dhacay haddii aan ilmahayga guriga wax ku baro ama aan ku daro dugsi gaar loo leeyahay oo kharashka iska bixiyo oo kadibna:

- ***Aanan siin ogolaansho qiimaynta u horaysa ama dib u qiimaynta ilmahayga***
- ***Aanan ka jawaabin codsiga la igu waydiisanayo ogolaansho?***

Haddii ilmahaaga aad guriga wax ugu dhigto ama aad ku darto dugsi gaar loo leeyahay oo aad kharashkiisa qabto, dugsigu:

- o Wuxuu fayl garayn maayo dhegaysiga dacwada cabasho oo kaa dhan ah ama wuxuu

ku waydiin inaad kala qaybgasho
dhexdhexaadin gobolku isku-duwayo oo lagu
raabo aqbalkaaga in ilmaha la qiimeeyo ama
dib loo qiimee;

- Loogama baahna dugsiga inuu ilmaha u
tixgeliyo adeegyadan ; iyo
- Waa in la sameeyaa dedaal macquul ah oo
lagu helayo ogolaanshahaaga waana in la
hayaa diiwaan tusinaya dedaalka dugsiga ee
inuu helo ogolaanshahaaga
- Loogama baahna dugsiga inuu ilmaha u
tixgeliyo adeegyadan ; iyo
- Waa in la sameeyaa dedaal macquul ah oo
lagu helayo ogolaanshahaaga waana in la
hayaa diiwaan tusinaya dedaalka dugsiga ee
inuu helo ogolaanshahaaga

QIIMAYN

Waa maxay qiimayni?

Qiimayntu waa hab lagu ururiyo xog wax ka
taraysa in la go'aamiyo in ilmahaagu yahay ilmo
qaba naafoimo. Waxay sidoo kale kaa caawin
doontaa in go'aan laga gaadho baahida
waxbarasho.

Sababta qiimaynta ilmahaagu waa :

- in la helo sawir buuxa oo ah awooda
ilmahaaga taas oo bar bilow u noqonaysa
qorshaynta adeegyada waxbarasho. Waxaa ka
mid ah qiimaynta sawir guud oo muujinaya
sida ilmahaagu aqoon ahaan wax u baranayo;
- In la soo jeediyo talooyin ku sahabsan
hababka loo dabooli karo baahiyaha
waxbarasho ee ilmaha; iyo
- In go'aan laga gaadho bal in ilmahaagu u
baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo
adeegyada la xidhiidha.

Yaa codsan kara qiimaynta hore ee lagu ogaanayo bal in ilmahaagu yahay ilmo naafo ah?

Adiga oo waalidiinta ah, Waaxda Waxbarashada
ee Ohio, ama hay'ad kale oo dawli ah ayaa laga
yaabaa inay codsato qiimaynta hore si loo
ogaado bal in ilmahaagu yahay ilmo naafo ah.

Muddo 30 maalmood ah gudahood marka aad
hesho codsiga qiimaynta hore, dugsigu wuxuu:

○ Heli doonaa ogolaanshaha qiimaynta hore;
ama

○ Kuu soo diri doonaa ogaysiis qoraal ah oo
sheegaya in dugsigu aanu ku tuhunsanayn
ilmahaagu inuu leeyahay naafoimo oo anay ku
samaynayn qiimayn.

Goorma ayuu ilmahaagu u baahan yahay qiimayn?

Wuxuu ilmahaagu qiimayn u baahan yahay
marka dugsiga uu galo tuhun ah in ilmahaagu
qabo naafoimo.

Haddii ilmahaagu uu horey u qaadanayay
waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada al
xidhiidha, degmadu waxay ku samaynaysaa
qiimayn si loo habsado in ilmahaagu uu wali ku
haboon yahay waxbarasho gaar ah iyo
adeegyada la xidhiidha iyo si go'aan looga
gaadho bal in adeegyada ilmahaagu imika helaa
inay yihiin kuwo haboon.

Maxay yihiin talaabooyinka lagu dhamaystirayo qiimayntu?

Deegaanka dugsigu wuxuu heli doonaa
ogolaanshahaaga si uu u sameeyo qiimayn,
qiimayntuna waxay ku dhamaan doontaa muddo
aan ka badnayn 60 maalmood oo ka bilaabmayso
maalinta aad siiso ogolaanshaha.

Marka aad bixiso ogolaanshahaaga, adiga iyo
dugsigu waxaad samayn doontaan qorshe
qiimayneed.

Qiimaynta ilmahaagu:

- Waa inay isticmaashaa habab iyo hawlo kala
duwan si loo ururiyo macluumaadka ku
sahabsan korniinka ilmahaaga, barashaddiisa,
iyo sida uu shaqaynayo. Mid ka mid ahi
hababkan ayaa ah in la isticmaalo
macluumaadka aad adigu bixiso;
- Mikiyaas ama cabir kaliya ha u isticmaalin
habka kaliya ee aad go'aan uga gaadhayso in
ilmahaagu yahay ilmo naafo ah iyo in
barnaamijka waxbarashada ee ilmahaagu
yahay mid haboon ;
- Isticmaal tijaabooyin lagu kalsoon yahay
kuwaas oo muujin kara ilaa xadka ilmaha
garashaddiisa, dhaqankiisa, xaaladiisa jidh iyo

heerkiisa korniinku ay ku lug leeyihiin naafoimadiisa;

- o Adeegso qalab qiimayneed oo aan dheeli ku jirin: Si kale haddii loo dhigo, waana in aanu noqon hab ilmahaaga aad u takooraya, iyadoon la eegayn dhaqanka ilmaha, isirkiisa iyo naafoimadiisa;
- o Adeegso macluumaad saldhig ah ee waalidiintaagu ku siiyay. Tan waxaa ka mid noqon kara warbixinaha ka imanaya aqoonyahanada ka baxsan dugsiga;
- o Soo ururinta macluumaadka waxtark u leh caawinta hormarka ilmahaaga ee manhajka gud, ama caruurta aan gaadhin dugsiga, inay ka qayb qaataan hawlaha maalinlaha ah ee da'dooda;
- o Ku darista macluumaadka loogu talagalay inay muujiyaan baahiyaha waxbarasho ee mucayinka ah, maaha kaliya in ay cabiraan maskax badnaanta/yaraanta ilmaha.
- o U adeegso tijaabooyinka iyo qiimaynaha kaliya ujeedooyinka loogu talo galay ee ay kalsoonida ku leeyihiin; iyo
- o Ku dar tijaabooyin iyo qiimayno uu bixinayo aqonyahan tabobaran oo isticmaalaya tilmaamaha ciddii tijaabada lahayd.

Qiimayntu waa inay qiimaysaa dhamaan dhinacyada ku taxaluqa naafonimada ilmaha, oo ay ku jiraan, haddii ay haboon tahay, kuwan soo socda:

- o Caafimaadka;
- o Aragtida;
- o Maqalka;
- o Korniiinka maskaxda iyo bulshada;
- o Garashada guud;
- o Dedaalka aqoonta;
- o Awooda xidhiidha (dhegaysiga, hadalka iyo qoraalka);
- o Awooda dhaqdhaqaaqa (awooda u baahan dhaqdhaqaaqa iyo xidhiidhka); ama
- o Hibada, heerka guusha, ama qodobada kale ee marka ilmahu leeyahay ceebo saamaynaya dareenka, isku .

Waxaa laga yaabaa inaad codsato in qaybo kale la qiimeeyo oo ay qayb ka noqdaan qiimaynta guud ee ilmaha.

Dhamaan qaybaha qiimaynta ee adiga iyo dugsigu aad isku raacdeen markii aad samaysee qorsha qiimaynta, ee uu ka midka yahay qiimaynta caafimaadka, ayuu dugsigu lacag la'aan idinku siin. Haddii adiga iyo dugsigu aydaan isku raaci karin dhamaan dhinacyada qiimaynta, waxaa laga yaabaa inaad bilowdo inaad qaado talaabooyin aad ku xalinayso khilaafka idin dhex yimid dugsiga. (Fiiri qaybta " Xalinta Khilaafaadka iyo Cabashooyinka")

Maxaa dhacaya marka qiimayntu dhamaato?

Marka dhamaan qaybaha qiimayntu dhamaadaan, kooxda IEP ama aqoonyahanada kale ee khibrada leh, marka ay haboonaato, waa inay:

- o Dib u eegaan natiijada qiimaynta; oo
- o Ay diyaariyaan warbixinta kooxda qiimaynta. Warbixintu waxay soo koobaysaa macluumaadkii la soo ururiyey intii la waday qiimaynta.

Koox aqoonyahano khibrad leh iyo adiga , waalidiinta, ayaa go'aan ka gaadhi doona bal in ilmahaagu uu yahay ilmoo naafo ah.

Haddii ilmahayga ay dhibi ka haysato akhriska ama xisaabta, miyaa ilmahayga loo tixgelinayaa ilmo naafo ah (awood daro)?

Kooxdu u tixgelin mayso ilmahaaga inuu yahay ilmo qaba naafoimo haddii sababta kaliya ee ilmahaagu la jihaadayaa tahay:

- o Isaga/iyada oo aan helin tacliinta aasaasiga ah ee wax akhrinta;
- o Aanu helin ilmuhu tacliinta xisaabeed oo haboon; ama
- o Has limited ability to use the English language. This also is called "limited English proficiency" (LEP).

Sidee bay kooxdu u go'aaminaysaa in ilmahaygu uu leeyahay naafonimo iyo in kale?

Marka la go'aaminayo bal in ilmahaagu uu leeyahay naafonimo khaas ah oo dhinaca waxbarashada ah , kooxdu :

- o Waxaa laga yaabaa inay isticmaalaan hab ku salaysan jawaabta ilmuhu ka bixiyo habab waxbaris ee kala duwan ee ay daraasaduhu muujiyeen inay ku haboon tahay caruuraha ilmahaaga da'diisa iyo derajadiisa ah;

- o Waxaa laga yaabaa inay isticmaalaan nidaamyada kale ee daraasaduhu muujiyeen inay guulaysteen; iyo
- o Loogama baahna inay tixgeliyaan bal inuu jiro kala duwanaansho u dhexeeya garashada ilmaha iyo ku guulaysashaddiisa afkaarta hadalka, afkaarta qoraalka, akhriska, fahanka waxa la maqlay iyo waxa la akhriyayo iyo xalinta masalooyinka xisaabta.

Muxuu yahay waqtiga lagu ogaanayo in ilmahaagu uu yahay ilmo naafo ah?

Qiimaynta hore: Qiimaynta hore waa in:

- o lagu fuliyaa muddo 60 maalmood ah gudahood marka la helo ogolaanshahaaga qiimaynta
- o Waa inay ka koobnaataa hawlo go'aan looga gaadhayo bal in ilmahaagu uu yahay ilmo naafo ah iyo in lago'aamiyo baahida waxbarasho ee ilmaha.

KA REEBAN: Qiimaynta u horaysa looma baahna in lagu dhameeyo 60 maalmood haddii:

- o Aanad si joogto ah ilmahaaga u keenin caruurtaada qiimaynta; ama
- o Ilmahaagu iska diwaangaliyo dugsii cusub muddo 60 maalmood gudahood ah kadib marka aad bixiso ogolaanshaha ee dugsigii hore ee ilmahaagu aanu go'aamin in ilmahaagu yahay ilmo naafo ah. Tani waxay dhici doontaa kaliya haddii:
 - Dugsiga cusubi uu samaynayo horumar la taaban karo oo dhinaca dhamaystirka qiimaynta ah; iyo
 - Adiga iyo dugsiga cusubi aad isku raacdeen waqti mucayin ah marka qiimaynta la dhameeyo.

Ka fiiri qaybta “ Bedelida” wixii faahfaahin ah.

Baadhista: Baadhista fudud ee ardayga uu baadho macallin ama khabiir u go'aamiyo istaatiijiyado wax baris oo aad ilmahaaga ku barayso manhajka loo tixgelin maayo qiimaynta lagu go'aaminayo in ilmahaagu uu ku haboon yahay waxbarashada gaarka iyo adeegyada la xidhiidha

Warbixinta Kooxda Qiimaynta: Dugsiga ayaa ku siin doona koobi ka mid ah warbixinta kooxda ka hor kulanka barnaamijka

waxbarashada shaqsiga, laakiin aan ka badnayn 14 maalmood oo ka bilaabmayso maalinta la ogaado in ilmahaagu ku haboon yahay.

DIB U QIIMAYN

Waa maxay ujeedada dib u qiimaynta?

Ujeedada dib u qiimayntu waa in go'aan laga gaadho bal haddii ilmahaagu sii qabo naafoimo iyo in go'aan laga gaadho baahida waxbarasho ee ilmahaaga

Macluumaadka la soo ururiyo dib ayaa loo eegi doonaa waxaana loo isticmaali karaa in go'aan lagu sameeyo:

- o Haddii cunuga uu usii baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira; iyo
- o Haddii wax ku daris ama isbedel loogu baahdo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira si cunugaaga ugu ogolaato in uu:
 - Buuxiyo cabiraadda hadafka sanadlaha oo loogu dejiyey barnaamijka shaqsiga waxbarasho; iyo
 - In kuu ka qeyb qaato manhajka waxbarashada guud, goorta loo baahdo.

Goorma ayay tahay in la sameeyo dib u qiimayn?

Dib u qiimayn waa in la sameeyaa:

- o Haddii dugsigu go'aamiyo in baahida waxbarasho gaarka ah ama adeegyada la xidhiidha ee ilmahaagu ay u baahan yihiin dib u qiimayn;
- o Haddii adiga ama ilmahaaga macalinkiiisu codsado dib u qiimayn;
- o Marka ilmahaagu u wareego waxbarashada gaarka ah ee ka horaysa adeegyada dugsiga ee u wareego da'da iskuulka ee waxbarashada gaarka ah;
- o Si aad isbedel ugu samayso dhinaca awood daradu ka haysato ilmaha ; ama
- o Ka hor inta aanad go'aamin in ilmahaagu yahay ilmo curyaannaaf ah.

FIIRO: Dib u qiimayn looma baahna haddii ku haboonaanta ilmahaagu ay dhamaato sababo la xidhiidha ka qalinjabinta dugsiga sare ee

dibloomada lagu qaato ama ilmahaaga oo gaadhay da'da 22 jirka awgeed

Dib u qiimayn:

- o Ma codsan kartid hal mar wax ka badan sanadkii, haddii adiga iyo dugsigu raacdaan mooyaane; iyo
- o Waa in la sameeyaa ugu yaraan hal mar sadexdii sano, adiga iyo dugsiga oo isku raaca in dib u qiimayni lagama maarmaan tahay mooyaane.

Maxaa dhacaya marka ay tahay waqtiga dib ugu qiimaynta ilmahaaga ee adeega waxbarashada gaarka ah?

Dugsigu wuxuu:

- o Kugu casuumayaa inaad ka qayb qaadata hawsha dib u qiimaynta;
- o Kuu sharaxayaa hawsha dib u qiimaynta, oo ay ka mid tahay xuquuqdaada aad ku codsanayso qiimayn aad go'aan uga gaadhayso baahida waxbarasho ee ilmahaaga;
- o Ku siinayaa ogaysiis qoraal ah oo hore; iyo
- o Inaan helno ogolaansho qoraal ah haddii qiimayn cusubi daruuri noqoto amase haddii aad adiguba codsato.

Nidaamka dib u qiimaynta, oo uu ku jiro tijaabooyinka cusub ama qiimaynta, waxaa laga yaabaa inuu hore u dhaqaaqo haddii dugsigu uu hayo oo tuso diiwaanka dedaal macquul ah oo ay u galeen helista ogolaanshahaaga oo adiguna aad u soo jawaabi wayday. Waxaa dedaalkan ka mid ah tilifoon lagu soo diray, ogaysiis qoraal ah ama booqashooyin lagu yimid gurigaaga.

Dib u qiimaynta inta lagu jiro maxaa dhacaya?

Inta lagu gudo jiro dib u qiimaynta kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga (kuwaas oo aad adiguna ka mid tahay), iyo aqoonyahanada kale, mar kasta oo ay haboon tahay, waxay dib u eegayaan warbixinaha ka imanaya dib u qiimaynta ilmahaaga iyo:

- o Waxay go'aan ka gaadhayaan haddii iyo qiimaynta dheeraadka ah iyo macluumaadka (uu bixiyay dugsigu) ayaa loo baahan yahay si go'aan looga gaadho haddii ilmahaagu uu u ku wali ku haboon yahay iyo haddii ilmahaagu u baahan yahay isbedel dhinaca adeega; ama

- o Waxay go'aan ka gaadhayaan inaan macluumaad dheeri ah oo ilmahaaga ah aan loo baahan si ay uu u sii noqdo mid ku haboon, degmaduna waxay haysaa macluumaad ku filan oo go'aan looga gaadhi karo adeegyada ilmahaagu u baahan yahay Haddii kooxda go'aan ka gaadho inaanu macluumaad dheeri ahi daruuri u ahayn dib u qiimaynta, waxaad degmada ka heli doontaa ogaysiis qoraal ah oo hore kaas oo kugu wargalinaya sababaha aan macluumaad dheeri ah loogu baahnayn iyo in ilmahaagu wali ku sii haboon yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Haddii kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah iyo aqoonyahanada kale ay goaamiyaan in aan macluumaad dheeri ah loo baahnayn, waa in degmadu kuu ogolataa inaad ogaato inaad xaq u leedahay inaad codsato qiimayn aad go'aan kaga gaadhayso bal in ilmahaagu uu sii yahay ilmo qaba naafoimo isla markaana go'aan looga gaadho baahida waxbarasho ee ilmaha.

Maxaa dhacaya haddii diido go'aanka sarkaalka dhagaysiga?

Haddii aad diido qiimaynta dugsiga, waxaa laga yaabaa:

- o Inaad codsato qiimayn waxbarasho oo madax banaan (IEPP); ama
- o Inaad qaado talaabooyin aad ku xalinayso diidmada dugsiga aad diidan tahay. (Fiiri qaybta "Xalinta Khilaafaadka iyo Cabashooyinka")

QIIMAYN WAXBARASHO OO MADAX BANAAN

Waa maxay qiimayn waxbarasho oo madax banaani?

Qiimayn waxbarasho oo madax banaan waxaa sameeya imtixaan qaade khibrad leh oo aan ka shaqayn dugsiga degmada ee ilmahaagu dhigto.

Haddii aad waafiqi waydo qiimaynta dugsiga ee ilmahaaga, xaaladaha qaarkood waxaad heli kartaa qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo ilmahaaga ah oo lagaa bixiyo (oo bilaash ah).

Maxay yihiin shuruudaha la rabo si ilmahaygu u helo qiimayn madax banaan oo bilaash ah?

Waxaad ilmahaaga u heli kartaa qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo bilaash ah marka aad khilaftid qiimeynta dagmada. Marka aad codsatid qiimeynta waxbarashada madax banaan, waxaa dhici karto in dugsiga dagmadaada uu ku siiyo liiska habka lagu dabaqo qiimeynta, kana mid ah aqoonta qiimeeyayaasha, xuduuda deegaanka iyo habka celcelinta kharashka macquulka ah. Si dagmada u bixiso waxbarashada tacliinta madax banaan, waa in aad raacdid hababkaan ama aad muujisid in xaalado gaar ah ka dambayaan in hababkaan aan lagu dabaqi karin. Waxaa dhici karto in dugsiga dagmada uusan sharuudo kale saarin sida loo fuliyo qiimeynta waxbarashada shakhsiga ee laga bixiyo kharashka dadweynaha. Imtixanaadka iyo qiimeynta loo fulin karo sida qeyb ka tirsan qiimeynta waxbarashada madax banaan waxaa go'aamiya sharuudaha xakuma sida dagmada u fuliso qiimeynta.

Sideen u heli karaa qiimayn madax banaan oo waxbarasho?

Markaad codsato, waa in dugsigu uu ku siiyaa macluumaad ku saabsan meesha aad ka heli karto qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo ilmaahagu helo iyo shuruudaha fulinta qiimayn waxbarasho oo madax banaan.

Waxaa laga yaabaa inaad isticmaasho qiimeeye ku qoran liis dugsigu hayo ama waa inaad doorata qiimeeya buuxiya shuruudaha dugsiga.

Imisa qiimayn oo madax banaan ayaa laga yaabaa inaan helo?

Waxaad xaq u leedahay hal qiimayn oo madax banaan oo bilaash ah mar kasta oo aad diido qiimayn dugsigu sameeyay.

Miyaa la iiga baahan yahay inaan sharaxo sababta aan u codsanayo qiimayn waxbarasho oo madax banaan?

Haddii aad codsato qiimayn waxbarasho oo madax banaan, waxaa laga yaabaa in dugsigu ku waydiisto inaad u sheegto sababta aad u diidayso qiimaynta dugsiga. Khasab maaha inaad sharaxdaa haddii aanad jeclayn inaad sidaa yeesho.

Maxaa dhici doona haddii aan codsado qiimayn waxbarasho oo madax banaan?

Haddii aad codsato qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo bilaash ah waa in dugsigu uu , si aan dib u dhac lahayn, :

- U sameeyaa qiimayn madax banaan oo ilmahaagu helo oo bilaash aha; ama
- Faylgaraynta dacwad lacag bixineed si loo codsado dhegaysi lagu tusinayo in qiimaynta dugsigu sax ahayd.

Maxaa dhici doona haddii dugsiga aanan u sheegin inaan ilmahayga u samaynayo qiimayn madax banaan, laakiin aan u sheego oo kaliya inaan ku raacsanayn qiimayntooda?

Ilaa inta qiimaynta waxbarasho ee madax banaan ay buuxinsayso shuruudaha dugsiga ee qiimaynta madaxa banaan, dugsigu, marka uu heli koobi ka mid ah qiimaynta, laba mid bay noqonaysaa:

- Inuu dugsigu bixiyo kharashka qiimaynta madaxa banaan; ama
- Fayl garayn dacwad lacag bixineed si loo muujiyo in qiimeeyaha madaxa banaan ee aad dooratay aanu buuxin shuruudaha ama si loo cadeeyo in qiimaynta dugsigu sax tahay.

Qof kale miyuu codsan karaa qiimayn waxbarasho oo madax banaan?

Haa, haddii aad codsato dhegaysi dacwad lacag bixineed sababtoo ah waxaanad ku raacsanayn qiimaynta dugsiga, sarkaalka dhegaysanaya ayaa laga yaabaa inuu codsato qiimayn waxbarasho oo madax banaan taas oo qayb ka ah dhegaysiga. Marka xaalku sidan yahay, qiimaynta waxbarasho ee madax banaan waa inay noqotaa bilaash.

Ka waran haddii sarkaalka dhagaysanaya dacwadu uu go'aan ku gaadho in qiimaynta dugsigu sax tahay?

Haddii sarkaalka dacwada dhegaysanayaa uu go'aan ku gaadho in qiimaynta dugsigu sax tahay ama haboon tahay, wali waxaad xaq u leedahay inaad raadsato qiimayn madax banaan oo jeebkaaga aad kharashka ka bixisid.

Dugsigu miyuu tixgelin doonaa qiimaynta waxbarasho ee madax banaan ee aan ilmahaaga u sameeyay?

Haddii aad hesho qiimayn waxbarasho oo madax banaan oo dawladu bixiso (bilaash ah) ama haddii aad dugsiga keento qiimayn adigu aad kharashkeed iska bixisay, natiijada qiimaynta madaxa banaan:

- Waa in dugsigu tixgeliyaa, haddii ay buuxinayso shuruudaha, mar kasta oo samaynaysa oo la xidhiidha fidinta waxbarasho dawli ah oo madax banaan oo ilmahaagu helo.
- Waxaa laga yaabaa in cid kastaa u soo bandhigi karto cadayn ahaan marka lagu jiro dhegaysiga dacwadaha lacag bixinta ee ilmahaaga.

BARNAAMIJKA WAXBARASHADA SHAQSIGA (IEP)

Waa maxay qiimayni?

Barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah (IEP) waa qoraal loogu talagalay ilmaha naafada kaas oo hoosta ka xariiqaya ahdaafta waxbarasho iyo ujeedooyinka ilmahaagu ku shaqayn doona sanadka socda. Sidoo kale qoraalku wuxuu hoosta ka xariiqayaa adeega iyo taageerada ilmahaagu u baahan yahay si u loo xaqiijiyo ujeedooyinka lagu xusay barnaamijka waxbarashada shaqsiga.

Sharciga federaalka iyo gobolku waxay u baahan yihiin in barnaamijka waxbarashada ee shaqsiga ah la kobciyo, dib loo eego oo dib loogu noqdo kulan ay isku imanayaan dad khibrad leh iyo adiga oo waalidkii ah.

When must the IEP meeting take place?

Kulan lagu samaynayo barnaamij waxbarasho oo shaqsi waa in lagu sameeyaa muddo 30 maalmood gudahooda ah taas oo lagu go'aaminayo in ilmuhu u baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha. The IEP must be put into action as soon as possible following the IEP meeting.

Goorma ayay tahay inuu dhamaado barnaamijka waxbarashada shaqsiga ahi?

○ Barnaamijka shaqsiga ah ee hore (bilowga ah) waa in lagu sameeyaa muddooyinkan soo socda ta ugu gaaban:

- 30 maalmood kadib marka la gaadho go'aanka in ilmuhu u baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo adeega la xidhiidha;
- 90 maalmood kadib marka waalidiinta ilmuhu bixiyo ogolaansho qiimaynta; ama
- 120 maalmood kadib marka waalidkawaalidiinta ama dugsigu uu codsado qiimayn.

○ Waa in barnaamijka waxbarashada khaaska ah ee ilmahaagu diyaar ahaataa ugu dambayn taariikhda dhalashada saddexaad ee ilmaha

What Muxuu IEP ahi ka kooban yahay?

IEP wuxuu ka kooban yahay:

- Macluumaad ku saabsan mustaqbalka ilmahaaga;
- Macluumaad ku saabsan sida ilmahaagu imika wax u baranayo ee uu shaqaynayo.
 - Warbixinahani waxay kuu sheegayaan sida curyaannaafonimada ilmahaagu u saamaynayso ka qaybgalkiisa iyo horumarkiisa manhajka guud (isla manhajka loo dhigo caruurta aan curyaamiinta ahayn).
 - Caruurta dugsiga ka hor (3-5 jir), macluumaadkani wuxuu kuu sheegayaa sida naafonimada u saamaynayso ka qaybgalkaaga hawlaha dugsiga ee ku haboon caruurta dugsiga;
- Ujeedooyin sanada walba la cabiri karo, oo ay ka mid yihiin ujeedooyinka sida caruurtaadu wax u baranayso iyo sida fiican ee caruurtaadu u shaqaynayso;
- Macluumaadku sidoo kale wuxuu ka koobnaan doonaa bartilmaameedyo iyo ujeedooyin mustaqbalka dhow ah oo la xidhiidha waxbarashada ilmaha iyo hawlaha loo dajiyey:
 - Inay daboolaan baahiyaha ilmaha ee ka yimid naafonimadiisa, si ilmahaagu uga qaybqaato isla markaana horumar uga sameeyo manhajka guud ee waxbarashada; iyo

- In la daboolo baahiyaha kale ee waxbarasho ee ilmahaaga ee ay keentay naafonimadu;
- o Sharaxaad:
- Sida ilmahaagu horumar uga samaynayo xaqiijinta ujeedooyinka sanadlaha ah ee ee la cabiri doono
 - Xiliyada warbixinaha joogtada ah ee horumarka ilmuhu ka sameeyay xaqiijita ujeedooyinka sanadlaha ah la bixin doona. Waxaa ka mid ah kuwan warbixinaha saddex biloodlayaasha ah ama warbixinaha kale ee joogtada ah ee la soo saaro marka kaadhka warbixinta la samaynayo;
- o Qoraal waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha iyo gargaar dheeri (saa'id) iyo adeegyo kale oo la siinayo ilmahaaga iyo qoraal ka hadlaya isbedelada barnaamijka ama taageerada shaqaalaha dugsiga la siin doono si loogu suurtoogaliyo ilmahaaga inuu:
- U dhaqaaqo gaadhista ujeedooyinka sanadlaha ah;
 - Ka qayb qaadashada iyo horumar ka samaynta manhajka guud iyo ka qaybgalka hawlaha dugsiga ee ka baxsan fasalka, haddii ay haboon tahay; iyo
 - Learn and participate in school activities with other children who have and do not have disabilities.
- o Sharaxaad xadiga, haddii ay jirtaba, ilmahaagu aanu ka qaybqaadan doonin caruurta aan lahayn naafonimada ee fasalka iyo hawlaha kale ee dugsiga;
- o Qoraal sixid kasta oo lagama maarmaan noqota si loo cabiro natiijada ilmaha ee qiimaynaha heer qaran iyo mid degmo. Haddii kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga ahi ay go'aan ku gaadhaan in ilmahaagu galo imtixaan heer gobol ama degmo oo ka duwan kuwii hore oo joogta ah, iyo qoraal sheegaya sababta ilmahaagu u gali waayay imtixaankii caadiga ahaa iyo sababta loogu gartay inuu ku haboon yahay mid ka duwan.
- o Taariikhda uu dugsigu qorsheeyay inuu bilaabo adeegyada iyo isbedelada lagu faahfaahiyey barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah iyo meesha, inta goor, iyo mudada adeegyadan iyo sixidooda loo baahan yahay (

Ka fiiri *isbedelada qaybta* “Qeexdimaha”); iyo

- o Bilaabid ugu yaraan hal sano ka hor inta aanu ilmahaagu gaadhin da'da waynida ee sharciga gobolka (Ohio waa 18 jirka), qoraal ka hadlaya in ilmahaagii la ogaysiiyay xaq uu IDEA u ogolyahay ee ah in la bedeli marka uu noqdo ama marka ay noqoto 18 jir.

Maxay tahay inay kooxda IEP ahi tixgeliyaan marka ay samaynayaan IEP ah?

IEP ahi waa inuu tixgeliyaa:

- o Meelaha ilmahaagu ku fiican yahay;
- o Rabitaankaaga ah in ilmuhu horumar ka sameeyo waxbarashaddiisa;
- o Natiijada dib u qiimayn kasta;
- o Natiijada waxqabadka ilmahaaga ee qiimaynta heer gobol ama heer degmo
- o Waxa uu u baahan yahay ilmahaagu si uu u wax u barto, koro una shaqeeyo si haboon.

Muxuu yahay waxa kale ee kooxda IEP ahi tixgeliyaan?

Kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga ahi waa inay sidoo kale dib u eegaan oo ay tixgeliyaan qodoban so socda:

- o Kala guurka ama dhaqdhaqaaqa ee ilmahaaga uuga guurayo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ka horeeya dugsiga (3-5 jirka) ilaa u guurista adeegyada waxbarasho ee da' dugsiiyeedka (6-21 jirka);
- o Ku bilaabista da'da 14 (ama ka yar, haddii kooxda IEP ahi uu go'aan ku gaadho inay lagama maarmaan tahay). Macluumaadka ku sahabsan adeega kalaguurka ee diirada saaraya koorsooyinka ilmaha (sida qaadashada koorsooyin sarsare ama waxbarashada xirfadleyda ah). Qoraalkan waa in la cusboonaysiiyaa sanad walba;
- o Iyadoo laga bilaabay da'da 16 jirka ayaa qoraal, si sanadle ah loo cusboonaysiiyay, oo ah:
 - Ujeedooyinka ku haboon ilmahaaga, kuna salaysan qiimayn, kuwaas oo la xidhiidha waxbarashada ayaa ilmaha u diyaarin doona shaqaalaysiin iyo, haddii ay haboon tahay, nolol madax banaan oo ka dambaysa qalin jabinta

- Adeegyada kala guurka (oo ay ku jiraan koorsooyinka) la baranayo ayaa loo baahan si loo taageero in ilmahaagu xaqiijiyo ujeedooyinkan;
- Haddii habdhaqanka ilmahaagu uu dhexgalo waxbarashaddiisa ama waxbarashada kuwa kale, adeegsiga hab dhaqan togan oo loo dhiirigeliyo iyo istaraatiijiyadaha kale ee looga hadlayo hab dhaqankan kaas wanaagsan;
- Barnaamijyada waxbarashada jismiga ah ee daboolaysa baahiyaha khaaska ah ee ilmahaaga;
- Baahida loo wax ku dhigista farta indhoolayaasha haddii ilmahaaga aragtidiisu wax qabto;
- Baahiyada xidhiidh ee ilmahaaga, taas oo ay ka mid tahay dhegaysiga, hadalka, akhrinta iyo qoraalka. Haddii ilmahaagu uu dhego la'yahay ama maqalku ku adag yahay, kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga waa inuu tixgeliyaa luuqada ilmaha iyo baahidiisa xidhiidh. Waa inuu tixgeliyaa fursadaha. Tan waxaa ka mid ah fursado qof-qof ilmahaaga afkiisa hooyo wax loogu dhigayo;
- Baahiyaha luuqadeed ee ku salaysan barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah ee ilmahaaga, haddii awooda adeegsiga Ingiriisiga ee ilmuhu xadidan tahay (ilmahaagu uu muujiyo LEP)
- Baahida ilmahaaga ee qalabka iyo adeegyada tiknoolijiyada ee taageerada samaysa.

Muxuu yahay u diyaargarowga shirka IEP ah?

Shirka IEP waxaa diyaarinaya dugsiga, iyagoo tixgelinaya arrimahan soo socda:

- Adiga iyo/ama ilmahaga waxaa la ogaysiin doonaa kulanka xili ka horaysa oo idinku filan si loo xaqiijiyo inaad heli doontid fursad aad kaga qaybgasho.
- Kulanka waxaa la qorshayn doonaa xili iyo goob haboon oo la isku wada raacay.
- Ogeysiiska kulanka waxaa ku jiri doona ujeedada, waqtiga iyo meesha kulanka iyo cida ka qaybgalaysa.
- Haddii aad ka qayb gali kari waydid, waa in dugsiga degaanku adeegsadaa habab kala duwan si la idiinku ogolaado inaad ka qaybgashaan kulanka, si fool ka fool ah ama tilifoon aad uga qayb gasho.

- Waxaa laga yaabaa in kulan la qabto adiga oo aan joogin haddii dugsigu uu awoodi waayo inuu kugu qanciyo inaad ka qaybgasho.
- Dugsigu waa inuu leeyahay diiwaan ay ku qoran yihiin isku daygooda ay ku doonayeen inay ku soo gaaheen.
- Dugsigu waa inuu qaadaa talaabo kasta oo lama huraan u ah xaqiijinta ah inaad fahmay.
- Dugsigu waa inuu muddo 30 maalmood ah gudahood kugu siiyaa nuqul ka mid ah barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah ee la dhameeyay oo bilaash ah .

Ka waran haddii aniga iyo dugsigu aanu isku diidno waxa ka mid noqonaya barnaamijka waxbarashada shaqsig ah?

Haddii adiga iyo dugsigu aad isku diidaan waxa ka mid noqonaya barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah, waxaad samayn kartaa:

- Inaad codsato daadihinta IEP shaqsi ah”;
- Inaad codsato; ama
- PFiiri qaybta " Xalinta Khilaafaadka iyo Cabashooyinka"

Yaa xubin ka noqonaya kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsig ah?

Waa in dugsigu xaqiijiyaa in kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga ee ilmo walba uu ka mid yahay :

- Adiga oo waalidkii ah;
- Ilmahaaga marka ay haboon tahay;
- Ugu yaraan mid ka mid ah macalimiinta joogta ah ee ilmahaaga (haddii ilmuhu uu, ama laga yaabo, inuu ka qaybgalo, bii’ad waxbarasho joogto ah);
- Ugu yaraan hal macalin oo waxbarashada gaarka ah ama , haddii ay haboon tahay, ugu yaraan mid ka mid ah macalimiinta waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga (tusaale ahaan, macalinka ku hadal luuqada oo kale);
- Wakiil ka socda dugsiga oo aqoon u leh inuu bixiyo ama kormeero wax dhigista sida gaarka ah loogu dajiyey daboolista baahiyaha gaarka ah ee caruurta curyaamiinta ah Wakiilka degmadu waa inuu ogaadaa manhajka guud iyo helitaanka macluumaadka degmada;
- Qof sharixi kara sida natiijada qiimayntu u samaynayso barista. Qofkani waxaa laga

yaabaa inuu yahay mid ka mid ah xubnaha sharaxay qodobada aan soo sheegnay;

- Adiga ama dugsiga, shaqsiyaadka kale ee aqoonta u leh ama leh khibrad gaar ah u leh ilmaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha adeegyada la xidhiida waxbarista gaarka ah marka ay haboon tahay;
- Dugsigu waa inuu ku casuumaa ilmahaaga naafada ah inuu ka qaybgalo kooxda barnaamijka waxbarashada gaarka ah haddii ujeedada shirku tahay tixgelinta ujeedooyinka ilmaha ee qalin jabinta kadib iyo adeegyada kala guurka ee loo baahan doono si loo caawiyo in ilmuhu daboolo ujeedooyinkan; iyo
- Waa in dugsigu uu casuumaa wakiil ka socda mid ka mid ah hay'addaha ka qaybgalaya kuwaas oo laga yaabo inay iyagu fidiyaan amase lacagta ka bixiyaan adeegyada ku meelgaadhka ah ilaa xadka ay haboon yihiin, iyagoo haysta ogolaanshaha waalidiinta ama tan ilmaha gaadhay 18 jir.

Goorma ayaan loo baahnayn in xubin ka tirsan IEP ahi aanay ka qaybgelin shirka IEP? Sidee ayaa laga yaabaa in xubin ka tirsan IEP ah loogu cudur daaro?

- Xubin ka tirsan kooxda barnaamijka waxbarashada ee shaqsiga looma baahna inuu ka qaybgalo qayb ka mid ah kulanka barnaamijka waxbarashada shaqsiga haddii waalidiinta iyo dugsigu qoraal ahaan iskugu raacaan in xubintaa ka qaybgalkeedu aanu muhiim ahayn Tani waxay kaliya waxay dhacaysaa maxaa yeelay marka dhinaca manhajka (maadada) ama adeegyada la xidhiidha ee xubintu aanu is bedelayn ama aan lagu soo hadal qaadayn kulanka.
- Xubin ka mid ah kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah waa loo cudur daari karaa inay ka soo qaybgasho qayb kasta oo ka mid kulanka barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah marka shirka aan lagu bedelayn ama aan lagaga doodayn dhinaca manhajka ama adeega gaarka ah ee xubintaasi ku qaybsan tahay, marka ay xaaladahani jiraan:
 - Waalidiinta iyo iskuulku mid walba wuxuu qoraal ahaan ugu cudur daarayaa xubintaas

- Xubinta kooxda barnaamijka shaqsiga wuxuu wax ku darsanayaa samaynta barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah ka hor kulanka Waxa ay xubintani soo kordhisay waa inuu qoraal ahaan ugu tagaa labada waalid iyo kooxda IEP;

- Haddii ilmahaaga hore loogu adeegay meel ka mid ah qaybta C ee IDEA (caruurta ka yar 2 sano), ku casuumid shirka barnaamijka waxbarashada ee shaqsiga ah waa in , codsigaaga, loo diraa isku-duwihii qaybta C ama wakiil ka socda qaybta C si ay gacan uga gaystan kala wareeg bil turxaan ah oo adeegyada ah.

Sidee loo maamulayaa isbedelada barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah iyo shirarka barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah?

- Isbedelada ku yimaad barnaamijka waxbarashada shaqsiga iyo kulanada lagama maarmaanka u ah in la sameeyo isbedeladan waxaa loo maamulayaa sida tan soo socota:
- Marka isbedel lagu samaynayo barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah ee ilmaha kadib kulanka sanadlaha ah ee kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga, adiga iyo dugsigu waxaa laga yaabaa inaad isku raacdaan inay aydin iskugu yeedhaan shir kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga si loo sameeyo isbedeladan. Si kale oo la yeeli karaa waxay tahay in adiga iyo iskuulku aad go'aamisaan isbedelada loo baahan yahay oo aad qoraal ka dhigtaan. Haddii aad isbedeladan u samaysaan hanaankan, dugsigu waa inuu habsadaa in kooxda ilmahaaga ee barnaamijka waxbarashada shaqsiga ahi ogtahay isbedeladan .
 - Ilaa xadka ya suurtoogalka tahay, waa in dugsiga degmadu isku dayaa inuu isku daraa shirarka dib u qiimaynta iyo noocyada kale shirarka kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga.
 - Mar haddii isbedelada barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah la isku raaco, oo ay isku raacaan kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah ama waalidiinta iyo dugsiga, isbedeladdani waxay qayb uga karaan barnaamijka saddex hab:

- Barnaamijka asalka ah ee dokumentiga waxbarashada waxaa lagu calaamadin karaa isbedelada la qorsheeyay ;
- Isbedelada dhawaan la qoray waxaa lagu dhejin karaa barnaamijka waxbarashada ee shaqsiga ah
- IEP ah ayaa la qori karaa iyadoo isbedeladuna ka muuqdaan.

Codsigaaga, waa in dugsigu uu fuliyaa ikhtiyaarka saddexaad. Waa in dugsigu uu ku diro noociyad kasta oo ka mid ah barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah muddo 30 maalmood gudahood ah marka isbedelku dhaco.

Goorma ayaan aniga iyo dugsigu kulmaynaa, ma waxa weeyi inaan si fool-ka-fool ah u kulano?

Maya. Adiga iyo dugsigu waxaa laga yaabaa inaad isku raacdaan inaad isticmaashaan habab kala duwan iyo meelo kala duwan oo aad ku kulantaan. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaad doorato inaad qabsataan shir fiidiyow iyo shir tilifoonka oo dhinacyada oo dhani ka qayb galaan. Mid kasta oo ka mid ah arimaha soo socda waxaa looga hadli karaa hababkan:

- Qiimayn;
- Go'aaminta bal in ilmahaagu ku haboon yahay;
- IEPs;
- Meelaynta waxbarashada (meelaha ilmahaagu wax ku baranayo);
- Dhowrista nidaamyada sida dhexdhexaadinta iyo fadhiyada qaraarada; iyo
- Fulinta arimaha maamul ee ilaalinta nidaamka IDEA (sida u dejinta jadwalaa, isweydaarsiga liisaska makhraatiyaasha iyo shirarka).

Maxay tahay masuuliyada kooxda IEP?

Ka qaybgalayaasha shirka barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah waa inay u kala hor dhameeyaan hawlahaan soo socda sidan:

Talaabada 1aad: Falanqaynta qorshaynta mustaqbalka.

Qof walba wuxuu leeyahay riyo mustaqbalka ah, taas oo hagta talaabooyinka, afkaarta iyo qorshayaasha. Ka dhigista riyooyinkan kalmado waa qayb ka mid ah qorshaynta mustaqbalka dheer ee joogtada ah ee ilmahaaga naafada.

Iyadoo ay qayb ka tahay dedaalka ayaa shirka kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga lagu falanqayn doonaa dookha ilmahaaga iyo xiisaha qoyskaaga ee ujeedooyinka ilmahaaga Waxaa ka mid noqon kara tan wadiiqada mihnada ee ilmahaaga, nolosha iyo tabobarada gaarka ah.

Talaabada 2aad: Falanqaynta heerarka guulaha waxbarasho iyo xirfadaha nolol maalmeedka.

Kooxda barnaamijka waxbarashada waxay dib u eegi doonaan macluumaadka ku saabsan ilmahaaga, oo ay ka mid tahay heerarka guulaha waxbarasho iyo xirfadaha nolol maalmeedka macluumaadkan waxaa ka mid ah horumarka ilmahaagu ka sameeyay barnaamijka waxbarashada khaaska ah, warbixinta kooxda, talooyinka ka yimid maclimiinta iyo shaqaalaha ilmahaaga ee la shaqeeya canuga, iyo , haddii ay haboon tahay, talooyinka ka yimid ilmahaaga laftiisa Macluumaadkani wuxuu “sawir” ka bixinayaa ilmahaaga, oo ay ka mid tahay baahiyaha ee meelaha ilmahaaga.

Talaabada 4aad: Aqoonsashada ujeedooyinka sanadlaha ah, oo ay ka mid tahay ujeedooyinka waxbarasho iyo kuwa nolosha, iyo ujeedooyink bartilmaameedyada ama mustaqbalka dhow ee la cabiri karo.

Kooxd barnaamijka waxbarashada ee shaqsiga waxay samayn doonaan ujeedooyin sanadle ah, oo ay ka mid yihiin ujeedooyin waxbarasho iyo ujeedooyin xirfad nololeed, iyo waliba sidoo kale bartilmaameedyo ujeedooyin mustaqbalka dhow oo ah isku aadinta habka qiimaynta. Kuwani waxay awood u siin doonaan ilmahaaga inuu ka qaybqaato isla markaana horumar ka sameeyo manhajka guud Kadibna kooxda ayaa go'aaminaysa adeegyada lama huraanka ah si loo daboolo baahiyaha ilmaha.

Talaabada 4aad: Aqoonsiga adeegyada loo baahan yahay

Kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga ayaa go'aaminaysa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee iskuulku siin doono ilmahaaga, inta goor ee la siinayo, iyo cida siinaysa iyaga. Qaybtan barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah waxaa ka mid noqon doono, haddii ay haboonaato, jiif, sixid, qalabka tiknoolajiyada ee taageera iyo adeegyada, iyo qoraal sheegaya taageerada ay shaqaalaha

dugsigu u baahan doonaan Taageerada iyo adeegyada ku qoran barnaamijka waxbarashada shaqsiga waxay ku salaysnaan doonaan daarasad cilmi oo muujinaysa noocyada taageero iyo adeegyo ee sida dhabta uga caawinaya caruurta inay ka qayb qaataan horumarka barnaamijka manhajka guud iyo hawlaha kale ee ka baxsan fasalka.

Talaabada 5aad: Go'aaminta degaanka ugu xanibaada yar (LRE).

Sharcigu wuxuu goobta waxbarasho ee ilmahaagu u tixgelinayaa meesha ugu horaysa ee ilmahaaga inay tahay fasalka ama bii'ad kale ee guud ee waxbarasho. Haddii kooxda go'aamiso in meel kale ay adeegyada ilmahaagu helayaa u baahdaan, waxay idiin sheegi doonaan sababta ilmahaagu aanu uga qayb qaadan doonin goobta waxbarashada manhajka guud iyo sida goobta iyo hawsha ilmahaagu uga duwan tahay kuwa caruurta aan curyaamiinta ahayn .

Sidee buu barnaamijka shaqsiga ah ee ilmahaaga dib loogu eegayaa iyo/ama loo gorfaynayaa?

Kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga waa inay dib u eegaan barnaamijka waxbarashada ee ilmahaaga si joogto ah (ugu yaraan mar sanadkii) si go'aan loog gaadho haddii ilmahaagu u xaqiijinayo ujeedooyinka ilmaha.

Kooxda IEP waa inay dib u eegaan IEP:

- o Dib u socodnimo kasta oo ku timaad xaqiijinta ujeedooyinka ee manhajka guud, haddii ay haboon tahay;
- o Natijada dib u qiimayn kasta ;
- o Macluumaad ku sahabsan ilmahaaga ee lagu siiyay ama adigu aad bixisay;
- o Natijada la rajaynayo ee ilmahaaga; ama
- o Arrin kasta oo kale so soo baxda.

Maxaa dhacay ka hor inta aanu ilmahaagu gaadhin da'da waynida (Ohio waa 18 jirka)?

Ugu yaraan hal sano ka hor inta aanu ilmahaagu noqon 18, barnaamijka waxbarashada shaqsiga ee ilmahaagu waa inuu ka mid yahay qoraal ah in ilmahaaga la ogaysiiyay in dhamaan xuquuqaha laga wareejin doono adiga oo loo wareejin doono isaga ama iyada marka uu/ay gaadho 18 jir.

ADEEGA SANAD-DUGSIYEEDKA LA FIDIYEEY

Waa maxay adeega sanad-dugsiyeedka la fidiyey?

Adeegyada sanad-dugsiyeedka la fidiyey (ESY) iyo adeegyada la xidhiidh laga yaabaa iney helaan in ilmahaagua naafada ahi heli in ka badan sanad-dugsiyeedkii caadiga ahaa 18 maalmood ahaa.

Adeegyada dugsiga ee la fidiyey waxaa la bixiyaa:

- o In ka fog sannad dugsiyeedka caadiga ah;
- o Iyaddoo socoshada waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee ku qoran barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah;
- o Iyagoo bilaash ah oo adigu , waalidiinta , la siinayo; iyo
- o iyaddoo lala socda shuruudaha Waaxda Waxbarashada ee Ohio ee adeegyada sanad dugsiyeedka la fidiyey.

Goorma ayuu dugsigu ilmahaaga siinayaa adeegyada sanad dugsiyeedka la fidiyey?

Dugsiga degmadu waa inuu adeegyada dugsiga la fidiyey u diyaariyaa ilmahaaga kaliya haddii kooxd barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah ee ilmahaagu go'aamiso in adeegyada sanad dugsiyeedka la fidiyey lagama maarmaan u yihiin siinta ilmahaaga waxbarsho dawladeed bilaash ah oo ku haboon.

Kooxda barnaamijka shaqsiga ahi waa inay tixgeliyaan arrimahan soo socda marka ay samaynayaan go'aanadooda:

- o Miyay adeegyada sanad dugsiyeedka la fidiyey lagama maarmaan u yihiin ka ilaalinta ilmahaagu inuu la kulmo khasaaro wayn xirfad lumin aha ama khasaare wayn oo aqoonta ah?
- o Miyaa laga yaabaa in khasaarahaasi uu si daran u saameeyo horumarka caruurtaad ee dhinacyada ahdaafta nolosha?
- o Miyay adeegyada sanad dugsiyeedka ee la fidiyey lagama maarmaan u yihiin ka ilaalinta ilmahaagu inuu lumiyo khasaare xaga xirfadaha ama aqoonta ah oo aanu dib u kasban karin?

Adeegyada dugsiga ee ilmahaagu waxaa laga yaabaa inay ka duwan yihiin ama la mid yihiin adeegyada joogtada ah ee ilmahaaga The IEP team will determine this. Bixinta adeegyada sanad dugsiyeedka la fidiyey maaha mid is wada sanadba sanadka ka dambeeya.

BEDELKA ARDAYDA

Maxay yihiin shuruudaha marka ilmahaygu uu bedesho dugsiga?

Shuruudaha marka ilmahaagu uu bedesho dugsiga waa sidan :

Bedelka Ohio gudaheeda:

Haddii ilmahaaga curyaannaafoka ahi (ku jira IEP taas oo mar hore ka bilaabantay dugsiga Ohio) u bedelashada dugsi cusub oo Ohio ku yaal; iyo is qorista dugsi cusub isla sanad dugsiyeedkaa: dugsiga cusub ee degaanka , iyaddoo adiga lagula tashanayo, waa inuu siiyaa ilmahaaga waxbarasho dawli ah oo bilaash ah (FAPE) (oo ay ku jiraan adeegyo la mid ah kuwa lagu faahfaahiyey IEP ah ee ilmahaaga ee dugsigii hore) ilaa inta dugsiga cusubi :

- o La qabsanayo barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah ee ilmahaaga ee dugsigii hore : ama
- o Samaynayo, ee uu dhaqan galinayo barnaamij waxbarasho shaqsi ah oo buuxinaya shuruudaha sharciga gobolka iyo federaalka. Haddii dugsiga cusubi sameeyo qiimayn, qiimayntaas waxaa loo tix galinayaa dib u qiimayn.

Ka soo bedelashada meel ka baxsan gobolka ee loo soo bedelanayo Ohio:

Haddii ilmahaaga curyaaanka ah uu ku jiro barnaamijka waxbarashada shaqsi ah ee gobol kale kadib:

- o U bedesho dugsi cusub oo Ohio ku yaal; iyo
- o Is qoro dugsi cusub isla sanad dugsiyeedkaa:

Dugsiga cusub, iyadoo adiga lagaala hadlayo, waa inuu siiyaa ilmahaaga waxbarasho dawli ah oo bilaash ah (oo ay ka mid tahay adeegyo la mid ah kuwa lagu xusay barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah ee ilmahaaga ee dugsigii hore:

- o Sameeyaa qiimayn, haddii loo baahdo; iyo

- o Uu sameeyaa oo hirgeliyaa barnaamij waxbarashada shaqsiga ah oo cusub, haddii loo baahdo, taas oo waafaqsan shuruudaha sharciga gobolka iyo federaalka. Haddii dugsigu sameeyo qiimayn, qiimayntaasi waa kama dambaysa.

U gudbinta (wareejinta) diiwaanadii dugsigii hore dugsigan cusub:

Si aad ilmahaaga gacan uga siiso bedelka:

- o Dugsiga cusub ee ilmahaagu is qoray waa inuu qaadaa talaabooyin macquul ah oo si degdeg ah loogu helayo diiwaanadii hore ee ilmahaaga; iyo
- o In dugsigii hore ee ilmuhu dhigan jiray uu qaado talaabooyin oo uu si degdeg ah ugu codsanayo dugsiga cusub; iyo
- o Diwaanada la soo wareejinayo waa inay ka mid ahaadaan barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah iyo dokumentiyada cadaynta iyo diiwaan kasta oo lagama maarmaan u ah siinta ilmahaaga barnaamij waxbarasho shaqsi ah ama adeegyada la xidhiidha.

Haddii lacag lagaaga lahaa dugsigii hore, waxaa laga yaabaa in degmadu hayso derejooyinka iyo dhibcaha ilmaha ilaa aad bixiso lacagta. Si kastaba ha ahaatee, degmadii hore waxaa laga yaabaa inaysan la hadhin diiwaanada ilmahaaga ee waxbarashada gaarka ah, oo ay ka mid tahay qiimaynta imika iyo barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah.

Waxaad ka warantaa haddii ilmahaygu u bedesho dugsi cusub?

Haddii ilmahaagu uu ka bedesho dugsi oo uu bedesho mid kale isla sanad dugsiyeedkaa, waxaad u baahan doontaa inaad dugsiga cusub u sheegto in ilmahaagii laga qiimaynayo naafonimo lagu tuhmay dugsigaagii hore iyo inaad doonayso inay qiimayntu sii socoto

Dugsiga cusub wuu sii wadi doonaa qiimaynta isag odhan doona kuma tuhmayno naafonimo oo sii wadi mayo tijaabada.

Haddii aad dugsiga cusub aad ku raaci waydo go'aanka, waaxaa laga yaabaa inaad la bilowdo dugsiga talaabooyinka xalinta khilaafaaka. (Fiiri qaybta " Xalinta Khilaafaadka iyo Cabashooyinka")

KALA GUUR

Muxuu yahay " kala guur"?

Kala guurku waa habka hawlaha loo qorsheeyay kaas oo adeegyada iyo shaqaalaha bixinaya ku keeni kara isbedel . Waxaa jira ugu yaraan saddex goor oo ah mihnada waxbarasho ee ilmaha markaas oo ay dhici karaan hawlo kala guur:

- Marka ilmuhu uu ka guuro adeegyada hawl-qabadka ee hore (dhalashada- 2 jirka) ilaa adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga ka hoose (3-5 sanno jirka);
- Marka ilmuhu uu ka wareego adeegyada waxbarashada gaarka ah ee uu wareego adeega waxbarashada gaarka ah ee da' dugsiiyeedka
- Marka ilmuhu ka wareego adeegyada waxbarashada gaarka ah ee da' dugsiiyeedka ee uu wareego nolosha bulshada (22 sano jir iyo ka badan). (*Adeegyada kala guurka ka fiiri qaybta "Qeexdimaha" .*)

Ka wareegista adeegyada hawl-qabadka hore ilaa adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga ka horeeya

Haddii ilmahaagu uu helayo adeegyada hawl-qabadka ee hore (ee diyaarka u ah caruurta dhalashada- 2 sano jirka) oo uu qof tuhmo in ilmahaagu qabo naafoimo oo uu ku haboon yahay adeega waxbarashada gaarka ah ee dugsiga ka horaysa, waa in hawlan soo socdaa dhacaan:

- 120 maalmood ka hor maalinta dhalashada ilmahaaga, isku duwaha adeegyada hawl-qabadka hore waa inuu kula u qabtaa adiga si looga hadlo adeegyada waxbarashada gaarka ah. Waxaa loo baahan yahay ogolaanshahaaga si macluumaad dugsiga bixinaya adeega waxbarashada gaarka ah ee hore.
- Haddii aad ogolaansho ku bixiso inaad macluumaad ku saabsan ilmahaaga i a wadaagto dugsiga, adiga iyo ka qaybgalayaasha kale (adeegyada hawl-qabadka hore iyo shaqaalaha dugsiga) waxaad guud mari doontaan diiwaanada ilmahaaga waxaanad go'aan ka gaadhi doontaan bal in aad naafoimo ku tuhunsan tihiin ilmaha.

Haddii qof uu ku tuhmayo ilmuhu inuu leeyahay naafonimo, dugsigu wuxuu:

- Ku ogaysiinayaa xuquuqdaada waxbarasho iyo talaabooyinka aad qaadi karto si aad u dhowrto xuquuqahan;
- Wadaagayaa macluumaadka ku saabsan adeegyada waxbarashada dugsiga ka horeeya ;
- Helayaa ogolaanshahaaga si loo qiimeeyo ilmaha;
- Go'aan ka gaadhayaa bal in macluumaad dheeri ah loo baahan yahay qiimaynta;iyo
- Qorshaynta qiimaynta ilmahaaga.

Qiimaynta hore (bilowga ah) waa in lagu dhameeyaa muddo 60 maalmood kadib marka aad bixiso ogolaanshaha qiimaynta, barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah ee u horeeyana waa in lagu dhameeyaa 90 maalmood kadib marka aad siiso degmada ogolaanshaha inaad qiimayso Haddii ilmahaagu uu ku haboon yahay adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga ka horeeya, waa in barnaamijka waxbarashada khaaska ah ee ilmahaagu diyaar ahaataa ugu dambayn taariikhda dhalashada saddexaad ee ilmaha.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaagu aanu ku haboonayn waxbarashada gaarka ah ee dugsiga ka hor?

Haddii, kadib dhamaystirka qiimaynta cusub, kooxda IEP go'aamiso in ilmahaagu aanu u baahnayn adeega waxbarashada gaarka ah ee ka horaysa dugsiga, degmadu waxaa laga yaabaa, ogolaanshahaaga iyagoo haysta, inay kuu diraan adeeg bulsho oo kale iyo barnaamij caawin kara ilmahaaga Degmadu sidoo kale waxay ku diri doontaa ogaysiis qoraal ah ooh ore, kaas oo sharaxaya xuquuqdaada aad ku waajahayso go'aanka kooxda IEP iyadoo aad adeegsanayso dhexdhexaadin ama codsi dhegaysi dacwad lacag bixineed. (Fiiri qaybta " Sida loo Xaliyo Khilaafaadka ama Cabashada")

Inkasta oo ilmahaagu aan ku haboonayn adeeg waxbarasho, haddii ilmahaagu u baahan yahay taageero joogto ah xiliga fasalka lagu jiro waxaa laga yaabaa in dugsigu siiyo taageeradaa. Tusaale waxaa noqon kara ilmahaaga oo kursigiisa loo dhigo xaga hore haddii ay dhib ka haysato feejignaanta.

Ka wareegista adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga ka horeeya una wareegista adeegyada waxbarashada gaarka ah ee da' dugsiyeedka.

Haddii ilmahaagu helayay adeega waxbarashada dugsiga ka horeysa oo uu noqonayso da'da 6 jirka, kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga waxay samayn doonaan dib u qiimayn taas oo ay ka mid noqon karto:

- o Kulan go'aan lagaga gaadhayo adeegyada waxbarashada da' dugsiyeedka haboon;
- o Dib u eegista macluumaadka hadda ee barnaamijka waxbarashada ee ilmahaaga; iyo
- o Ku talinta istaraatiijiyado waxbarasho oo ka caawin doona ilmahaagu inuu ku guulaysto manhajka guud.

Haddii kooxda barnaamijka shaqsiga ahi ay go'aamsio in ilmahaagu u baahan yahay adeega waxbarashada gaarka ah ee da' dugsiyeedka, kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga ahi waxay:

- o Dib u eegi doonaan macluumaadka qiimaynta (macluumaad ka yar hal sano);
- o Go'aan ka gaadhayaan oo ay ku talinayaan qiimaynta dheeriga ah ee loo baahan yahay ee ka yar sanadka); ilaa xeerarka waxbarashada gaarka ah ee da' dugsiyeedka; iyo
- o Samaynta barnaamijka waxbarashada gaarka ah.

Haddii, dhamaystirka qiimayn cusub kadib, kooxda IEP go'aamiso in ilmahaagu aanu u baahnayn adeegyada waxbarashada da'da dugsiga, degmadu waxaa laga yaabaa, iyagoo ogolaansho kaa haysta, inay kuu gudbiyaan adeegyada bulshada iyo barnaamijyada caawin kara ilmahaaga Dugsigu wuxuu sidoo kale kuu soo diri doonaa ogaysiis qoraal ah oo hordhac ah, kaas oo sharaxaya xuquuqdaa aad ku waajihi kartid go'aanka kooxda IEP adigoo adeegsanaya dhexdhexaadin ama codsi dhegaysi dacwad lacag bixineed (Fiiri qaybta ciwaankeedu yahay " Sida loo Xalinayo Khilaafaadka iyo Cabashada")

Inkasta oo ilmahaagu aan ku haboonayn adeeg waxbarasho, haddii ilmahaagu u baahan yahay taageero joogto ah xiliga fasalka lagu jiro waxaa laga yaabaa in dugsigu siiyo taageeradaa.

Tusaale waxaa noqon kara ilmahaaga oo kursigiisa loo dhigo xaga hore haddii ay dhib ka haysato feejignaanta.

Ka wareegista adeega waxbarashada gaarka ah ee da' dugsiyeedka una wareegista adeegyada nolosha bulshada.

Iyaddoo ka bilaabmaysa marka ilmuhu yahay 14 jir [ama ka yar haddii kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiga ay go'aamiyaan in ilmuhu u baahan yahay], barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah waa inay ku jiraan:

- o Macluumaadka ku saabsan adeega kalaguurka ee diirada saaraya koorsooyinka ilmaha [sida qaadashada koorsooyin sarsare ama waxbarashada xirfadleyda ah].

Iyadoo ka bilaabmaysa 16 jirka [ama ka yar haddii kooxda IEP go'aamiso in ilmuhu u baahan yahay], barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah waa inuu ka koobnaadaa:

- o Ahdaaf ku haboon ilmahaaga oo ku salaysan tijaabo iyo qiimayn la xidhiidha tabobarka ilmahaagu u baahan doono shaqaalaynta, iyo si madax banaan u noolaanshaha, qalin jabinta
- o Adeega kala guurka oo ay ka mid yihiin koorsooyinku] loo baahan yahay si loo taageero gaadhista ujeedooyinkan.

Hawlaha kala guurka waxaa ka mid ah:

- o Waxbaris;
- o Adeegyada la xidhiidha;
- o Waayo aragnimada bulshada;
- o Dejinta ujeedooyin shaqaalayneed iyo dhinacyo kale oo nolosha dugsiga kadib; iyo
- o Haddii ay haboon tahay, kasbashada xirfada nolol maalmeedkka iyo qiimaynta xirfadaha shaqada, waa hab eegaya dabiicadaha shaqo ee ilmahaaga iyo baahiyihiisa tabobar. (Fiiri qaybta " Qeexdimaha")

Maxaa dhacay marka ilmahaaga ka qalin jabiyo dugsiga ama uu gaadho 22 jir?

Haddii ilmahaagu ka qalin jabiyo dugsiga sare oo ka qaato diblooma ama uu gaadho 22 jir, dugsiga deegaanka loogama baahna inuu u diyaaro waxbarasho dawladeed oo bilaash ah

Graduation Ka qalinjabinta dugsiga sare ee laga qaato diblooma ama gaadhista 22 waxaa loo tixgelinee isbedel ku yimid meelaynta (si kale

haddii loo dhigo, isbedel ku yimid ilmaha goobtiisa). Sidee darteed degmadu waa inay:

- o Ku siisaa adiga ama illmahaaga ogaysiis qoraal hordhac ah; iyo
- o Give Siisaa ilmaha soo koobis guusha waxbarasho ee ilmaha iyo shaqadiisa Soo koobistan waxaa ka mid ah talooyin sida looga caawinayo ilmahaagu inuu xaqiijiyo ujeedooyinka loo dejiyey dugsiga sare kadib waxaanu ku jiraa IEP.

FIIRO: Ereyga “ diblooma dugsiga sare” ka mid maaha diblooma ama digrii, sida shahaadada ama GED, GED-ga Ohio si fiican u daboolayo halbeega nuxurka aqoonta Ohio Sidaa darteed, ilmahaaga naafoka ahi ee qaatay GED waxaa laga yaabaa inuu ku noqdo dugsiga si uu u sii wato dibloomadiisa dugsiga sare ilaa sanadguurada dhalasho ee 22aad.

DIWAANADA

Ma arki karaa diiwaanada waxbarasho ee ilmahayga?

Waxaad xaq u leedahay inaad aragto dhamaan diiwaanada waxbarasho ee la xidhiidha ilmahaaga ee la soo ururiyey, la joogteeyay ama loo isticmaalay koorsooyinka dugsiga ee:

- o Dugsiga degmada; ama
- o Any Hay’ad kasta oo kale ama mac-had [oo halkan la odhanayo “ hay’ad”] Hay’ad ka qayb qaadanaysa macnaheedu waxaa weeyi hay’ad ama mac-had kasta oo ururiya, haya,ama isticmaala macluumaad la shaqsiyan loo aqoonsan karo, ama laga helo macluumaad iyadoo la raacayo qaybta B ee IDEA. Qaybta B waxay khusaysaa caruurta curyaamiinta ah ee da’doodu tahay 3-21 jir]Qaybta B waxay khusaysaa caruurta curyaamiinta ah ee da’doodu tahay 3-21 jir]

Tan waxaa ka mid ah dhamaan diiwaanada la xidhiidha ilmahaaga ku haboon adeega waxbarashada gaarka ah iyo helista waxbarasho gaara iyo tixgelinta waxbarasho dawladeed oo bilaash ahd.

Goorma ayuu dugsigu ama hay’addu kugu raacaysaa codsigayga inaan arko diiwanaada waxbarasho ee ilmahayga?

Dugsiga degmadu ama hay’addu waa inuu ogolaadaa codsigaaga inaad aragto diiwaanada waxbarasho ee ilmahaaga:

- o Habsan la’aan;
- o Ka hor shir kasta oo ku haboon barnaamij waxbarashada shaqsigu ama dhegaysiga dacwad lacag bixineed ama kulan qaraar, iyo
- o Waxaan waligeed ka badnayn 45 maalmood codsigaaga kadib

Waa maxay xuquuqdayda gaarka ah ee khuseeya diiwaanada waxbarasho ee ilmahayga?

Xaqa aad u leedahay inaad baadho oo aad dib u eegto diiwaanada waxbarashada ee ilmahaaga waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- o Waxaad xaq u leedahay inaad jawaab ka hesho dugsiga ama hay’adda aad u dirtay codsi macquul ah o sharaxaada diiwaanada;
- o Waxaad xaq u leedahay in wakiilkaagu baadho oo uu dib u eego diiwaanada waxbarashada; iyo
- o Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqulo ka mid diiwaanada waxbarashada haddii haysashada koobiyadu aanay kuu diidayn inaad baadho oo aad gorfayso diiwanada waxbarashada (tusaale ahaan, haddii aad ku nooshahay meel ka fog dugsiga ama aanad iman kartid).

Dugsiga degmadu waa inuu helaa ogolaanshahaaga ka hor inta aanu u sii dayn macluumaadka shaqsi ah ee ilmahaaga dhinacyada aan ka ahayn saraakiisha degmada iyo hay’addaha, ilaa la bixiyo ogolaansho sidaas faraya iyadoon la helin ogolaanshahaaga ku xusan 34 CFR Qaybta 99, Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Xeerka Shaqsigu (FERPA)

Ogolaanshaha waalidiinta, ama ogolaanshaha ilmo ku haboon oo gaadhay 18 jir ayaa loo baahan yahay xaaladahan soo socda:

- o Ka hor inta aan hay’addaha loo sii dayn macluumaadka shaqsigu ah ama aan la bixin adeegyada ku meelgaadhka ah; iyo
- o Haddii ilmahaaga la qoro ama la doonayo in la qoro iskuul aan dawli ahayn kaas oo aan ku oolin degmad degaanka, waa inaad ogolaanshahaaga bixisaa ka hor inta aan

saraakiisha hay'addaha iyo dugsiga aan dawliga ahayn la siin Siddoo kale waa inaad bixisaa ogolaanshahaaga ka hor inta dugsiga degaanku ama degmada uu ku yaal dugsiga aan dawliga ahayni bixin macluumaadkaadka khaaska ah.

Macluumaadka khaaska ah waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xadidnayn:

- o Magaca ilmahaaga, magacaaga, ama magaca qof kale oo ehelada ah;
- o Ciwaanka ilmahaaga;
- o Aqoonsi, sida lambarka sooshiyal sikuyuuritiga ilmaha ama lambarka ardaynimo ee ilmaha iyo
- o Liis dabeedacaha, ama macluumaad kale kuwaas oo suurtoagal ka dhigaya in qofku si shaki la'aan ah u aqoonsado ilmahaaga

Dugsiga degaanka ama hay'addu waxaa laga yaabaa inay is moodsiyaan in adiga oo waalidkii ah aad leedahay awooda aad ku baadhi karto kuna gorfayn karto diiwaanada ilmahaaga iyadoo hay'adda iyo degmadu kuu sheegaan in aanad lahayn awoodaas marka la eego sharciga Ohio ee khuseeya arimaha ilaalinta, kala taga iyo furniinka mooyaane.

Haddii mid ka mid ah diiwaanada waxbarashada uu ka mid yahay warbixin hal canug wax ka badan, waxaad xaq u leedahay inaad baadho oo aad dib u eegto kaliya macluumaadka la xidhiidha ilmahaaga ama in lagu ogeysiyo macluumaadka.

Codsigaaga, dugsiga degaanku ama hay'addu waa inay tustaa liis muujinaya noocyada iyo meelaha laga soo qaday, hayey ama ay degmadu ama hay'addu ku isticmaalaysay.

Waa maxay masuuliyada guud ee dugsiga ama hay'addu marka ay noqoto ilaalinga diiwaanada waxbarasho ee ilmahayga?

Dugsiga degmadu ama hay'addu waa inay ilaalisaa khusuusiyaada macluumaadka khaaska ah ee ilmahaaga inta la ururinayo, kaydinaayo, dadka lala wadaagayoo ama la burburinaayo.

Sarkaal jooga dugsiga ama hay'adda waa in masuul looga dhigaa ilaalinta macluumaadkan Dugsiga degmadu ama hay'addu waa inay sidoo kale shaqaalaha ururinta iyo adeegsiga

macluumaadka ku tabobartaa hanaanka iyo siyaasada. Degmo kasta ama hay'ad kasta waa inay haysaa liiska magacyada iyo jagooyinka shaqaalaha hay'adda ama degmada ee laga yaabo inay u gacan banaan yihiin macluumaadka si baadhis loogu samayn karo.

Dugsiga degaanku ama hay'addu waan inay haysaa diiwaan ay ku qoran yihiin cida loo ogol yahay inay eegaan diiwanada waxbarashada (marka laga reebo waalidiinta iyo shaqaalaha dugsiga iyo hay'addaha kale ee loo ogol yahay). Diiwaankani waa inay ku qoran yihiin magaca qofka, taariikhda qofka loo ogolaaday inuu eego diiwaanka iyo ujeedada qofka loogu ogolaaday inuu u isticmaalo diiwaanka.

Maxay yihiin xuquuqdayda khusaysa burburinta diiwaanada waxbarasho ama macluumaadka?

Dugsiga degmada ama hay'addu waa inay ku ogaysiisaa marka macluumaadkaaga shaqsiga aan loo baahnayn si loo siiyo ilmahaaga adeeg waxbarasho.

Degmada ama hay'addu waxaa laga yaabaa inay burburiso macluumaadka shaqsiga ah kadib marka ay ku ogaysiyaan arintan. Hay'adda ama degmaduna waa inay codsigaaga ku burburiyaan macluumaadka Si kastaba ha ahaatee, degmadu ama hay'addu waa inay haysaa diiwaan rasmi ah oo ah magaca ardayga, ciwaanka, lambarka tilifoona, derejada, habsanka, xiisadaha la qaatay, heerka darajada la dhameeyay iyo sanadka la dhameeyay ee bilaa xuduudka ah

Siddee loo sixi karaa diiwaanka waxbarashada ee ilmahayga?

Haddii aad rumaysan tahay in macluumaadka ku qoran diiwaanka waxbarashada ee ilmahaagu aanay sax ahayn, ay ku majaro habaabinayaan ama meel ka dhac ku yihiin xuquuqda ilmahaaga, waxaa laga yaabaa inaad dugsiga ama hay'adda waydiisato inay bedesho Dugsiga degmadu ama hay'addu waa inay go'aamisaa bal in lagu bedelo macluumaadka muddo macquul ah oo ka dambeeya codsiga.

Waa maxay dhegaysi dacwad diiwaan?

Haddii dugsigu degmadu ama hay'addu diido inay bedesho macluumaadka aad codsatay, waa inay taa kugu ogeysiisaa waana inay sidoo kale

ku ogaysiisaa in aad xaq u leedahay hesho dacwad dhegaysi diiwaan Dhegaysi dacwad diiwaan waa shir adiga lagu siinayo fursad aad ku diido macluumaadka waxbarasho ee u diiwaangashan ilmahaaga haddii aad is leedahay sax maaha, wuu majaro habowsan yahay ama wuxuu meel ka dhac ku yahay khusuusiyaada ilmahaaga ama xuquuqda kale.

Dhegaysiga dacwada kadib, haddii hay'addu ama dugsiga degmadu uu kugu raaco, waa inuu bedelaan macluumaadka oo qoraal ahaan kugu soo ogaysiiyaan. Haddii ay diidaan, waa inay xuquuqdaada wax ku qorista diiwaanada kugu soo ogaysiiyaan adiga qoraal ahaan. Qoraalku wuxuu ka kooban yahay faaladaada macluumaadka iyo sababahaaga aad ku diidan tahay go'aanka dugsiga ama hay'adda.

Qoraalkani waxaa lagu darayaa diiwaanka waxbarasho ee ilmahaaga, dugsiga degmada ama hay'addu waa inay qoraalkan hayaan ilaa inta diiwaanka ama qayb ka mid ah diiwaanka aad diidan tahay la hayo. Mar kasta oo diiwaanada ilmahaaga lala wadaagoo cid ama qaybta aad diidan tahay la siiyo cid, waa in sidoo kale loo raaciyaa qoraalkaaga.

Muxuu yahay kharashka dib u eegista diiwaanada waxbarasho ee ilmaha?

Dugsiga degmada ama hay'addu lagama yaabo inay lacag kaa qaadaan si ay kugu baadhaan ama kugu soo saaraan macluumaadka Waxa laga yaabaa inay lacag kaaga qaadan koobiyaanta diiwaanaada ilaa inta lacagtaasi aanay kuu diidayn inaa ku naalooto xuquuqdaada inaad baadho oo aad dib u eegto diiwaanada ilmahaaga

If I revoke my consent for special education services will the school district remove all references of my child having received special education and related services from my child's education records?

Degmada iskuulka lagama doonayo in ay wax ka baddasho diiwaanka waxbarasho ee ardayga si looga saaro wixii tilmaamaya in canugu uu qaato waxbarasho khaas ah iyo adeegyada la xiriira la noqoshada oggolaanshaha awgeed.

Miyay xuquuqda eegista diiwaanadu u wareegi doontaa ilmahayga mar uun?

Marka ilmahaagu gaadho 18 jir, dugsiga degmadu waa inuu xaqiijiyaa in dhamaan xuquuqaha ku taxaluqa diiwanada waxbarasho ee ilmuhu loo wareejiyo ilmaha oo adiga lagaa wareejiyo Xuquuqdan loo wareejin maayo ilmahaaga haddii , sida sharciga gobolku dhigayo, ilmuhu yahay mid aan dhamayn. (Tan macnaheedu waxaa weeyi in aanu ilmuhu is daryeeli karin) Adiga iyo ilmahaaga waa in la ogeysiisaa kala wareejin xuquuqda ah oo kasta .

Si kastaba ha ahaatee, haddii dugsiga degmadu ogaado in maxkamadu u magacowday ilaaliye ilmahaaga naafoka ah, degmadu waxay u magacaabi doontaa ilaaliyuhu inuu metelo danaha waxbarasho ee ilmaha ilaa inta uu gaadhayo 22 jir, haddii ilmuhu aanu ahayn caruurta dawlada hayso.

FIIRO: Xataa kadib marka xuquuqdaada waalidnimo u wareegto ilmaha, dugsiga degmadu waa inuu wali bixiyaa ogaysiiska dhowrista nidaamaka ee ay tahay in dugsiga ilmahaaga siiyo Tan waxaa ka mid ah koobi buugana Yaa leh IDEA?; ogeysiis hore o qoraal ah; iyo ogaysiis dacwad kasta oo ilmahaaga ku lug leh.

SIDA LOO XALINAYO KHILAAFKA IYO CABASHADA

Haddii aan qabo su'aalo ama cabasho ku saabsan waxbarashada ilmahayga, yaan la xidhiidhaa?

Waaxda Waxbarashada ee Ohio ayaa masuul ka ah xaqiijinta in caruurta curyaamiinta ahi ay helaan waxbarasho dawli ah oo bilaash ah (FAPE) ku helaan degaanka ugu xanibaad yar, sida Xeerka Hagaajinta Waxbarashada Curyaamiintu ee 2004 (IDEA) iyo shuruucda federaalka, sharciga gobolka, iyo xeerka gobolku sheegayo

“Deegaanka ugu xanibaada yar” macnaheedu waxaa weeyi in, mar kasta oo ay suurto gal tahay, dugsiga ama hay'addu ay ilmahaaga wax ku bari doonto fasal joogto ah ama degaan waxbarasho guud.

Haddii aad qabto su'aal ama cabasho ku aadan waxbarashada ilmahaaga naafoda ah ama aad tuhunsan tahay in laga yaabo in ilmahaagu

leeyahay naafonimo, waxaad marka hore la xidhiidhi dugsiga degaanka ee caruurtu dhigato Kala sheekaysiga caruurtaada macalinkooda, maamulaha dhismaha iyo xubnaha shaqaalaha ka masuulka ah waxbarashada gaark ah.

Ururo kale oo laga yaabo inay ku taageeraan ayaa ah:

Ohio's State Support Teams (SSTs)
Dugsiga degmada ee xaafadaada ayaa haya ciwaanka iyo tilfoonka xarunta SST ee kuugu dhow education.ohio.gov.

The Ohio Coalition for the Education of
Children with Disabilities
Bank One Building
165 W. Center Street, Suite 302
Marion, OH 43302-3741
(800) 374-2806

Ohio Legal Rights Service
50 W. Broad Street, Suite 1400
Columbus, OH 43215-5923
(800) 282-9181 or (614) 466-7264

Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Qaybta Dhowrista Nidaamka
25 South Front St., Mail Stop 202
Columbus, Ohio 43215-4183
Telefonka (614) 466-2650
Toll free: (877) 644-6338
Dir: (614) 728-1097

Maxaa dhacaya haddii dugsiga iyo anigu aan isku diidno ku haboonaanta ilmahayga ee adeeg waxbarasho gaar ah ama helista adeeg waxbarasho gaar ah?

Khilaafaad badan ayaa lagu xalin karaa haddii lala xidhiidho ilmahaaga macalinkiisa, maamulaha ama shaqaalaha kale ee dugsiga.

Sidoo kale waxaa jira nidaam “ qaraarada muranka” oo uu sharciga federaalka iyo ka gobolku dhigeen si lagaaga caawiyo in laga hadlo arimahaaga dugsiga degmada. Nidaamyadan waa kuwan hoos ku taxan, mid kasta oo ka mid ahna waxaa lagu sharaxayaa bogaga soo socda.

o Gorfayn maamul

o Dhexdhexaadin

o Tashiilaatka IEP

o Nidaamka cabashada gobolka

o Dhegaysi dacwad lacageed oo aan dheeli tirnayn; iyo

o Daadihintu kulan qaraareed oo ka horeeya dhegaysiga dacwada lacagta

Waxaa ugu fiican in marka hore la isku dayo in khilaafka lagu dhameeyo heer degmo iyadoo arintaada lala soo qaadayo xubin shaqaalaha degmada ah marka la jooga shir kiiseedka ama gorfaynta maamullka (wada hadal xubnaha shaqaalaha dugsiga ama kormeeraha dugsiga).

Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaad si toos ah u doonato nidaamka qaraarada khilaafka ee gobolka, Daadihintu IEP, Cabashada gobolka, dhagaysiga dacwad lacageed aan dheeli tirnayn kuulka degmada waxaa laga yaabaa in ay isticmaalaan dalabyadan heer-gobol iyo degmo.

Yaa fayl garayn kara cabasho ama codsi dacwad xuquuqda muwaadinka? Maxay yihiin arimaha la xalin la soo qaadi karo ee la xalin karo marka la fayl gareeyo cabasho, maxayse yihiin arimaha la soo qaadi karo ama ama la xalin karo haddii la codsado dhegaysi dacwad xuquuqda muwaadinka?

Farqigu waa sidan:

Cabashooyin:

o Cid walba (oo ay ka mid yihiin waalidiinta iyo hay'addu) waxaa laga yaabaa inay xereeyaan cabasho rasmi ah oo qoraal ah

o Qof walba wuu sheegan karaa inuu jiray meel ka dhac marka la eego IDEA ama xeerarka ama sharciga waxbarashada gaarka ah ee Ohio.

o Cid walba way soo qaadi kartaa arin ku saabsan ilmo ku haboon adeeg waxbarasho gaar ah ama helista adeeg waxbarasho gaar ah sida ku xusan sharciga IDEA ama xeerarka ama sharciga gaarka ah ee Ohio. Arrimo ayaa laga yaabaa in lagu soo qaado cabasho ku saabsan nidaamka waxbarashada gaarka ah

Dhegaysiga dacwada xuquuqda muwaadinka:

o Waalid ama hay'ad dawladeed ayaa laga yaabaa inay codsato dhegaysi dacwad xuquuqda muwaadinka

- o Waalid ama hay'ad dawli ah (oo uu ka mid yahay dugsiga degmadu) wuu sheegan karaa inuu jiray meel ka dhac sharciga IDEA ama sharciga waxbarashada gaarka ah ee Ohio.
- o Waalidiinta ama hay'adda dawliga ah waxaa laga yaabaa inay soo qaadaan arimo ku saabsan ilmo ku haboon adeega waxbarashada gaarka ah ama helista adeeg waxbarasho gaar ah sida uu sheegayo sharciga IDEA ama xeerka waxbarashada gaarka ah ee Ohio
- o Waxaa laga yaabaa in waalidku soo qaado arimo ku saabsan waalidiinta ilmaha oo kaliya, laakiin lagama yaabo inuu soo qaado arimo ku saabsan habdhaqanka nidaamka waxbarashada gaarka ee caruur kale.
- o Hay'ad dawli ah waxaa laga yaabaa inay soo qaado arimo ku saabsan habdhaqanka nidaamka waxbarashada gaarka ah ee caruur kale.

Gorfayn maamul

Waxaad xaq u leedahay inaad maamulaha dugsiga u soo bandhigto cabashooyin khuseeya ilmahaaga qiimayntiisa iyo meelayntiisa, oo la xidhiidha helista adeeg waxbarasho oo haboon oo ilmahaagu helo. Gorfaynta maamulku waxay ku lug leedahay arimahan soo socda:

- o *20 maalmood gudahood oo aad ku helayso cabashadaada:* Kormeeraha (ama qof kormeeruhu igmaday) ayaa u samayn doona gorfaynta si habsan la'aan ah; 2) waxaa laga yaabaa inuu qabto dhegaysi maamul; iyo 3) wuxuu qoraal ku ogaysiin doona dhinacyada go'aanka qoraal
- o Gorfaynta ayaa ka dhici doonta goob iyo goor ku haboon cid walba
- o Kormeeruhu waa inuu sameeyaa qiimayn oo uu qabtaa dhagaysi maamul.
- o Dedaal kasta ayaa la samayn doonaa si loo xaliyo khilaaf kasta oo yimaad xiliga gorfaynta maamulka
- o Adiga iyo dugsigu waxaad xaq u leedihiin inaad ku casuuntaan kuwa kale inay ka qayb qaataan gorfaynta, waxaa ka mid ah dadkaa garyaqaanada

DHEXDHEXAADIN

Waa maxay dhexdhexaadintu?

Dhexdhexaadintu waa hab tabaruc ah oo lagu dhamaynaayo muranka u dhexeeya laba dhinac Si dhexdhexaadintu u suurtoogasho, labada dhinac waa inay isku raacaan inay dhameeyaan oo xaliyaan cabashadooda Habka dhexdhexaadinta waxaa hogaamiya dhinac saddexaad oo u tabobaran isla markaana dhexdhexaad ah oo la yidhaa dhexdhexaadiye, kaas oo ka caawiya dhinacyada kale inay codkooda hadlaan oo ay xal u cuntama u helaan arimahooda

Waa maxay faa'iidooyinka dhexdhexaadintu?

- o Waalidiinta iyo hogaamiyayaasha dugsiga degmada ayaa si wada jir ah u samaynaya heshiiska u dambeeya halkii uu ka samayn lahaa qof dibada ka yimid .
- o Dhinacyadu way wada shaqaynayaan waxaanay masuul ka yihiin natiijada.
- o Heshiis ay gaadhaan labada dhinacba wuxuu keenaa ku qanacsanaan dhinacyada oo dhan helaan
- o Dhexdhexaadintu waxay siisaa labada dhinac fursad ay ku fahmaan aragtiyaha kala duwan
- o Dhexdhexaadintu way ka kharash yar tahay muranadana waxaa lagu xaliyaa si ka dhakhso badan siddii dhegaysiga dacwada lacagta.
- o Inta badan marka heshiis qoraal ah lagu gaadho dhexdhexaadintu, dhinacyadu waxay aad ugu dhow yihiin inay heshiiskaa ku dhegaan.

Goorma ayaa dhexdhexaadintu la heli karaa?

Dhexdhexaadintu waxaa la heli karaa xaaladahan soo socda:

- o Mar kasta oo adiga ama dugsigu aad danaynaysaan bixinta adeeg waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha Waxaad dhexdhexaadintu u codsan kartaa si toos ah adiga oo aan xerayn qoraal cabasho oo rasmi ah iyo adigoo xerayn codsi dhegaysi dacwad.
- o Marka aad xerayso cabasho qoraal ah oo rasmi ama codsi dhegaysi dacwad Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa dhexdhexaadintu doona labada dhinac
- o Dhexdhexaadintu si bilaash ayaa loogu samaynaya labada dhinac Waaxda

waxbarashada ee Ohio ayaa bixinaysa kharashka dhexdhexaadinta, oo uu ku jiro kharashka kulanada iyo waqtiga dhexdhexaadiyaha Si kastaba ha ahaatee, dhinacyadu waxay iska bixinayaan kharashkooda oo uu ka mid yahay kharashka garyaqaanka ay soo xusheen.

- o Marka labada dhinac isku raacaan inay ka qayb qaataan dhexdhexaadinta, Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa siinaya dhinacyada fursad ay ku doortaan dhexdhexaadiye.
- o Marka dhexdhexaadiye la doorto, dhexdhexaadiyuhu wuxuu la xidhiidhi doonaa labada dhinac si ay u samaystaan waqtiga, goobta, iyo taariikhada dhexdhexaadinta.

Maxay tahay inaan ka barto dhexdhexaadinta?

Qodobadan dhexdhexaadinta ee soo socdaa waa muhiim:

- o Ka qaybgalka labada dhinac waa tabaruc.
- o Dhexdhexaadinta looma isticmaali karo in lagu dadafeeyo ama dib loogu dhigo xuquuqdaa dhegaysi dacwadeed ama xaq kale oo kasta uu ku siiyey IDEA.
- o Dooda dhex marta dhinacyada inta lagu jiro dhexdhexaadinta waa inay sir ahaataa oo aan loo isticmaalin cadayn marka dhagaysi dacwadeed jirto ama aan loo isticmaalin cadaynta talaabo sharci oo ka dambaysa dhexdhexaadinta
- o Waa inaan dhexdhexaadinta loo duubin si elektaroonic ah
- o Waaxda Waxbarashada ee Ohio waxay haysaa liis dhexdhexaadiyayaal khibrad leh oo aqoon u leh sharciga iyo xeerarka la xidhiidha bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha
- o Dhexdhexaadiyuhu waa inuusan ahayn shaqaale ka tirsan Waaxda Waxbarashada Ohio ama dugsiga degaanka ee ku lugta leh waxbarashada ama daryeelka ilmaha
- o Qof aqoon u leh inuu noqdo dhexdhexaadiye maaha shaqaalaha dugsiga degaanka ama Waaxda Waxbarashada Ohio maxaa yeelay isaga ama iyada waxaa lacagta uu ku shaqaynayo/so siinaya hay'adda

- o Adiga iyo dugsigu waa inaad ku lug leedihiin doorashada dhexdhexaadiyaha waana inaad isku raacdaan doorashada.
- o Dhexdhexaadiyuhu waa in aanu dan shaqsi lahayn taas oo ku keenaysa inuu u xagliyo dhinac.
- o Dhexdhexaadiyaha waa inaan loogu yeehdin makhraati hawlaha mustaqbalka ee kulanada .
- o Kulan kasta oo ka mid ah hawsha dhexdhexaadinta waa in la qorsheeyaa iyada oo aan la habsaamin waana in lagu qabtaa meel ku haboon dhamaan dhinacyada.
- o Dugsiga degaanka ama hay'adda ku lugta leh khilaafka waa inay dirataa wakiil awood uu balan ku qaado leh.
- o Haddii adigu iyo dugsigu aad dhexdhexaadinta khilaafka ku dhamaysaan, dhinacyadu waa inay gaadhaan heshiis sharci oo hoosta ka xariiqiya qaraaar oo mid kasta oo idinka mid ah ku xajinaya heshiishka. Dhinac kastaa waa inuu helaa koobi saxeexan oo ka mid ah heshiiska dhexdhexaadinta marka shirku dhamaado.
- o Haddii heshiis la gaadho, waa in dugsiga degmada iyo waalidku ay meel mariyaan dhamaan qodobada heshiiska
- o Haddii heshiiska dhexdhexaadintu uu u baahdo isbedel ku yimaad barnaamijka waxbarashada shaqsigaa ah, kulan IEP waa in lagu qabtaa muddo 20 maalmood gudahood ah marka la saxeexo heshiiska, ama siday doonto ha u dheeraato'e mudada la isku raaco xilig dhexdhexaadinta.
- o Haddii aad codsatay dhegaysi dacwad lacageed ama aad xeraysay cabasho qoraal ah oo rasmi ah kadibna heshiis laga gaadho inta dhexdhexaadinta lagu jiro dhamaan arimaha, waa inaad la noqotaa codsigaaga dhegaysiga dacwada lacagata ama codsigaaga baadhista cabashooyinkaaga

Heshiiska lagu gaadhay dhexdhexaadinta miyuu sharciyan qabanayaa labada dhinac?

Haddii khilaafka lagu dhameeyo habka dhexdhexaadinta, dhinacyadu waa inay la yimaadaan dokumenti muujinaya heshiishka Dhinac kastaa waa inuu furaa dacwad ka dhan ah iyaga haddii ay jebiyaan heshiiska. Dokumentigu sidoo kale:

- o Wuxuu xusayaa in dhamaan wada hadalada dhacay intii lagu jiray dhexdhexaadinta sir laga dhigay oo aan loo isticmaali karin cadayn marka dhagaysi dacwadeed jiro ama ay jirto talaabo sharci oo ka dambaysa dhexdhexaadintu timaad;
- o Waxaa saxeexay waalidiinta iyo wakiilka hay'adda ee leh awooda uu balan u gali karo hay'adda; iyo
- o Waxaa lagu fulin karaa maxkamad kasta oo ku taal maraykanka.

FIIRO: Dugsiga degaanku waxaa laga yaabaa inuu siiyo waalidiinta habab kale oo lo xalin karo khilaafaadka waalidiinta iyo dugsiga ee doorta in aanay isticmaalin habka dhexdhexaadinta. Hababkani waxaa laga yaabaa inay waalidiinta iyo dugsiyada siiyaan fursad ay kula kulmaan qof dhexdhexaad ah oo heshiis kula jira Xarunta Macluumaadka iyo Tabobarka Waalidiinta ama urur kale oo ku haboon. (Fiiri qaybta “ Sida loo Xaliyo Khilaafaadka ama Cabashada”) Qofkan ayaa sharixi doona faa'iidooyinka habka dhexdhexaadinta waxaanu ku dhiirigelin doonaa waalidiinta inay isticmaalaan Waaxda Waxbarashad ee Ohio ayaa qabta kharashka kulanka. Dugsiga degmadu waxaa laga yaabaa inuusan dafirin ama dib u dhigin xaq waalidiinta ee dhagaysiga dacwada haddii waalidku aanu ka qaybgelin kulankan.

Dib miyaan u heli karaa lacagtii garyaqaanka ee aan ka bixiyey dhexdhexaadinta?

Waxaad masuul ka tahay bixinta lacagta garyaqaanka ilaa heshiiska dhexdhexaadintu sheego in dugsigu masuul ka yahay lacagta garyaqaanka.

Sideen u codsadaa dhexdhexaadin ama u hela macluumaad ku sahabsan dhexdhexaadin?

Si aad u codsato dhexdhexaadin, la xidhiidh:
 Ohio Department of Education
 Office for Exceptional Children
 Qaybta Dhowrista Nidaamka
 25 South Front St., Mail Stop 202
 Columbus, Ohio 43215-4183
 Telefonka (614) 466-2650
 ODE Toll Free: (877) 644-6338
 Fax: (614) 728-1097.

DAADIHINTA IEP

Waa maxay daadihintu IEP?

Marka dhexdhexeediye waxbarashada gaarka ah oo qaba tababar sida loo sameeyo barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah oo dhex ah la waydiisto inuu xubnaha kooxda IEP inay ilmo u sameeyaan barnaamij waxbarasho shaqsi ah ayaa la yidhaa daadihintu IEP “Daadihiyuhu” wuxuu furayaa wada hadalka u dhexeeya kooxda, wuxuu hagayaa dooda waxaanu kooxda ka caawinayaa inay dhameeyaan khilaafka. Daadihiyuhu wax go'aan ah ma gaadhaya laakiin wuxuu ka codsanayaa xubnaha kooxda inay xal helaan

Sideen u codsadaa daadihin IEP?

Si aad u codsato daadihin IEP, la xidhiidh:

Ohio Department of Education
 Office for Exceptional Children
 Qaybta Dhowrista Nidaamka
 25 South Front Street
 Mail Stop 202
 Columbus, OH 43215-4183
 Telefonka: (614) 466-2650
 Toll free: (877) 644-6338

Si daadihintu IEP u dhacdo, adiga iyo dugsigu waa inaad si tabaruc ah uga qayb qaadataan. Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa kaa caawin doona inaad la xidhiidho dugsigaaga degmada si aad u ogaato bal inay danaynayaan daadihin IEP

HABKA CABASHADA

Waxaad macluumaad kaga raadsan kartaa tilifoon ahaan, waraaq, iimayl ama faakis aad u dirto Xafiiska Caruurta Gaarka ah :

- o Habka loogu soo cawdo;
- o Koobi ah xeerka iyo shuruucdaooda ah;
- o Macluumaad dheeraad ah ku sahabsan arinta; ama
- o Inay kaa caawiyaan qofkii saxdii ee kala xidhiidhi lahayd urur, hay'ad ama dugsi

Xidhiidhaha raadsashada macluumaadk guud, waxaa la yidhi waydiimo loomana tixgelinayo cabasho ahaan.

Waxaad waydiimo ku sahabsan waxbarashada dawliga ee ilmaha naafoda ah u diri kartaa

Waxda waxbarashada ee Ohio oo ciwaankoodu yahay sidan hoos ku qoran:

Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Qaybta Dhowrista Nidaamka
25 South Front Street
Mail Stop 202
Columbus, OH 43215-4183
Talefonka: (614) 466-2650
Toll free: (877) 644-6338

Habka cabashadu muxuu qabtaa?

The complaint process provides a remedy for violations of the IDEA and the Ohio's Operating Standards and law. Habkani wuxuu saamaxayaa in cabashooyinka si dhakhso ah oo bilaa lacag ah ay u xaliyaan waalidiinta ama dugsigu. Sidoo kale habka cabashadu waa mid ka khilaaf yar dhagaysiga dacwada lacagta

Muxuu yahay sharciga federaalka ee gobolka siinaya awooda u yeelanayo hab cabasho?

Awood ka hawl-gelida cabashooyinka ee hay'adda gobolka waxaa bixinaya xeerka federaalka, Qaanuunka 34 ee Federaalka (C.F.R).

Siddee iyo halkee ayaan dacwad ka xereeyaa?

Cabashada qoraalka ahi waa inay leedahay saxeexa asalka (koobi iyo shaambada maya) ah ee dhinaca cabanaya waana in loo diraa:

Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Qaybta Dhowrista Nidaamka
25 South Front Street
Mail Stop 202
Columbus, OH 43215-4183

Waxda Waxbarashada Ohio ahi aqbali maayo:

- o Cabashooyinka faakiska lagu soo diray;
- o Cabashooyinka iimaylka lagu soo diray; ama
- o Cabashooyinka bilaa magaca ah.

Ma inaan degmada cabashadayda u sii qadimaa?

Haa. Iyaddoo la tixraacayo xeerka federaalka 34 CFR

What does my complaint have to include?

Cabashadaada waa inay ka mid ahaadaan:

- o Qoraal sheegaya in dugsiga dawladu uu meel ka dhac ku sameeyay sharciga federaalka ama/iyo xeerka gobolka iyo/ama qaanuunka khuseeya waxbarashada gaarka ah;
- o Xaqiiqada aad ku salaynayso cabashada. ("Xaqiiqo" waxaa lagu qeexay dhacdo dhab ah oo dhacday. Tan waxaa ka mid ah sharaxaad arrinta iyo taariikhda arintu dhacday);
- o Soo cawdaha saxeexiisa asalka ah iyo macluumaadka xidhiidhka;
- o Xalka la soo jeediyay ee mushkilada. Fadlan ogow in xalkaaga la soo jeediyay la tixgelin doono. Si kastaba ha ahaatee, xalka u dambeeya ee cabashada waxaa go'aan ka gaadhaya Xafiiska Caruurta Gaarka ee Waxda Waxbarashada ee Ohio (OEC);
- o Haddii aad sheeganayso meel ka dhac marka ilmo ama koox caruur ah, waxaad sidoo kale ku dartaa:
 - Magaca ama magacyada caruurta ku lugta leh cabashada;
 - Ciwaanka ilmaha;
 - Ciwaanka qofka xeraynaya cabashada (haddii ay ka duwan tahay ciwaanka ilmaha);
 - Marka ay tahay ilmo bilaa hoy ah ama dhalinyar ku dar macluumaadka xidhiidhka ee ilmaha (marka ilmuhu buuxiyaha qeexdinta ilmo bilaa caruur ah ee qaybta
 - Magaca dugsiga ilmuhu dhigto;
- o Cabashadu waa inay xustaa meel ka dhac dhacay waxaan ka badnayn sanad ka hor markii cabashada la helay; iyo
- o In dhinaca cabashada soo gudbinayaa koobi u diro degmada laga cabanayo isla marka dacwada loo soo gudbiyo Xafiiska Caruurta Gaarka ah.

Waa maxay isku filaansho?

Si cabasho loo baadho, waa in cabashada ay ku jirtaa macluumaadka ku taxan qaybta soo socota, "Cabashadayda maxay tahay inay ku jiraan?" Haddii cabashadaada aanu ku jirin dhamaan macluumaadkani, Xafiiska Caruurta Gaarka ah waxaa laga yaabaa inay tixgeliyaan dhamaan ama qayb ka mid ah inay tahay "qabyo". "

Maxaa dhacaya haddii cabashadayda oo dhan ama qayb ka mid ah la ogaado inay qabyo tahay

Haddii cabashadaada oo dhan la ogaado inay qabyo tahay, cabashada la baadhi maayo waxaana lagu soo diri doonaa “waraaqda qabyada” taas oo sharaxaysa sababta aan loo baadhayn cabashadaada. Waraaqdu waxay kuu sheegi doontaa waxa aad u baahan tahay inaad ka bedesho ama ku darto cabashada si Xafiiska Caruurta Gaarka ah ay aqbali doonaan baadhista cabashadaada.

Markaad hesho waraaqda qabyada, waxaa laga yaabaa inaad waraaqda ku darto macluumaad maqnaa oo aad dib u soo gudbiso. Cabashada dib loo soo gudbiyey waa inay ka hadlaysaa meel ka dhac dhacay waxaan ka badnayn hal sano ka hor taariikhda Xafiiska Caruurta Gaarka ahi helay cabashada

Maxaa dhacaya haddii kaliya qayb ka mid ah cabashadayda la ogaado inay tahay qabyo?

Kaliya qayb ka mid ah cabashadaada ayaa laga yaabaa inay tahay qabyo haddii ay ka maqan tahay xaqiiqo ama qodob kale.

Haddii cabashadaadu, gabi ahaan ama qayb ahaan, ay xaqiiqo ka maqan tahay, cabashada waxaa loo tixgelin doonaa qabyo arinta xaqiiqada maqani sida tooska ah ula xidhiidho. Qaybta cabashada ee ay ka maqan tahay xaqiiqadu la baadhi maayo. Haddii cabashada ay ka mid yihiin arimo kale oo xaqiiqdooda la hayo, arimahan waa la baadhi doonaa, haddii arrintu tahay masuuliyadu tahay Xafiiska Caruurta Gaarka ah.

Ka waran haddii cabashadayda ay ka maqan tahay qodob aan ahayn xaqiiqo?

Haddii cabashadaada ay maqan yihiin mid ka mid ah kuwan soo socda:

- o Magaca ilmaha;
- o Ciwaanka ilmaha;
- o Ciwaanka qofka soo gudbinaya cabashada (Haddii uu ka duwan yahay ciwaanka Ilmaha);
- o Macluumaadka xidhiidhka; ama
- o Magaca dugsiga ilmuhu dhigto;

La taliyaha waxbarashada ayaa la soo xidhiidhi doona soo cawdaha isagoo u sheegaya in mid ka

mid ah ama ka badan waxyaabaha kor ku qorani ay maqan yihiin. Soo cawdaha ayaa kadib qaadan doona shan maalmood (oo ka bilaabmayso maalinta lala xidhiidhay la taliyaha waxbarashada) Soo cawdaha ayaa macluumaadka qoraal ahaan ugu diri doona la taliyaha kaas oo baadhaya cabshada. Haddii qodobka maqan aan loo gudbin la taliyaha waxbarashada muddo shan maalmood ah gudahooda, cabashada la baadhi maayo.

Haddii aan fahmi waayo sababta cabashadayda loo baadhi waayay, ama haddii aan u baahdo inaan hagaajiyo cabashadayda, yaa I caawin kara?

Hay'addaha ku caawin kara waa:

o Ohio Department of Education, Office for Exceptional Children;

o Isbahaysiga Waxbarashada Caruurta Curyaamiinta ah ee Ohio(OCECD); iyo

o Hay'adda Xuquuqda Sharciga (OLRS).

Macluumaadka xariirka waxaa laga helaa boggaga 29 iyo 30.

Yaa go'aam la gaadhaya sharciga, xeerka ama qaanuunka meel ka dhaca lagu sameeyay?

Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa go'aamin doona sharciga la leeyahay waa la jabiyeey iyado sharcigaas lagu xusi doonoo baadhista

Sideen ku ogaanayaa in Xafiiska Caruurta Gaarka ahi uu helay cabashadayda?

Shan maalm-shaqo gudahood marka Xafiiska Caruurta Gaarka ahi helo cabashada qoran ee saxeexan, waxay kuu u soo diri doonaan qofka cabashada so xereeyay Xafiisku wuxuu sidoo kale waraaq u diri doonaa dhinacyadan soo socda:

o Waalidiinta/ilaaliyaha;

o Ardayga, haddi ardaygu gaadhay da'da 18 jirka; iyo

o Kormeeraha dugsiga .

Waraaqda cadaynta ah maxaa ku qoran?

The acknowledgment letter will include the following information:

- o Ogeysiiska taariikhda Xafiiska Caruurta Gaarka ahi helay cabashada;
- o Aqoonsiga macluumaadka xidhiidhka ee la taliyaha waxbarasho ee baadhi doona cabashada;
- o Ogeysiis fursad dhinacyada ah ama, haddii ay haboon tahay, dhinaca sadexaad ee cawduhu inay keenaan macluumaad dheeri ah;
- o Ogeysiis sheegaya in waraaq natiijada ah la soo saari doono muddo 60 maalmood ah gudahood maalinta Xafiiska Caruurta Gaarka ahi heli cabashada haddii aan muddo kordhin la samayn Marka arinku sidan yahay, waraaqda natiijada waxaa la soo saari doonaa maalinta taariikhda ku cad waraaqda muddo kordhinta
- o Ogeysiis haddii cabashada “ la hakiyo” (dib loo dhigo) iyaddoo la sugayo natiijada dhegaysiga dacwada. Marka ay sidan tahay, waqtiga 60-ka maalmood ahi wuxuu doonaa (a) taariikhda sarkaalka dacwada dhegaysanayaa uu soo saaro go’aankiisa ee Xafiiska Caruurta Gaarka ahi go’aamiyo in go’aanka sarkaalka dacwadu aanu wax ka qaban arimihii laga soo cawday
- o Ogeysiin dhinacyadu inay galaan dhexdhexaadin cabashada.

FIIRO: Haddii garyaqaan metelo mid ka mid ah dhincayada, waxay noqon doontaa masuuliyada garyaqaanka inuu la xidhiidho la taliyaha waxbarashada oo ka codsado koobiyo dhamaan waraaqaha loo soo gudbiyey.

Degmadu miyay u soo jeedin kartaa waalidiinta inay xaliyaan cabashada ka hor inta Xafiiska Caruurta Gaarka ahi aanu soo saarin waraaqda natiijada?

Haa, degmadu waxaa laga yaabaa inay keento soo jeedin si loo xaliyo cabashada ka hor inta aan waraaqda natiijada la soo saarin.

Dhinacyada ku lugta leh cabashadu miyay dhexdhexaadin ka gali karaan arinta cabashada iyagoo isticmaalaya dhexdhexaadiyaasha Caruurta Gaarka ah?

Haa, haddii aad tihiin waalid ama dugsiga degmada ama hay’ad kale iyo haddii aad jeceshahay inaad dhexdhexaadin isticmaasho dhexdhexaadiyaasha Caruurta Gaarka ah, fadlan

ogeysii la taliyaha waxbarashada u xilsaaran cabashada.

Maxaa la sameeyaa marka la baadhayo cabashada?

Xafiiska Caruurta Gaarka ah waa inuu sameeyaa baadhis cabashada oo ay ka mid tahay dib u eegista dhamaan diiwaanada waxaana laga yaabaa inay ka mid noqonto baadhis isla goobta ah.

Waraaqda natiijada waxaa lagu diri doonaa muddo 60 maalmood gudahood ah oo ka bilaabmayso maalinta cabashada saxeexan ee qoraalka ah uu helay Xafiiska Caruurta Gaarka ah. Sida waafaqsan 34 C.F.R. §300.152 (b)(1), waxaa dhici karto in Xafiiska Caruurta Aan Caadiga Ahayn uu waqti dheeraad ah bixiyo taasoo ugu wacan labo asbaab: (1) Dhinacyada waxay ku heshiyeen dhex dhexaadin ama habka kale ee lagu xalliyo khilaafka; (2) Xaalad aan caadi ahayn. Xaaladaha aan caadiga ahayn waxaa mid mid go’aan uga gaadhaya Xafiiska Caruurta Gaarka ah.

Haddii cabashadu tahay dhegaysi dacwad , Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa cabashada hakin doona ama arimahan cabashada ee qaybta ka ah dacwada ilaa dhamaadka dacwada Marka sarkaalka dhegaysiga dacwadu soo saaro go’aan, ama dhegaysiga la laalo ama la joojiyo, arinta dib ayaa loo eegi doonaa. Haddii ay jiraan arimo laga cabanayo oo aan lagu soo hadal qaadin dhegaysiga dacwada, arimahan waxaa lagu baadhi doonaa muddo 60 maalmood, oo ka bilaabmayso taariikhda sarkaalka dacwadu soo saaro go’aan kama dambaysa ah ama codsiga dacwada la laalo ama la joojiyo.

Maxaa dhacaya marka Xafiiska Caruurta gaarka ahi uu dhameeyo baadhistiisa?

Marka baadhistu dhamaato, Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa go’aan ka gaadhi doona bal in degmadu ay raacday (u hogaansan tahay) sharciga iyo xeerarka waxbarashada gaarka ah ee ku haboon Go’aaminta in degmadu raacday amase aanay raacin arin kasta sharciga waa inuu ku salays naadaa xaqiiqada iyo sharciga, xeerarka iyo halbeegyada ku haboon. Xafiiska caruurta waa inuu qoraal ku ogaysiiyaa dhinacyada natiijada iyo sababta natiijo noocan ah.

Waa maxay war-doon dheeri ahi?

Inta la waddo baadhista cabasho ee rasmiga ah, Xafiiska Caruurta Gaarka ahi waxaa laga yaabaa inuu helo meelo dheeri ah oo aanay degmadu raacin xeerka Meelahan dheeriga ah ee aan “ la raacin” sharciga waa meelo cusub oo aan hore ugu jirin cabashaddii hore ee la soo gudbiyey.

Hay’ad sharciga iyo xeerka xoojisa ahaan, oo ay ku jiraan IDEA, Xafiiska Caruurta Gaarka ah waa inuu degmooyinka kala taliyaa meelaha ay danaynayso ee la raacin sharciga iyo xeerka. Haddii Xafiiska Caruurta Gaarka ahi helo meelo degmadu aanay raacayn xeerka, waxay dhamaadka waraaqda natiijada ku qori doontaa meeris odhanaya inay jirto meel la danaynayo iyo in Xafiiska Caruurta Gaarka ah uu la xidhiidhi doona degmada si ugala sheekaysto arinta isla markaana u siiyo taageero farsamo. Taageerada farsamo ayaa la yidhaa “War-doon dheeri ah.”

War-doonka dheeriga ahi wuxuu gaar ka noqon doonaa baadhista cabashada asalka. Warbixinta war-doonka dheeraadka ah loo gudbin maayo soo cawdaha ilaa soo cawduhu uu codsado diiwaano muujinaya war-doonka dheeriga ah.

Marka war-doon dheeriga ah uu samaynayo, Xafiiska Caruurta Gaarka ahi wuxuu waraaq u gaar ah degmada. War-doonka dheeriga ah waxaa ka mid noqon kara codsi lagu doonayo diiwaano dheeri ah ama macluumaad ama waxaa ka mid noqon karta booqasho ay shaqaalaha xafiisku caruurta ku booqdaan meeshooda. Haddii la ogaadho in degmadu aanay raacayn IDEA ama shuruudaha u adeegista caruurta curyaamiinta, Xafiiska Caruurta Gaarka ahi wuxuu bixin doonaa taageero farsamo si loo saxo mushkilada.

XUQUUQDA MUWAADINKA

Waa maxay habka dhegaysi dhexdhexaad oo ku sahabsan xuquuqda muwaadinka?

Dhegaysi dacwad xuquuqda muwaadinka oo dhexdhexaad ah waa dacwad taas oo loogu talagalay in lagu xaliyo khilaafka Khilaafaadkani waxaa laga yaabaa inay ku sahabsan yahay qiimaynta ilmahaaga, barnaamijka waxbarashada shaqsiga, adeegyada,

meelayn waxbarasho (goobta) ama ama wax kasta oo khuseeya waxbarashada dawliga ah ee bilaashka aha Dacwada waxaa laga yaabaa inay ku jiraan macalimiinta ama shaqaalaha kale ee dugisga iyo dadka kale ee bixiya adeega la xidhiidha waxbarashada khaaska

Yaa codsan kara dhegaysi dacwad dhexdhexaad ah?

Waalidiinta, dugsiga degmada iyo hay’addaha kale ee dawliga (sida gudiyada degmada ee maskaxda iyo naafonimada korniinka, xarumaha horumarka iyo waaxda adeegyada dhalinyarta).

Si loo bilaabo dhegaysiga dacwada, dhinac baa wuxuu dhamaystirayaa oo gudbinayaa foomka “Cabashada dhegaysiga dacwada iyo codsiga dhegaysiga dacwada” ee ku yaal xaga dambe ee foomka Wixii imika ka dambeeya buugan, habkan waxaa la odhan doonaa “Cabashada dacwada iyo codsiga dhegaysiga”

Yaa fulinaya dhegaysiga dacwada?

Sarkaalka dhexdhexaad ah ayaa qaban doona dhegaysiga.

Ohio, sarkaalka dacwada dhegaysanayaa:

- o Waa inuu ahaadaa garyaqaan;
- o Waa inuu dhameystaa tababar ay bixiso Waaxda waxbarasha ee Ohio
- o Ma noqon karo shaqaalaha dugsiga;
- o Ma yeelan karo dano shaqsi iyo mid mihnadeed oo keeni karo inuu u xagliyo dhinaca marka uu dacwada dhegaysanayo;
- o Waa inuu fahansan yahay sharciga IDEA, sharciga gobolka iyo federaalka, iyo sida federaalka iyo gobolku sharciga u fasiraan;
- o Waa inuu leeyahay aqoonta iyo awooda uu ku fulinayo dacwad isagoo isticmaalaya sharciga; iyo
- o Waa inuu leeyahay awooda iyo aqoonta uu ku samaynayo go’aano iyadoo loo eegayo sharciga haboon

Dugsiga gobolka iyo degaanku wuxuu bixin karaa liiska saraakiisha dacwada iyo khibradooda Liiskan waxaa lagu qoray boga internetka ee Waaxda Waxbarashada Ohio, www.ode.state.oh.us Saraakiisha dhegaysiga dacwada

Yaa bixinaya kharashka?

Dugsiga iskuulka ayaa bixinaya lacagta sarkaalka dhegaysiga dacwada Si kastaba ha ahaatee, sarkaalka dhegaysiga dacwada lacagta dugsigu siinayaa darteed looma tixgelinayo shaqaale dugsiga ah

Waa inaa bixisaa kharash kasta oo ka yimaad dhinacaaga, oo uu ka mid yahay kharashka garyaqaanka, makhaatiyada iyo khubarada aad adeegsato iyo koobiyada iyo kharashaadka dirista waraaqaha

Ma inuu garyaqaan xereey codsiga dhegaysiga dacwada oo uu I metelo xiliga dacwada baa?

Maya, waxaa laga yaabaa inaad adigu xerayso codsiga dhegaysiga dacwadaada oo haddii aad jeceshahay dacwada adigu is difaacdo Dugsiga iskuulka ayaa yeelan doona garyaqaan.

Sidee baan u codsadaa dhegaysi dacwad dhexdhexaad ah?

Waad codsan kartaa dhegaysi dacwada adigoo xeraynaya codsi dhegaysi iyo cabasho dacwadeed. Ogeysiiskaaga cabashadu (fiiri su'aasha xigta) waa inuu noqdaa mid qoraal oo loo diray dhinacyadan soo socda:

- o Cabashada dacwada ee asalka ah (maaha koobiga) u dir kormeeraha dugsigaaaga;
- o U dir nuqul cabashada nidaamka jira ama faagis ugu dir:
Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Qaybta Dhowrista Nidaamka
25 South Front Street
Mail Stop #202
Columbus, Ohio 43215-4183
Fax (614) 728-1097

Waxaa laga yaabaa inaad dhamaystirto oo aad gudbiso foomka ODE ee "Codsiga dhegaysiga dacwada iyo Dacwada Cabashada. Lagaama rabo inaad isticmaasho foomka, laakiin waa inaad hubsataa inaad ku soo dartay macluumaadki loo baahnaa oo dhan Waxaad foomka ka heli doontaa dhamaadka buugan waxaana lagu qoray boga internetka ee ODE www.ode.state.oh.us: dacwad.

Ereyaga "habka cabashada dacwada" waxaa lagu xidhiidhiyaa codsiga dhegaysiga dacwada Waa inay jirtaa fursad dhegaysi dacwad

dhexdhexaad ah marka kasta oo la xereeyay cabasho dhegaysi dacwadeed.

Macluumaad sidee ah ayay tahay inuu ku jiro codsiga dhegaysiga dacwada iyo cabashada dacwada?

Cabashadaada dacwada iyo codsiga dhegaysiga:

- o Magaca Ilmaha;
- o Ciwaanka ilmaha;
- o Magaca dugsiga ilmuhu dhigto;
- o Ilmaha bilaa hoyga ah (sida ku qeexan qaybta
- o Sharaxaad dabiicada mushkilada iyo sida ay ula xidhiidho ku haboonaanta ilmahaage ee adeegyo waxbarasho gaar ah iyo helista adeeg waxbarasho gaarka ah;
- o Xaqiiqooyinka la xidhiidha mushkilada; iyo
- o Xalka la soo jeediyay ee mushkilada ee ku salaysan wixii aad ogayd markii aad xeraysay codsiga

FIIRO: Waxaa laga yaabaa inaad helin dhegaysi dacwad ilaa adiga iyo garyaqaanka ku metelayaa aad xeraysaan cabasho dacwad oo koobsanaysa dhamaan macluumaadka kor ku xusan, iyaddoo la eegayo xeerka federaalka 34 C.F.R qaybta 300.508

Miyuu jiraa wax xadidaya arimaha aan soo qaadi karo marka lagu jiro dacwada?

Waxaa laga yaabaa inaad dhegaysiga dacwada ku soo hadal qaadin arimo aan ku jirin cabashada dacwada, ilaa dhinacyadu isku raacaan.

Ma laga yaabaa inaan cabasho gaar ah ka xereeyo arin aanan ku soo qaadin cabashada dacwada aan xereeyay?

Haa. Waxaa laga yaabaa inaad xerayso cabasho dacwad gaar ah oo ku saabsan arin aanan ku soo qaadin cabashaddii aad xeraysay.

Muxuu yahay waqtiga kama dambaysta ee codsashada dhegaysiga dacwad dhexdhexaad ah?

Guud ahaan waa inaad codsataa dhegaysiga dacwad dhexdhexaad ah muddo laba sano gudahood taariihdii aad ogaatay ama ay ahayd inaad ogaato mawduuca cabashada dacwadaadu ku xidhan tahay.

KA REEBAN: Waqtiga kama dambaysta ah ee labada sanno ahi kuma khuseeyo haddii lagu diiday codsashada dacwada sababtoo ah:

- o Dugsiga degmadu kugu majaro habaabiyey inaad u malayso in mushkiladii aad xaliseen; ama
- o Dugsigu aanu ku siin macluumaad IDEA u baahnaa in lagu siiyo

Maxaa dhacaya haddii dugsigu uu rumaysan yahay in cabashada dacwadaydu aan dhamaystirnayn?

Cabashadaada dacwadu waxay kuu ogolaanaysaa inaad hesho dhegaysi dacwadeed arimahan soo socda oo dhaca mooyaane:

- o Muddo 15 maalmood ah gudahood marka aad hesho cabashada dacwadaada, dugsiga degmadu wuxuu qoraal ku ogeysiinayaa sarkaalka dacwada qaadaya, ODE iyo dugsiga in dugsigu rumaysan yahay in dacwadu aanay buuxin shuruudihii dacwada (Shuruudaha codsiga, eeg su'aasha *"Macluumaad side ah ayay tahay inuu ku jiro ogeysiiska codsiga cabashadada dacwadayda iyo codsiga dhegaysiga"*)
- o Shan maalmood gudahood kadib marka aad ogeysiiskan ka hesho dugsiga, waa in sarkaalka wuu inuu go'aan ku gaadhaa in cabashada dacwadu buuxinayso shuruudaha cabasho noocan ah.
- o Kadib marka uu gaadho go'aankan, waa in sarkaalka dacwada dhegaysanayaa uu si degdeg ah qoraal kuugu ogeysiiyaa go'aanka adiga, dugsiga, iyo Xafiiska caruurta Gaarka ah

Maxaa dhici doona haddii sarkaalka dacwada qaadayaa in cabashada dacwadaydu aanay buuxin shuruudihii?

Go'aanka qoraalka ah ee sarkaalka dacwada qaadaya waxaa ka mid noqon doona macluumaad:

- o Sababta cabashadaad loo go'aamiyey inay qabyo tahay.
- o Qoraal cad in kiiskaaga aan la laalin.
- o Qoraal sheegaya inaan kiiska la dhegaysan karin ilaa ogeysiis dacwadeed la xereeyo kaas oo koobsanaya macluumaadka loo baahan yahay. Macluumaadkan loo baahan yahay, fiiri su'aasha *"Macluumaad sidee ah ayay tahay inuu ku jiro cabashada dacwadayda iyo codsiga dhegaysiga?"*
- o Liis kheyraad ah oo kaa caawinaya inaad dhamaystirto cabashada dacwada iyo inaad

saxdo wax walba oo dhiman. Mid ka mid ah kheyraadkan waa shaqaalaha qaybta Dhowrista Nidaamka ee Xafiiska Caruurta Gaarka ah ee ODE. Waxaa laga yaabaa inaad la xidhiidho:

Sandy Kaufman, Consultant
Office for Exceptional Children
Procedural Safeguards
25 South Front St.
Columbus, OH 43215
E-mail: sandy.kaufman@ode.state.oh.us
Telefonka: (614) 466-2650 or
Toll Free: (877) 644-6338.

Haddii cabashadaydu ay dhamaystiran tahay laakiin aan doonayo inaan bedelo cabashadayda, maxaan samayn karaa?

Haddii aad doonayso inaad bedel ku samayso ama aad arin cusub aad ku darto, waxaa laga yaabaa inaad waydiisato ogolaansho" aad ku bedelayso" cabashadaada, ama waxaa laga yaabaa inaad xerayso cabasho arin cusub

Waxaa laga yaabaa inaad bedesho cabashadaada dacwada kaliya haddii dugsiga ama sarkaalka dhegaysanay dacwadu uu kugu raaco wax ka bedel u dhaca siyaabahan soo socda:

- o Uu dugsiga degmadu qoraal ahaan kuugu raaco wax ka bedelka oo la siiyo fursad ah si loo xaliyo cabashada dacwada kulan qaraareed
- o Sarkaalka dacwada qaadayaa ogolaansho bixiyo. Sarkaalka dacwada qaadayaa waxaa laga yaabaa inuu bixiyo waxaan ka badnayn shan maalmood ka hor dhegaysiga dacwada Tusaale ahaan, haddii dacwadaada lagu mudeeyo 15-ka Ogoosto oo 1-da ogoosto sarkaalka dacwada qaadayaa uu helo codsigaaga in la bedelo ogeysiiska, sarkaalka dacwada qaadaya waxaa laga yaabaa inuu ku siiyo ogolaansho xili kasta oo u dhexeeya 1 ilaa 10 ogoosto

Haddii aad hesho ogolaansho oo aad bedesho codsigaaga dacwada, taariikhdii aad xeraysay codsigaaga sidoo kale wuxuu khuseeyaa wax ka bedelka

Tusaale ahaan, haddii aad xeraysay codsigaaga Julia 1-deeda 2008 oo aad codsigaaga bedeshay codsigaaga 1-da Ogoosto ee 2008, taariikhdaada fayl garayntu isma bedesho Taariikhdaadii hore ee fayl garaynta ee Julia 1 ayaa khusaysa dhamaan codsiga dacwada, oo uu ka mid yahay wax ka bedelka.

Haddii aan u baahdo inaan bedelo cabashada maxaa yeelay sarkaalka dacwada qaadaya oo xukumay in cabashadaydu qabyo tahay, waqti intee le'eeg ayaa la rabaa inuu ku soo xereeyo cabashada wax ka bedelka aan ku sameeyay?

Waa inaad sarkaalka dacwada qaadaya ugu fayl garaysaa ogeysiiska cabashada dacwada muddo 14 maalmood ah gudahood maalinta sarkaalka dacwada qaadaya go'aamiyo in cabashadu tahay qabyo Haddii aanad fayl garayn ogeysiis wax ka bedel lagu sameeyay mudadan gudaheeda, sarkaalka dacwada qaadaya ayaa laali doona cabashada dacwadaada oo xidhi doona kiiska

FIIRO: Haddii aad fayl garayso cabasho dacwadeed, waqtiga kulanka qaraarka (15 maalmood ama haddii la “dardargeliyo” (la soo dejiyey, 7 maalmood) waxay dib ula bilaabmayaan fayl garaynta cabashada wax laga bedelay

Haddii aanan bedelin cabashadayda, maxaa kale ayaan samayn karaa haddii codsigayga la go'aamiyo inuu qabyo yahay?

Waxaa laga yaabaa inaad cabashadaada dib ugu gudbiso kormeeraha dugsiga oo aad u dirto koobi cabashada dib looga fayl gareeyay Xafiiska Caruurta Gaarka ah Cabashadaada waxaa loo tixgelin doonaa codsi cusub ahaan waana inay buuxisaa dhamaan shuruudaha codsiga cusub.

Siddee cabashada dib loo soo fayl gareeyay uga duwan tahay cabashada wax ka bedelka lagu sameeyays?

Cabasho dib loo fayl gareeyay waa codsi cusub. Cabasho wax laga bedelay maaha codsi cusub laakiin waa is bedel ku yimid codsiga

Cabasho dib loo fayl gareeyay waa codsi cusub. An amended complaint keeps the original filing date.

Waxaad u baahan doontaa inaad habsato inaad dib u fayl garayso cabashadaada muddo laba sanadood gudahood ama waa inuu codsiga kuwa ka reeban labada sano Si aad tan go'aan uga gaadho, fiiri su'aasha soo socoto, “Muxuu yahay waqtiga kama dambaysta ee codsashada dacwad dhexdhexaad ah?”

Ma waxa la bedeli karaa oo kaliya codsiga dhegaysiga iyo dacwada marka la go'aamiyo in codsigaygu yahay qabyo ?

Maya, codsi waa la bedeli karaa ama dib loo fayl garayn karaa sabab kale awgood kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- Waxaa laga yaabaa inaad jeclaato in aad bedesho codsiga si aad u kala cadayso ama ugu darto arimo cusub; ama
- Waxaa laga yaabaa inaad dib u fayl garayso codsi haddii aad laasho codsigaaga oo kadibna aad go'aansato inaad dib u gudbiso codsigaaga.

Maxaan samayn karaa haddii degmadu fayl garaysay cabasho xaq muwaadin iyo dhegaysi dacwadeed, aniguna aan rumaysan nahay in cabasahda xuquuqda muwaadin ee degmadu aan dhamaystirnayn?

Haddii aad rumaysan tahay in cabashada dacwada dugsiga degmadu ay qabyo tahay, waxaa laga yaabaa inaad qaado talaabooyinkan soo socda:

- 15 maalmood gudahood marka aad hesho cabashada dacwada , waxaad qoraal ku ogaysiinaysaa sarkaalka dacwada qaadaya iy degmada inaad rumaysan tahay in cabashada degmadu aanay buuxin shuruudaha u yaal cabashada ogeysiiska U dir koobi ogeysiiskaaga ah qaybta Dhowrista Nidaamka, Xafiiska Caruurta Gaarka ah, Waaxda Waxbarashada Ohio. *See page 29 for contact information.*
- Kala xidhiidh Dhowrista Nidaamka, Xafiiska Caruurta Gaarka ah, ODE, magaca sarkaalka dacwada qaadaya haddii aanad macluumaadkan hore u helin. *See page 29 for contact information.*
- Shan maalmood gudahood marka aad hesho ogeysiiskaaga, sarkaalka dacwada dhegaysanaa waa inuu go'aamiyaa in cabashada degmadu buuxinayso shuruudaha ku xidhan cabashada dacwada
- Isla taariikhda sarkaalka dacwada qaadaya uu gaadho go'aanka, isaga ama iyadu waa inuu adiga, dugsiga degmada iyo Xafiiska Caruurta Gaarka ah qoraal ku ogeysiiyaa go'aankiisa ama go'aankeeda

Haddii sarkaalka dacwada qaadaya uu go'aamiyo in cabashada dugsiga ay qabyo tahay ama haddii dugsiga uu doonayo inuu iskii u bedelo cabashada, ma laga yaabaa in degmadu bedesho cabashada?

Dugsigu waxaa laga yaabaa inuu bedelo cabashadiisa kaliya haddii:

- o Aad qoraal ku ogolaatid wax ka bedelka oo la siiyo fursada uu ku xalinayo cabashada dacwada wax ka bedelka lagu sameeyay iyaddoo u isticmaalayo kulan qaraareed; or
- o Sarkaalka dacwada qaadayaa ogolaansho bixiyo. Sarkaalka dacwada qaadayaa waxaa laga yaabaa inuu ogolaansho noocaas ah bixiyo waxaan ka badnayn 5 maalmood ka hor inta aan dacwadu qabsoomin.

Miyuu dugsigu ka jawaabi doonaa codsigayga dhegaysiga dacwada?

Haddii dugsiga degmadu aanu hore kuugu soo dirin ogeysiis hore oo ku sahabsan mawduuca cabashada dacwada, waa in dugsigu jawaab kuugu soo diraa muddo 10 maalmood ah gudahood marka aad hesho cabashadaada. Jawaabta waa inay ku jirtaa:

- o Sharaxaad ka bixisaa sababta ay u soo jeedisay in ay talaabadaasi aay ka dacwooneysid ay uqaado, ama udiidan tahay in ay uqaadoaysan u qaadin;
- o Sharaxaad ikhtihaarada kale ee kooxda IEP tixgelyeen iyo sababaha loo diiday sababahan;
- o Faahfaahin nidaamka qiimaynta, qiimaynta, diiwaanka ama warbixinta hay'addu isticmaashay ee ay ku salaysay talaabooyinka ay soo jeedisay ama diiday
- o Faahfaahin qodobada kale ee la xidhiidha talaabada dugsigu uu soo jeediyay ama diiday.

FIIRO: Haddii dugsigu uu kuu soo diro ogeysiis, degmadu waxaa laga yaabaa inay wali sheegto in cabashada dacwadaadu tahay qabyo.

Muxuu samayn doonaa dugsiga degmadu kadib marka uu helo cabashada dacwada?

Kadib marka aad codsato dacwada dhexdhexaad ah:

- o Haddii tani tahay cabashada u horaysa ee aad soo xeraysay sanad dugsiyeedkan, dugsigu wuxuu ku siin doonaa koobi ah buugan Yaa leh IDEA?
- o Waxaa lagu sheegi doonaa in dhexdhexaadin diyaar u ahayaa waxaana macluumaad lagaa siinayaa dhexdhexaadinta
- o Haddii aad codsatay dacwada, dugsiga wuxuu qaban doonaa kulan qaraareed (kulankaas

noocaas ah waxaa si fiican loogu faahfaahiyey hoos).

- o Xafiiska Caruurta Gaarka ah ayaa ku soo diri doona magaca sarkaalka qaadaya dacwada cabashada
- o Haddii adiga (ama dugsiga degmadu) aad codsato dacwada, dugsiga degmada ayaa ku ogeysiin doona adeeg kasta oo sharci ama jaban oo aad u baahan tahay lagana heli kara aagan
- o Shaqaalaha dugsiga, isagoo la tashanayo sarkaalka dacwada dhegaysanay, wuxuu agaasimi doonaa goobta, taariikhda iyo waqtiga dhegaysiga dacwada
- o Ugu yaraan shan maalmood-shaqo ka hor dhegaysiga dacwada, dhinac kastaa waa inuu muujiyaa dhamaan dhinacyada kale oo dhan dhamaan qiimaynaha la dhameeyay taariikhdaas iyo dhamaan talooyinka, ku salaysan qiimaynahan, in dhinacu uu ku talo jiro inuu dacwad u isticmaalo. Waxaa laga yaabaa inaad sarkaalka qaadaya dacwada waydiiso inuu soo waraaq si loogu baahdo in markhaati ka soo qayb galo dacwada ama uu keeno dokumentiyo gaar ah
- o Haddii dhinacna aanu buuxin shuruudaha kor ku xusan, sarkaalka dhegaysanay dacwada waxaa laga ayaabaa inuu madnuuco dhinacaas inuu dhaqangeliyo qiimaynta la xidhiidha ama talooyinka dacwada, haddii aanu haysan ogolaanshaha dhinaca kale
- o Dacwada dhexdhexaad ayaa la qaban doonaa isla markaana go'aanka waxaa loo diri doonaa mid kasta oo dhinacyada ah Dugsiga degmadu waa inuu xaqiijiyaa in arintaasi ku dhacdo muddo 45 maalmood ah kadib dhamaadka mudada qaraarka, haddii adiga iyo dugsiga aad codsataan in la mudada laga kordhiyo 45 maalmood oo aanu sarkaalka dacwada qaadaya aanu ogolaan mudadaas
- o Go'aanka lagu gaadhay dhegaysi dacwad dhexdhexaad ahi waa kama dambays ilaa adiga iyo dugsiga oo fayl gareeya cabasho muddo 45 maalmood ah marka lagu ogaysiiyo mooyaane

Haddii dugsigu yahay dhinaca fayl garaynaya cabashada dacwada, maxay tahay inaan sameeyo marka aan helo koobi cabashada ah?

Muddo 10 maalmood gudahood ah marka dugsigu helo cabashada dacwada, waa inaad dugsiga u dirtaa jawaab ka hadlaysa arimaha saxda ah ee lagu soo qaaday cabashada dacwada.

Waa maxay shir qaraareed?

Haddii aad codsato dhegaysiga dacwada, kulan qaraareed ayaa la qaban doonaa ka hor inta dhegaysiga dacwada. Shirku wuxuu ku siinayaa fursad aad ku falanqayso cabashadaada oo aad kula xaliso degmada.

Dugsiga degmada ayaa shir u qaban doona adiga iyo xubin ama xubnaha kooxda IEP ee aqoonta gaarka ah u leh xaqiiqooyinka ku sugan cabashadaada Adiga iyo degmada ayaa go'aan ka gaadhaya xubnaha IEP ee imanaya shirka qaraarka.

Shirku waa :

- o In lagu qabtaa muddo 15 maalmood ah gudahood marka degmadu hesho ogeysiiska cabashada dacwada Haddii codsiga la soo dedejiyana waxay noqon doontaa muddo 7 maalmood ah gudahood ama ka badan.
- o Inuu ka mid yahay wakiil dugsiga degmada ama hay'ad kale oo dawli ah oo leh awooda uu ku samaynayo go'aanada uu ku metelayo hay'adda.
- o Aanu ku jirin garyaqaan dugsiga haddii aanu adigana kula socon garyaqaan.

Waa maxay ujeedada kulan qaraareedku?

Ujeedada kulan qaraareedku waa inaad gorfayso cabashada dacwadaada, iyo xaqiiqooyinka cabashadaadu ku salaysan tahay, si dugsigu u helo fursada uu ku xalinayo muranka cabashadu ku salaysan tahay.

Kulanka waa in la qabtaa adiga iyo dugsiga oo qoraal iskugu raaca inaydaan qaban mooyaane ama isku raaca inaad isticmaashaan habka dhexdhexaadinta ee lagu faahfaahiyey qaybta “Dhexdhexaadinta” ee buugan halkii aad shir qabsan lahaydeen.

Wada hadalada ka dhaca shir qaraareedka waa inay ahaydaan khaas loomana adeegsan karo cadayn ahaan dhegaysiga dacwada ama rafcaanka go'aanka

Waa maxay daadihintu shir qaraareedku?

Marka Xafiiska Caruurta Gaarka ahi keeno dhexdhexaadiye xirfad leh, ama siide wade, kaas

oo u tabobaran waxbarashada gaarka ah inuu goobjoog ka noqdo shir qaraareedka, ayaa la yidhaa “daadihintu shir qaraareedka.”

Daadihiyuhu wuxuu kaa caawinayaa adiga iyo xubnaha lagama maarmaanka ah ee kooxda IEP inay xaliyaan muranka cabashadu ku salaysan tahay. Daadihiyuhu:

- o Wuxuu ka caawiyaa dhinacyada in wada hadalku furnaado;
- o Wuxuu qaybiyaa dooda; waxaanu
- o Ka caawiyaa dhinacyada inay xaliyaan khilaafka.

Daadihiyuhu wax go'aan ah ma gaadhaya laakiin wuxuu ka codsanayaa xubnaha kooxda inay xal helaan.

Sideen u codsadaa daadihiye shir qaraareed?

Si aad u codsato daadihiye shir qaraareed, la xidhiidh:

Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Procedural Safeguards Section
See pages 29 and 30 for contact information.

Haddii dugsiga degmadu codsado dhegaysi dacwad, miyaa degmada laga rabaa inay qabto shir qaraareed?

Maya marka dugsiga degmadu codsado dhegaysi dacwad ma jirto shuruud ku xidhan shir qaraareed iyo muddo qaraareed dhan 30 maalmood.

Haddii degmadu codsato dhegaysi dacwad, waqtiga 45-ka maalmood ah ee soo saarista go'aanka dacwadu wuxuu bilaabmayaa marka aad hesho ogeysiiska cabashada degmada

Muddo 45 maalmood ah gudahood marka aad hesho cabashada dacwada degmada:

- o Dhegaysiga dacwada waa in la qabtaa;
- o Waa in lagu gaadhaa go'aan dacwadeed; iyo
- o Waa in koobi ka mid ah go'aanka la diraa haddii sarkaalka dacwada qaadayaa fidiyo waqti isagoo/iyaddoo eegaya codsi qoraal oo adiga ama dugsiga degmada ka yimid mooyaane

Haddii cabashadayda lagu xaliyo shir qaraareedka, maxay tahay talaabada xigtaa?

Haddii qaraar lagu gaadho shir qaraareedka, adiga iyo dugsigu degmadu waa inaad meel marisaan heshiis sharci oo labadiinaba idin qabta kaas oo :

- o Uu saxeexay adiga iyo wakiil ka mid ah degmada leh awooda saxeexa; iyo
- o La awoodo inay fuliso maxkamad kasta oo ku haboon oo maraykanka ku taal

MUDADA GORFAYNTA: Haddii adiga iyo dugsiga degmadu aad fulisaan heshiis qoraal ah, adiga ama dugsiga degmadu waxaa laga yaabaa inaad heshiiska ku kansal garayso 3 maalmo-shaqo gudahood markii la saxeexay heshiiska

Maxaa dhacaya haddii cabashadayda aan lagu dhamayn shir qaraareed?

Haddii dugsiga degmadu si aad ku qanacsan tahay aanu u xalin muddo 30 maalmood ah gudahood marka ay ogaadeen cabashada dacwada, marka mudada qaraarka dhamaato ee laga yaabo inuu bilaabmo dhegaysiga dacwadu, haddii aan sixid lagu samayn qaraarka 30-ka maalmood ah

Sixida qaraarka 30-ka maalmood wuu dhacayaa haddii:

- o Adiga iyo dugsigu aad qoraal ahaan iskugu raacdaan inaa dhaaftaan (ag martaan) shir qaraareedka; ama
- o Adiga iyo degmadu qoraal ahaan iskugu raacdaan in aanu qaraar suurtoagal ahayn marka aad bilowdo ku falanqaynta arrimaha shir qaraareedka ama shirka dhexdhexaadinta; ama
- o Adiga iyo degmadu aad qoraal ahaan iskugu raacdaan inaad dhaaftaan mudada 30-ka maalmood ah si aad u sii wadan kartaan dhexdhexaadinta, kadibna adiga ama dugsiga degmada midkiin uu ka baxo dhexdhexaadinta

Marka mid ka mid ah arimahani dhacaan, mudada qaraarkuna dhamaato ee waqtiga 45-ka maalmood ahi uu bilaabmo. Muddo 45 maalmood ah gudahood kadib dhamaadka mudada qaraarka ee 30-ka maalmood ah:

- o Dhegaysiga dacwada waa in la qabtaa;
- o Waa in lagu gaadhaa go'aan dacwadeed; iyo
- o Koobi ka mid ah go'aanka waa in la sarkaalka dacwada qaadaya oo fidiya waqtiga isagoo/iyadoo tixgelinaysa adiga ama dugsiga mooyaane

Maxaa dhacaya haddii aanan ka qayb qaadan shir qaraareedka?

Haddii aanad ka qayb qaadan shir qaraareedka, waqtiyada caadiga ah ee hawsha qaraarku (30 maalmood) iyo dhegaysiga dacwada (45 maalmood) waa la kordhin doonaa ilaa shir qaraareedka la qabto, ilaa adiga iyo dugsiga degmadu aad si wada jir ah qoraal ahaan iskugu raacdaan:

- o Inaad iska daysaan hanaanka qaraarka
- o Aad adeegsataan dhexdhexaadin gobolku isku duwayo halkii aad ka isticmaali lahaydeen shir qaraareed.

Maxaa dhacaya dhamaadka muddo qaraareedka haddii aanan ka qayb qaadan shir qaraareedka?

Haddii dugsiga degmadu aanu kugu qancin karin adiga inaad ka qayb qaadata shir qaraareedka kadib marka aad samayso dedaal macquul ah (oo aad qoraalna ku hayso dedaalkan), dugsiga degmadu waxaa laga yaabaa, in dhamaadka mudada 30-ka maalmood ah, inuu ka codsado sarkaalka dacwada qaadaya inuu joojiyo dacwadaada. Tani waxay noqon doontaa dhamaadka 15-ka maalmood haddii la soo gaabiyo, ama codsi ka degdeg ah.

Maxaa dhacaya haddii dugsigu degmadu aan qaban shir qaraareedka ama aan ku qayb qaadan shirka?

Haddii dugsiga degmadu (a) aan shir qaraareedka ku qaban muddo 15 maalmood ah gudahooda (7 maalmood haddii codsiga la dedejiyo) marka laga helo ogeysiiska cabashada dacwadaada ama (b) aanu ka qayb qaadan shir qaraareedka, waxaa laga yaabaa inaad sarkaalka dacwada qaadaya waydiisato inaad ku lug yeelato oo aad bilowdo dhegaysiga dacwada waqtiga 45-ka maalmood ah.

Haddii dacwadu ay socoto, waa maxay xuquuqdaydu?

- Haddii aad ku lug leedahay dhegaysi dacwad dhexdhexaada h, waxaad xaq u leedahay:
- o Inuu joogo ilmaha dacwadu khusayo;
 - o Inaad dhegaysiga dacwada u furto dadwaynaha;

- o In uu ku soo raaco oo kula taliyo garyaqaan iyo shaqsiyaad aqoon gaar ah ama tabobar u leh dhibaatooyinka la xidhiidha caruurta curyaamiinta ah;
- o Soo qadimid cadayn, waajihid iyo tijaabin dhinacyada kale, iyo dalbashada inay makhraatiyo ka soo qayb galaan;
- o Madnuucid cadayn kasta oo la keeno taas oo aan lagu tusin adiga ugu yaraan 5 maalmo-shaqo ka hor dhegaysiga;
- o Helid diiwaan u qoran kelmad-kelmad oo haddii aad doorbidayso elektoroonik ah;
- o Get written, or if you prefer, electronic records of findings and decisions; and
- o Inaad aad hesho qoraal dacwada ah iyo natiijooyinka iyo go'aanada oo bilaash ah.

Siddee buu sarkaalka qaadaya dacwadu aniga iyo dugsiga ula soo xidhiidhaya?

Sarkaalka dhegaysanaya dacwada wuxuu ku siin doonaa adiga iyo dugsigaba ogeysiis isku mid ah isla waqtiga isku mid ah inta lagu gudo jiro dhamaan qaybaha dhegaysiga dacwada.

Siddee buu sarkaalka dacwada dhegaysanayaa u gaadhayaa go'aankiisa?

Guud ahaan go'aanka sarkaalka dacwada qaadaya ee ah bal in ilmahaagu helay waxbarasho dawli ah oo bilaash ah waa inuu ku salaysnaadaa su'aasha in ilmahaagu helay waxbarasho haboon ee waa in aanu ku salaysnaan in dugsigu ku guul daraystay raacista xeerarka Haddii dugsiga degmadu, tusaale ahaan, aanu shirarka u qabsan sidii ay ahayd inuu u qabsado, aanu casuumin dadkii saxda ahaa ama aanu ku siin ogeysiis kugu filan laakiin si kasta oo ay ahaydba aad shirka ka soo qaybgashay, ilmahaagu waxbarasho haboon Sarkaalka dacwada qaadayaa wuxuu degmada ku xukumi karaa in aanay bixin waxbarasho dawli ah oo haboon, laakiin kuma xukumi karo degmada kaliya inay ku guul daraysatay inay raacdo xeerarka Haddii degmadu aanay raacin xeerka, sarkaalka dacwada qaadayaa wuxuu ku amri karaa inay bilowdo raacista xeerarka iyo nidaamka.

o Ay faragelin ku samaysay xaq ilmahaagu u leeyahay inuu helo waxbarasho dawli ah oo haboon;

- o Si daran u farogaliyey fursadaada inaad ka qayb qaadata nidaamka go'aan gaadhista ee khuseeya xeerka waxbarashada dawliga ah ee bilaashka ah; ama
- o Sababtay in ilmahaagu ka go'doomo faa'iidada waxbarashada

Sarkaalka dacwo qaade ah ayaa laga yaabaa inuu wali ku amro dugsiga inuu buuxiyo shuruudaha

FIIRO: Ma jiro xeerarkan mida kaa qaadaya xaq aad u leedahay inaad rafcaan u qaadata Waaxda Waxbarashada Ohio.

Waa sidee xaalka ilmahaagu inta dhegaysiga dacwadu socoto?

- o Ilmahaaga oo ku jira goob waxbarasho ku meelgaadh ah (IAES – waa goob waxbarasho ku meelgaadh ah oo ka baxsan dugsiga haddii ilmuhu edeb qabo) while you are waiting for the decision of a due process hearing, review or judicial proceeding, Ilmahaagu wuxuu ku sii jirayaa meesha uu hadda wax ka barto haddii aanay gobolka ama wakaalada degamdu si kale garan. This is called "stay-put."
- o Haddii cabashada ay ka mid tahay codsigii asalka ahaa ee galista dugsiga dawlada ah, ilmuhu, iyadoo la haysto ogolaanshaha waalidiinta, waa in lagu meeleeeyaa dugsiga dawlada ilaa ay dhamaadaan dhegaysyadu
- o Haddii cabashada ay ka mid tahay codsi la doonayo in adeeg loogu bilaabo qaybta da' dugsiiyeedka ilmo gaadhay 3 sano jir awgeed oo aanu imika ku haboonayna qaybta adeegyada Wax Ka qabashada hore.
- o Haddii la ogaado in ilmuhu ku haboon yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha qaybta B oo waalidku ogolaado xeerka bilowga ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, kadib hay'adda dawliga ahi waa inay bixisaa waxbarashadan gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ee aanay isku khilaafsanayn waalidiinta iyo hay'adda dawladu.
- o Haddii sarkaalka dib u eegista samaynayaa ku waafaqo waalidiinta ilmaha inay isbedel meelaynta ah sameeyaan (goobta waxbarashada) ay haboon tahay, meelayntaasi waa in loo tixgeliyaa heshiis u dhexeeya gobolka iyo waalidiinta oo ujeedadiisu tahay

isteey-but (eeg qodobka kowaad ee kor ku xusan)

OGOW: Qeybta B ee of IDEA wuxuu quseyaa caruurta da'doodu tahay applies to children from 3 ilaa through 21 sano jiryears of age. Qeybta Part C ee of IDEA waxay quseysaa caruurta da'doodu tahay marka ay dhasheen ilaa applies to children from birth through 2 sano jiryears of age. Qaybta C ee IDEA waxay khusaysaa caruurta min dhalashada ilaa 2 sano jirka.

Maxaan samayn karaa haddaan khilaaf go'aanka sarkaalka dacwada qaadaya?

Haddii adiga iyo dugsiga degmadu aad isku diidaan go'aanka uu gaadhay sarkaalka dacwada dhegaysanayaa, labadiina midkiin waxaa laga yaaba inuu rafcaan u qaato Waaxda Waxbarashada Ohio muddo 45 maalmood gudahooda marka go'aanka aad ogaato

o Rafcaankaaga asalka ah (maaha koobiga) boos ahaan ugu dir:

Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Qaybta Dhowrista Nidaamka
See page 29 for contact information.

o Nuqul racfaanka u dir isuduwaha degmo dugsiiyeedka.

Marka Waaxda Waxbarashada ee Ohio ay hesho rafcaankaaga, waxay magaacabi doonaa sarkaalka dib u eegiseed (SLRO) oo heer gobol ah si uu dib u eegis dhexdhexaad ah ugu sameeyo go'aanka sarkaalka dacwada qaaday Sarkaalka dib u eegista ee heer gobol:

o Wuxuu baadhayaa qoraalka dacwada gabi ahaantii;

o Wuxuu hubinayaa in nidaamka dhegaysiga dacwadu raacay shuruudaha dacwada;

o Wuxuu raadinayaa cadayn dheeraad ah , haddii ay lagama maarmaan noqoto. Haddii dhegaysi dacwad la qabto si loo helo cadayn dheeraad ah, xuquuqda dhegaysiga dacwadu waxay khusaysaa;

o Wuxuu kordhin karaa mudada haddii adiga ama dugsigu aad codsi samaysaan

o Wuxuu samaynayaa go'aan madax banaan kadib marka uu dhameeyo dib u eegista

Wixii macluumaad dheeri ah ku sahabsan xuquuqdaada dhegaysiga dacwada, waxaad

eegtaa su'aasha hore “ *Haddii dacwadaydo socoto, waa maxay xuquuqdaydu?* ”

Muddo 30 maalmood gudahood ah marka Waaxda Waxbarashada Ohio ay hesho codsiga rafcaanka, waaxdu waxay hubsan doontaa:

o In go'aan madax banaan laga gaadhay dib u eegis heer gobol; iyo

Mudada 30-ka maalmood ee dib u eegis dacwad heer gobol waa la fidin karaa haddii labada dhinac midkood codsado kordhin oo kordhinta uu qoraal ku ogolaado sarkaalka dib u eegista.

Maxaan samayn karaa haddii aanan sarkaalka dib u eegista heer gobol ku raacin go'aanka?

Haddii aanad ku qanacsanayn natiijada iyo go'aanka lagu gaadhay dib u eegista heer gobol, waxaad xaq u leedahay inaad ka dacwooto maxkamad gobol ama mid federaal.

Waxaa laga yaabaa inaad rafcaan ka qaadato go'aanka una qaadato:

o Maxkamad degmo oo maraykanka ah muddo 90 maalmood ah oo ka bilaabmayso maalinta go'aanka sarkaalka dib u eegista; ama

o Maxkadama dacwahada guud ee degmada dugsiga ilmuhu ku yaalo muddo 45 maalmood gudahooda ah markii aad heshay ogeysiiska amarka sarkaalka dib u eegista ee heer gobol.

Dacwad u gudbinta maxkamada degmada federaalka: Haddii aad rafcaan ka qaadato go'aanka oo aad u qaadato maxkamada degmada ee maraykanka, maxkamada ka hubi inaad buuxisay shuruudaha xeraynta dacwada

U dacwooshada maxkamada dacwadaha guud ee Ohio: Haddii aad rafcaan ka qaadanayso go'aanka una qaadanayso maxkamada dacwadaha guud, waa inaad:

o Rafcaankaaga asalka ah (maaha koobiga) boos ahaan ugu dir:

Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Qaybta Dhowrista Nidaamka
25 South Front Street
Mail Stop #202
Columbus, Ohio 43215-4183

o Koobi rafcaankaaga ka mid ah u dir maxkamada haboon iyo dhinaca aad rafcaanka ka qaadanayso.

Rafcaan kasta, maxkamadu:

- o Waxay helayaas diiwaanada cabashada dacwada iyo dhagaysiga dacwada dib u eegista heer gobol;
- o Codsiga dhinac ka yimid awgii waxay dhagaysanaysaa cadaaymaha dheeraadka ah; waxaanay
- o Bixinaysaa fududaynta ay maxkamadi go'aamiso inay haboon tahay, iyadoo ku salaynaysa go'aankeeda dhamaan cadaaymaha.

Miyaan bixinayaa ujrada qareenkayga?

Adiga ayaa ka masuul ah bixinta kharashkaaga qareenka iyo markhaatiyada xirfada leh. Hase ahaatee, haddii aad ku guulaysato kiiskaaga ficil ama dacwad la xidhiidha dhagaysiga nidaamka jira (oo markaas kaa dhigaysa "qolada hadhay"), waxaad maxkamad warsan kartaa inay ku amraan qolada kale inay kuu soo celiyaan (dib kuu siiyaan) ujrada macquulka ah ee garyaqaanka. Sarkaalka dhagaysiga iyo sarkaalka dib u hubinta ee heerka-gobol ma bixin karaan ujrada qareenka.

Waa inaad ogaato haddii qolo kale ay yihiin kuwa hadhay, adiga iyo qareenkaaga in laga yaabo inaad u celisaan ujrada qareenka ee macquulka ah qolada hadhay.

Haddii qolada hadhay ay yihiin Waaxda Waxbarashada Ohio ama degmo dugsiyeed, qolooyinka ku taxan qodobada 1-4 ee hoose ayaa laga yaabaa inay u celiyaan Waaxda Waxbarashada ama degmo dugsiyeedka wixii ujro sharci ah:

1. Qareenka waalidiinta buuxiyey cabashada ama keenay ficilka la xidhiidha ee kariban, aan caqli-gal ahayn ama sal lahayn; ama
2. Qareenka waalidiinta ku sii waday inuu dacwodo kadib dacwadaasi markay noqotay wax khariban aan caqli-gal ahayn ama sal lahayn; ama
3. Qareenka waalidiinta, haddii codsiga waalidiinta dhagaysi nidaam jirta ama sabata ficil taas oo dabasocota iyada oo la soo gudbiyey ujeedo aan haboonanayn, sida, waxyeelayn, keenis daahitaan ama kordhin aan loo baahnayn ee kharashka difaaca xeerka; ama
4. Waalidiinta, haddii codsiga waalidiinta dhagaysi nidaam jirta ama sabata ficil taas oo dabasocota iyada oo la soo gudbiyey ujeedo

aan haboonanayn, sida, waxyeelayn, keenis daahitaan ama kordhin aan loo baahnayn ee kharashka difaaca xeerka.

Fadhiga Kooxda IEP Team; Fadhiga Xalinta
Ujrada qareenka laguma bixin doona wax la xidhiidha fadhi kooxda IEP haddii aanu fadhigu ahayn 1) natiijada dhagaysiga hab jira, dib-u-hubin heer gobol ah; ama 2) laga soo wicin dhexdhexaadin gobol ama isku dubariday. Ujrada qareenka looma qaadi karo fadhiga xalinta ee nidaamka jira.

Guno Ma Leh ama Labanlaabis

Maxkamadu waxay qeexi doontaa qadarka loo garto inuu yahay ujrada qareenka ee caqli-galka ah, eek u salaysan qiimaha caadiga ah ee bulshada ama hawsha oo lagu keenay nooca iyo tayada adeegyada la bixiyey.

Guno ma leh ama "labanlaabis" waxa lagu isticmaali karaa ujrada qareenka ay maxkamadu siisay. Tusaale ahaan, haddii ujrada qareenkaaga ay ahayd \$40,000, lagama yaabo inaad hesho \$10,000 dheeraad ah (guno) ama hesho (\$80,000 (labanlaabka ujradaada) ama \$120,000 (saddexlaabka ujradaada).

Miyey jiraan wakhtiyo mar ay maxkamadu aanay I siinayn ujrada qareenka ee adeegyada la qabtay kadib qadimaada heshiis qoraal ah?

Haa, lagama yaabo in lagu siiyo ujrada qareenka oo lagama yaabo in lagu celiyo kharashyada la xidhiidha ee waxqabad ama dacwad hoos timaadd qaybta 615 ee IDEA (sida dhagaysiga nidaamka jira ama racfaan) ee adeegyada la qabtay kadib qadimaada heshiis qoraal ah, haddii:

- o Qadimaada la sameeyey isla wakhtiga lagu sheegay Xeerka 68 ee Xeerarka Federaalka ee Dacwada Madaniga ah ama, goorta dib u fiirinta dacawda, wakhti kasta oo ka badan 10 maalmood kahor intaanay dacwadu bilaabmin;
- o Kumaad aqbalin deeqda 10 maalmood gudahood; iyo
- o Maxkamada ama sarkaalka dhagaysiga maamulka ayaa helay in manfaca aad heshay aanu ka wanaagsanayn deeqda xalka aad ka helayso.

KA REEBAN: Waxa lagu siin karaa ujrada qareenka iyo kharashka la xidhiidha haddii aad tahay qolada soo hadhay oo aad si macquulana u macnaysay diismada deeqda xalka.

Miyey jiraan wakhtiyo ay maxkamadu yarayso qadarka ujrada qareenka ee adeegyada la qabtay kadib deeqda xalka ee qoraalka ah?

Haa, haddii:

- o Adiga ama qareenkaagu, muddada ficilka ama dacwada, aad sabab la'aan u daahisaan xalinta kama danbaysta ah ee khilaafka;
- o Qadarka ujrada qareenka oo ai aan cagligal ahayn uga badan qiimaha saacadaha caadiga ah ee bulshada ee xirfadaha noocaas oo kale ah, iyo wayo aragnimada;
- o Wakhtiga lagu qaatay iyo adeegyada sharciga ee la bixiyey oo loo arko inay xaddhaaf yihiin marka loo eego nooca ficilka ama dacwada; ama
- o Qareenka ku metalaya oo aan siin degmo dugsiyeedka macluumaadkii haboonaa ee ogeysiiska codsiga nidaamka jira sida waafaqsan xeerka federaalka 34 C.F.R. Qaybta 300.508.

KA REEBAN: Xaaldaha kore laguma dabiqli karo ficil kasta ama dacwad kasta haddii maxkamadu hesho in gobolka ama degmo dugsiyeedku ay si aan cagligal ahayn u daahiyeen xalka kama danbaysta ah ee ficilka ama dacwada, taas oo ku xadgubaysa Qaybta 615 ee IDEA.

Sidaan ku heli karaa macluumaad dheeraad ah oo la xidhiidha nidaamka jira?

Wixii macluumaad dheeraad ah ee la xidhiidha nidaamka jira la xidhiidh:

- o Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Qaybta Dhowrista Nidaamka
25 S. Front Street, Mail Stop #202 Columbus,
Ohio 43215-4183;
Talefonka (614) 466-2650,
ODE Toll Free (877) 644-6338.
- o Xigo Qaybta 615 ee Xeerka Hagaajinta Dadka Naafada Ka Ah Waxbarashada ee 2004 (IDEA), Sharciga Dadweynaha 108-446, 108th Baarlamanka Koongereska, ee la xoojiyey Diisambar 3, 2004 (H.R.1350) ee la hirgeliyey Juulaay 1, 2005, 20 U.S.C. 1415; xeerarka federaalka ee 34 Code of Federal Regulations (CFR) Qaybaha 300.507-300.518; Qaybaha 3323.04 and 3323.05 ee Ohio Revised Code and Rule 3301-51-05 ee Ohio Administrative

Code. Sharcigan wuxu qayb ka yahay Heerarka Hawsha ee Wakaaladaha Waxbarashada Ohi ee u Daeega Ilmaha Naafoda ah.

O La tasho qareenkaaga.

ANSHAXA

Erayga “anshax” iyo “ciqaab” waxa badiyaa loo adeegsada si talantaali ah si loo xigto dhaqanada lagu hagaajinayo dabeecadda. Sida lidiga ku ah aragtiyaha qaar, labada dhaqan isku mid ma aha. Fahamka farqigooduna wuxu muhiim u yahay faslka iyo waalidnimada quman. Fahamkani wuxu ka gargaari doonaa waalidiinta iyo barayaasha kobcinta dhaqanka dhamaan ardayda oo waxtar, mas'uuliyad iyo amaan ku dheehan yahay.

Ciqaab waa “xal degdega” oo sahlan.” Ciqaabtu badiyaa ma xaliso dhibaato marka keligeed la isticmaalo, markaas keliya ayey joojisaa dhaqanka. Ciqaabtu waxay u bahaan tahay isbedel yar oo aaminka ama fekirka ilmaha oo badiyaa qiimo uma laha waxbarashada ilmaha. Ciqaabtu ma bedelayso dhaqanka muddad dheer waayo baahida aasaasiga ah ee ilmaha ee dhaqanka keenaysa ma waajahayso. Ciqaabtu waxay culayska saartaa ficilka ilmaha, aan ahayn waxa dhaliyey. Waxay badiyaa ku danbaysaa dareenka cadho ee ilmaha, ixtiraam la'aan, aargoosi iyo laga rayn.

Anshax, hase ahaatee, waa qaab ku bedelaya dhaqanka qorshe, baritaan iyo qiimayn. Anshaxa hirgalaa wuxu siiyaa caqiibo macquula oo ku haboon dhaqanka ilmaha iyo natiijooyinka si si quman oo muddo dheer ku salaysan. Anshaxa dhabta ah culayska masaaro dhaqan gooni ah, laakiin waa hab barasho oo ilmaha siiya xirfado kale duwan oo uu u baahan yahay inuu barto. Anshaxa wuxu haleelaa sababta dhaqanka oo wuxu ka gargaaraa abuuritaanka jawi quman oo nabdoon dhamaan.

Anshaxu waa wax adag, sinaan leh oo ku haboon dhaqanka. Waxay u baahan tahay u-heelanaan, qorshayn iyo xalinta dhibaataada oo joogto ah.*

*Hadalo laga soo xigtay: *Istraatiijiyada Kobcinta Nidaamka Maaraynta Falsalka ee Isku-dhahan.*

Muxuu yahay cayrinta dugsiga?

Cayrintu waa “anshixin” looga saarayo meelaynta jirta markaas (qaab waxbarasho) sababo edeb-daro awgeed. Cayrintu waxay noqon kartaa ilaa 10 maalin dugsiiyeed israacsan sannad dugsiiyeed. Ka saaritaanka intaas ka badan waxa la “eryin.” A removal for a longer period may be called an “expulsion. Ka-saaritaanka waxa la odhan karaa waa “eryitaan.”

Fiiri in degmo dugsiiyeedku ka saari karo ilmahaaga muddo dheeraad ah oo 10 maalin dugsiiyeed ah oo israacsan isla sannad dugsiiyeedkaas arrimo kale oo edeb-darro awgeed, maadaama aanay kuwaasi ka saaray ilmaha dugsiga qaabkiisa waxbarasho. “Bedelaada meelaynta” waxa si dheeraad ah looga hadli doonaa baragaraafyada hoose oo waxa lagu macneeyey qaybta “Macnaha” ee qoraalkan.

Muddada cayrinta, degmo dugsiiyeedku uma sameeyaan waxbarasho haboon oo dadweyne ilmahaaga ama ma sii wadaan barnaamijka waxarashada qorshaysan ee ilmahaaga.

Waxa jira noocyo cayritaanku oo kala duwan oo ay ka mid yihiin:

- Cayrin rasmi ah;
- Ka saaritaanka xaalad degdeg ah;
- Ka saaritaanka ilmahaaga dugsiga kahor dabayaaqada saacadaha caadiga ah ee maalinta dugsiga;
- Cayrinta baska, haddii gaadiidku yahay adeeg la xidhiidha barnaamijka waxbarashada qof-ahaaneed oo aanu jirin gaadiid la bixiyaa. (FIIRI: Haddii ilmahaagu aado dugsiga wakhtiga cayrinta baska, maalmahaas looma xisaabinayo maalmo laga cayriyey dugsiga);
- Cayritaanka dugsiga gudihiisa marka aan la bixin adeegyo waxbarasho gaar ahaaneed. Haddii barnaamijka waxbarashada qof-ahaaneed ee ilmahaaga aan la sii wadin, cayritaanka dugsiga gudihiisa looma xisaabinayo 10ka maalin ee eryitaanka; ama
- Eryitaanka dugsiga gudihiisa ee ilmahaaga loo wareejiyey meel kale oo dugsiga ah (sida xafiis) meel uu ilmahaagu ku sii wadi karo barnamij waxbarasho qof ahaaneed muddo dheer ama wakhtiyo soo noqnoqday.

Maxaa dhaca haddii ilmaha naafada ah laga cayriyo dugsiga 10 maalin dugsii ama kayar sannad dugsiiyeed isla mid ah?

Siyaasada guddiga waxbarashada ee loo dhigay ilmo kasta oo laga eryo dugsii ayaa lagu dabihi karaa ilmahaaga.

Degmada loogama baahna inay:

- Samayso qorshe qiimayn dhaqan (si in badan looga ogaado dhaqanka ilmaha) ama loo kobciyo dhexgal (qaab taageero lagu hagaajinayo dhaqanka);
- La sameeyo bayaan go’aan (garasho in ilmaha dhaqankiisa ay keenayso naafonimadiisu); ama
- Adeegyo Kale.

Hase ahaatee, kooxda IEP muddada 10-maalin waa ku garan karaan:

- Haddii la raacay barnaamijka waxbarashada qof ahaaneed ee ilmaha;
- Haddii la raacay barnaamijka waxbarashada qof ahaaneed ee ilmaha;
- Haddii qorshe qiimayneed loo baahan yahay suurtagalnimada ilmahaaga naafonimadiisa, iyo
- Baahida taageero, istrattijiyiyo, gargaar si lagaaga caawiyo kobcinta dhaqan quman.

Goorma ayey kasaaritaanka ilmahaaga dugsigu ee anshax noqon kartaa bedel meelayn (meesha waxbarashada)?

Ka saaritaanka dugsii oo asbaabo anshax ah ayaa loo tixgelin kara isbedel meelayneed marka:

- Kasaaritaanku uu ka bato 10 maalin dugsii oo isku xiga isla sannad dugsiiyeed, ama
- Ilmahaaga oo helay ka-saaritaano xidhiidhsan taas oo muujinaysa taxane:
 - Waayo taxanaha ka-saaritaanku waxay isku noqon karaan in ka badan 10 maalin dugsii sannad dugsiiyeedkii;
 - Waayo ilmahaaga dhaqankiisu wuxu la mid yahay dhaqankiisii hore ee marar hore oo keenay taxane ka-saaritaano ah; iyo
 - Waayo waxyaabaha ay ka mid yihiin muddada ka-saaritaanka kasta, isugaynta wakhtiga ilmahaaga laga saaray, iyo isudhawaanshaha ka-saaritaanka.

FIIRO: Ka-saaritaanka ka badan 10 maalmood oo israacsan isla sannad dugsiiyeed qudha ama taxane ka-saaritaano u eg qaab oo isugeyntoodu ka badan tahay 10 maalin dugsii isla sannad dugsiiyeed qudha waxa l odhan karaa waa eryitaan.

Ayaa qeexa haddii qaab taxane kasaaritaan anshax keenayo bedel meelayneed (qaab waxbarasho)?

Shogaamiyayaasha dugsiga ayaa garta iyada oo ah kiisba kiis haddii qaab kasaaritaan anshax yahay bedel meelayneed.

Maxaa dhacaya haddii meelaynta ilmahaygu isbedesho?

Kahor bedelaada ilmahaaga meelaynbtiiisa gef sharciyada dugsiga ah, degmo dugsiiyeedka waa inay ilmahaaga siiyaan nidaamyada qaar. Kahortagyadaas waxa ka mid ah in degmo dugsiiyeedku sameeyo g'aan caddayn ah, marka si kale loo dhigo, qeexida haddii ilmahaaga dhaqankiisu la xidhiidho ama ay keentay naafonimadiisu.

Maxaan samayn karaa haddii aan diido bedelka meelaynta?

Waxaad codsan kartaa dhagaysi nidaam jira si aad uga dodo go'aanka lagu bedelayo waxbaraitaanka ilmahaaga. Sarkaalka dhagaysiga ayaa go'aamin doona haddii degmo dugsiiyeedku ay muujiyeen inay raaceen rabitaanadii markii ay bedeleen meelaynta ilmahaaga. Nidaamka dhagaysiga waxa lagaga hadlay si faahfaahsan baragaraafyada soo socda ee qaybta "nidaamka jira" ee dhokomentigan. Dhagaysi nidaam jira oo la dedejiyey ayaa dhaca kahor kan dhagaysiga nidaamka jira ee caadiga ah oo si faahfaahsan hoos looga hadlayo.

Muxuu yahay go'aanka muuqdaa?

Go'aanka muuqdaa waa go'aan in ilmahaaga dhaqankiisu ay keentay (marka si kale loodhigo inay muuqato) naafonimadu. Go'aankan waxa sameeyey degmo dugsiiyeedka, adiga waalidiinta, iyo xubnaha daruuriga ah ee kooxda IEP ("xubnaha daruuriga" iyo degmo dugsiiyeedka).

Goorma ayaa dib-u-fiirinta go'aanka muuqda la sameeyaa? Ayaa sameeya go'aanka muuqda?

Go'aanka muuqda waxa la sameeyaa 10 maalin dugsii go'aanka bedel meelayneed ee ilmahaaga naafoda ah sabab gef sharciyada dugsiga ah.

Degmo dugsiiyeedka, waalidiinta, iyo xubnaha daruuriga ah ee kooxda IEP ayaa sameeya go'aanka muuqda. aragtida macalin iyo waxii macluumaad ee kale ee waalid keeno.

Macluumaadka muhiimka ah waxa loo adeegsan doonaa qeexida:

- O Haddii dhaqanka ilmaha su'aashu ka taagan tahay uu ku yimi, ama si toos ah oo xidhiidh adag la leeyahay naafonimada ilmaha; ama
- O Haddii dhaqanka ilmaha uu yahay si cad guuldarada degmo dugsiiyeedka inay hirgeliyaan barnaamijka waxabarashada qof ahaaned.

Haddii adiga, degmo dugsiiyeedka iyo xubnaha daruuriga ah ee kooxda IEP gartaan in dhaqanka ilmaha uu buuxinayo xaaladaha miduun #1 ama #2 ee kore, markaas dhaqanka waa muuqaal ilmaha naafonimadiisa ah.

Haddii xaalada lagu sharxay #2 ee kore la buuxiyey, degmo dugsiiyeedku waa inay qaadaan talaabooyin degdega si loo hirgeliyo barnaamijka waxabarashada qof ahaaneed.

Maxaan qaban karaa si aan u diido go'aanka muuqda?

Waxaad codsan kartaa dhagaysi nidaam jira oo la dedejiyey si aad uga dodo go'aanka. Sarkaalka dhagaysiga ayaa go'aamin doona haddii degmo dugsiiyeedku ay muujisay in ilmahaaga dhaqankiisu uu ahaa ama aanu ahayn muuqaal naafonimada ilmaha ah, sida waafaqsan rabitaanada sare. Nidaamka dhagaysiga waxa lagaga hadli doonaa si faahfaahsan baragaraafyada soo socda ee qaybta "Nidaamka Jira".

Waa maxay inay qabtaan kooxda IEP haddii dhaqanka loo gartay inay tahay muuqaal naafonimada ilmaha ah?

Haddii dhaqanku uu yahay muuqaal ilmaha naafonimadiisa ah, kooxda IEP waa inay:

O Ama:

- Bilaabaan samaynta qiimayn dhaqan oo shaqaynaysa (fiiri qaybta “Macnaha”) w10 maalmood gudahood ee go’aanka muuqda oo dhameeyaan qiimaynta sida ugu dhakhso badan, haddii aanay degmo dugsiiyeedku qqimayn dhaqan oo shaqaynaysa kahor dhaqanka keenay bedelka meelaynta, iyo qorshaha dhaxgalka ee ilmahaaga; ama
- Haddii qorshaha dhexgalka dhaqan hore loo kobciyey, muddo 10 maalmood gudahood ee go’aanka muuqda, dib u fiiri qorshaha iyo walqaafiisa oo bedel, sida daruuriga ah, si loo daweeyo dhaqanka; oo

o Celiyaan foomka meelaynta ilmahaaga ee ilmahaaga lagaga saaray, haddii aan waalidku iyo degmo dugsiiyeedku ogolayn meelaynta taas oo qayb ka ah qorshaha dhexgalka dhaqankan.

”Qorshaha dhexgalka dhaqanka” waa qorshe lagu dawaynayo dhaqanka ilmaha ee aan ku haboonayn dugsiga.

Miyey jiraan waxyaabo kareeban rabitaankan in ilmaha lagu celiyo meelaynta laga soo saaray haddii dhaqanku noqdo muuqaal naafonimada ilmaha ah?

Haa, degmada ma aha inay ilmahaaga ku celiso meelayntii looga saaray dhaqanda qaar. Bedel ahaan, degmadu waa in ay u saartaa meel waxbarasho kumeelgaadha (IAES – macnaheedu waa waxbarasho oo kale) ilaa 45 maalin dugsiga, haddii xataa ilmaha dhaqankiisu yahay muuqaal naafonimadiisa ah, haddii ilmahaagu:

- o Qaato ama leeyahay hub dugsiga, meel dugsigu leeyahay ama xaflad dugsiga oo ah maamulka degmo dugsiiyeedka ama Waaxda Waxbarashada Ohio;
- o Kas ahaan u haysto ama leeyahay daroogo, ama iibiyo ama isku dayowax mamnuuc ah intii dugsiga lagu jiro ama dugsiga dhexdiisa ama xaflad dugsiga ooay qabanqaabiyeen degmo dugsiiyeedka ama Waaxda Waxbarashada Ohio; ama
- o Sameeyey dhaawac halis inta dugsiga lagu jiro ama xaflad dugsiga oo ay maamuleen dugsiiyeedka ama Waaxda Waxbarashada ee Ohio.

Haddii dhaqanka ilmahaaga ee su’aashu ka taagan tahay aanu ahayn muujin la xidhiidha

naafonimadiisa, side loo edbinayaa ilmahaaga?

Haddii aanu dhaqanku ahayn mid ay keentay naafonimada ilmahaagu, shaqaalaha dugsiga ayaa raaci doona nidaamka anshaxa ee caadiga ah. Dugsigu wuxu u edbin karaa ilmahaaga sida caadiga iyo muddada caadiga ee dugsigu u edbiyo ilmaha aan naafoda ahayn.

Haddii ilmahaaga laga saaray goobta waxbarashada ee hadda, ilmahaagu waa inuu:

- o Sii wadaa helitaanka adeegyada waxbarasho si uu ilmahaagu u sii wado kaqaybgalka manhajka waxbarashada guud, inkasta ay tahay meel kale, iyo horumarintiisa gaadhitaanka himilada u dhigan barnaamijkiisa waxbarashada qof ahaaneed; iyo
- o Helista, marka ay haboon tahayba, qiimayn dhaqan oo shaqaynaysa iyo bedelaad dhaqan oo loo habeeyey si lagu xaliyo dhaqanka si aanay mar kale u dhicin.

FIIRO: Shaqaalaha dugsiga waa tixgelin karaan xaalada goonida ah habda kiiska siduu yahay marka la qeexayo haddii la amrayo bedel meelayneed ee ilmaha naafoda ah ee ku gafay sharciga dhaqanka ardayga.

Sidee la ii ogeysiinayaa haddii degmo dugsiiyeedku ay go’aansadaan inay bedelaan meelaynta ilmahaaga sababo gef sharci dugsiga?

Taariikhda go’aanka la gaadhay in lagu bedelo meelaynta ilmaha sababo gef sharci dugsiga, degmo dugsiiyeedku waa inay:

- o Ku ogeysiyaan go’aanka; oo
- o Ku siiyaan ogeysiiska dhawritaanka xuquuqda (nuqulka *Whose IDEA Is This?*).

Ayaa go’aamiya goobta waxbarashada kumeelgaadhka (IAES—ama meesha kale ee kumeelgaadhka ah) mmesha ay noqonayso ama adeegyada uu ilmahaagu helayo?

Kooxda IEP ayaa go’aamisa IAES iyo adeegyada haboon marka:

- o ilmahaagu ku gefo sharciga dugsiga ee bedel meelayn la sameeyo 10 maalin dugsiga oo isracsan. Tani waxa kale oo ay dhacdaa marka qaab kasaaritaan ilmahaaga oo isugeynteedu in

ka badan 10 maalin dugsi isla sannad dugsiyeed keliya; ama

- o Meelaynta ilmahaaga oo la bedelay sababo xaalado gaara oo la xidhiidha hub, daroogo ama geysashada dhaawac jidh oo qof kale.

Intee in le'eg ayuu ilmahaygu ku jiri karaa meel waxbarasho kumeelgaadha?

Haddii dhaqanka ilmahaagu aanu toos ula xidhiidhin naafonimadiisa, ilmahaagu wuxu ku jiri karaa IAES isla mudda ilmaha aan naafoda ahayn lagu edbin karo.

Haddii ilmahaaga dhaqankiisu uu toos ula xidhiidho ama ay keentay naafonimadiisu iyo:

- o ilmahaaga haddii uu sameeyey gef sharciga dugsiga: y, iyada oo mooyaane adiga iyo degmo dugsiyeedka aad oogolaataan bedelka meesha ee qorshaha barnaamijka waxbarashada qof ahaaneed;
- o Ilmahaaga dhaqankiisu haddii ay ku jireen denbi hub ama daroogo ama gaysashada dhaawac qof kale: IAES ilaa 45 maalmood.

Maxaa dhacaya haddii aanaan ogolaan go'aanka meelaynta ka yimid waxqabadka anshaxa?

Waxaad codsan kartaa dhagaysi nidaam jira oo la dedejiyey ee diidmada go'aanka meelaynta ee ficilka anshaxa. Nidaamka dhagaysiga waxa si faahfaasan looga hadlay qaybta "Nidaamka Jira" xagga hoose ee daabacaadan.

Sideen u codsan karaa dhagaysiga nidaamka jira ee la dedejiyey?

Markaad codsato dhagaysi nidaam jira oo la dedejiyey:

- o U gudbi isuduwaahaaga codsiga qoraal ah oo nuqul u dir Xafiiska Ilmaha Gaarka:
 - U dir nuqulka asalka ah ee cabashada nidaamka jira isuduwaaha degmo dugsiyeedka ilmahaagu deggan yahay;
 - U dir nuqul cabashada nidaamka jira ama faagis ugu dir:
Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Qaybta Dhowrista Nidaamka
See page 29 for contact information.
- o Degmo dugsiyeedka waa inay la xidhiidho qofka ka mas'uul ah dhagaysiga nidaamka jira

ee Xafiiska Ilmaha Gaarka ah kahor dhamaadka maalinta shaqada ee xigta.

- o Sarkaalka dhagaysiga nidaamka jira waxa magacaaba Xafiiska Ilmaha Gaarka ah kahor dhamaadka maalinta xigta laga bilaabo maalinta degmadu u sheegto xafiiska codsigaaga.
- o Sarkaalka dhagaysiga nidaamka jira ayaa kula soo xidhiidhi doona muddo 24 saac gudahood magacaabista si uu u qabto ballanka dhagaysiga.
- o Dhagaysi la dedejiyey ayaa dhici doona 20 maalin dugsi taariikhda dhagaysiga la codsaday oo waa inuu keeno go'aan 10 maalin dugsi gudahood kadib dhagaysiga.

Xigo qaybta "Nidaam jira" wixii macluumaad ah ee la xidhiidha waxa ku jiraya codsiga nidaamka jira.

Maxay degmo dugsiyeedku qaban kartaa haddii ay aaminsan tahay ku waditaanka meelaynta hadda ee ilmuhu (meesha waxbarashada) in laga yaabo inay ku keento dhaawac ilmahaaga ama kuwo kale?

Haddii degmo dugsiyeedku ay aaminsantahay in ku waditaanka meelaynta hadda ee ilmuhu laga yaabo in ay ku keento dhaawac ilmahaaga ama qof kale, degmo dugsiyeedku waxa laga yaabaa inay:

- o Qabato kulan IEP si dib loogu fiiriyo barnaamijka waxbarashada qof ahaaneed oo looga hadlo tabashadaada iyo xubnaha kale ee kooxda IEP. Haddii adiga iyo degmo dugsiyeedku isku diidaan wax la xidhiidha sida lagu dawaynayo tabashada dugsiga, degmadu waxay ku weydiin kartaa dhagaysiga nidaamka jira ee la dedejiyey; ama
- o Isla markiiba ku weydiistaan dhagaysi nidaam jira oo la dedejiyey iyada oo aan la qaban fadhi IEP; ama
- o Raadshaan amar maxkamadeed ama daawo kale oo sharcigu ogol yahay.

Haddii degmo dugsiyeedku codsato dhagaysiga nidaam jira ee la dedejiyey, waa maxay talaabooyinka xigaa?

Haddii degmo dugsiyeedku codsato dhagaysi nidaam jira oo la dedejiyey, degmo dugsiyeedku waa inay:

- o Ku siisaa nuqul qoraal ah codsiga iyo ogeyssid dhawritaan nidaam (*Whose IDEA Is This?*), haddii uu kani yahay cabashada ugu horaysa ee nidaam jira sannad dugsiyeedka; iyo
- o Sameeyaan go'aan muuqda 10 maalin dugsi gudahood go'aanka eryitaanka.

Maxaa dhacaya haddii diido go'aanka sarkaalka dhagaysiga?

Waad diidi kartaa go'aanka dhagaysiga qoraal ahaan 45 maalmood gudahood marka aad hesho go'aanka. U dir rafcaankaaga:

Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Qaybta Dhowrista Nidaamka
See page 29 for contact information.

Nuqulka rafcaanka u dir isuduwaha degmo dugsiyeedka aad deggan tahay. fiiri qaybta "Nidaam Jira" ee daabacaadan wixii macluumaad ah ee la xidhiidha nidaamka racfaanka.

Xagee ilmahaygu joogayaa mudada racfaankayga ee go'aanka sarkaalka dhagaysiga?

ilmahaagu wuxu joogayaa gudaha IAES ilaa 45 maalin dugsi haddii meelaynta ilmahaaga ee IAES wuu amray sarkaalka dhagaysiga. Dhamaadka 45 maalin dugsi, haddii degmadu aaminsan tahay ku soo celitaanka ilmahaaga ee meelayntii hore ayaa suurtagal ah inay keento dhaawac ilmahaga gaadha ama kuwo kale, degamdu waxay keeni doontaa dhagaysi cusub ee nidaam jira oo la dedejiyey.

Goorma ayaan codsan karaa dhagaysi nidaam jira oo la dedejiyey?

Waxaad codsan kartaa dhagaysi nidaam jira oo la dedejiyey keliya ka doodista:

- o Go'aan muuqda ee ilmahaaga; ama
- o go'aan kasta oo la xidhiidha meelaynta ilmahaaga ee ficil la xidhiidha anshax.

Sida kor ku sheegan, degmo dugsiyeedka ayaa codsan kara dhagaysi nidaam jira oo la dedejiyey haddii degmadu aaminsantahay in ku sii waditaanka ilmahaaga meelayntu ay ku keeni karto dhaawac ama cid kale.

Halkee ayaa ilmahay wax lagu barayaa muddada dhagaysiga nidaamka jira ee la dedejiyey?

ilmahaagu waa inuu joogo gudaha IAES (goob waxbarasho kumeelgaadha) ilaa inta sarkaalka dhagaysigu go'aan qaadanayo ama ilaa eryitaanka ama cayrintu dhamaanayso, hadba kii soo horeeya.

Sideen u codsan karaa racfaan go'aanka lagu gaadhay dhagaysiga nidaamka jira ee la dedejiyey?

Waa inaad qoraal ahaan ugu samayso codsigaaga, Xafiiska Ilmaha Gaarka ah 45 maalmood gudahood maalinta lagu soo ogeysiiyo go'aanka qoraalka ah ee sarkaalka dhagaysiga.

- o U dir racfaanka asalka ah:
Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Qaybta Dhowrista Nidaamka
25 South Front Street
Mail Stop #202
Columbus, Ohio 43215-4183
Fax (614) 728-1097

- o Nuqul racfaanka u dir isuduwaha degmo dugsiyeedka.

Dib-u-fiirinta waa in la dhameeyo oo go'aan qoraal ah uu bixiyo sarkaalka heer gobol oo dib u fiirineed 30 maalmood gudahood. Lama kordhin karo muddada 30ka maalmood. Waad ka rafcaani kartaa go'aanka sarkaalka heerka gobol ood gudbinayso maxkamada haboon ee racfaanka ama maxkamada degmada ee federaalka. Fiiri qabyta nidaamka jira wixii macluumaad ah ee la xidhiidha go'aanka sarkaalka heerka gobo lee dib-u-fiirinta.

Ilmahayga looma aqoonsan ilmo naafo ah, laakiin waxaan u malayn inuu naafo yahay u baahan waxbarasho gaara. Ilmahaygu ma qabaa wax ilaalinaya haddii uu jabiyo sharciga dugsiga?

Haddii degmo dugsiyeed ay og yihiin inuu ilmahaagu naafo yahay kahor intaanu ilmahaagu sharciga ku gefin, waxaad weydiin kartaa in ilmahaaga la siiyo xuquuq la mid ah tan ilmaha kale ee naafoda ah.

Degmo dugsiyeedku waxa loo qaadan karaa inay ogaayeen in ilmahaagu naafo yahay haddii ay dhaceen waxyaabaha soo socdaa kahor intaanu ilmahaagu ku gefin sharciga dugsiga:

o Haddii aad qoraal ahaan ugu sheegtay hogaamiyaha ama shaqaalaha maamulka ee degmo dugsiyeedka ama macalin in ilmahaagu u bahan yahay adeegyada waxbarashada gaarka ah;

o aad codsatay qiimayn ilmahaaga ah; ama

o Macalinka ilmahaaga ama shaqaale kale oo degmo dugsiyeed:

- Sheegeen – si toos ah agaasimaha waxbarashada gaarka ama shaqaale kormeer ee degmo dugsiyeed oo kale – walaac la xidhiidha qaab dhaqan oo ilmahaagu muujiyey.

Degmo dugsiyeedkaagu wuxu tixgelin doonaa in aanu ogayn ilmahaagu inuu yahay ilmo naafo ah haddii:

o Adiga:

- Aanad ogolaan in ilmahaaga la qiimeeyo; ama
- Aad diido waxbarasho gaara ama adeeg la xidhiidha ee ilmahaaga; ama

o Ilmahaaga la qiimeeyey oo loo gartay inuu yahay ilmo aan naafo ahayn.

Haddii degmo dugsiyeedku ay ogtahay in ilmahaaga uu yahay ilmo naafo ah kahor qaadashada ficilka anshaxa, ilmahaagu wuxu heli karaa isla edbinta ay helaan ilmaha aan naafoda ahayn ee sidan oo kale u dhaqma.

Maxaa dhacaya haddii adiga ama qolo kale aad codsataan qiimayn ilmahaaga inta ilmaha la edbinayo?

Haddii adiga ama qolo kale sameeyaan codsigaaga inta ilmahaaga la edbinayo, ilmahaaga waa in si degdega loo qiimeeyo.

Ilaa inta qiimayntu dhamaanayso, ilmahaagu wuxu sii joogi doonaa meelayn waxbarasho ay magacaabaan xafiiska dugsiga, oo ay ka mid noqon karaan eryitaan, catritaan aan lahayn adeegyo waxbarasho.

Marka uu dhamaado qiimayntu, koox aqoon leh iyo adiga, ayaa qeexi doona haddii ilmahaagu naafo yahay.

Go'aanka kooxda waxay tixgelin doonaan macluumaadka degmo dugsiyeedka iyo kaaga.

Haddii ilmahaaga loo garto ilmo naafo ah, degmo dugsiyeedku ma u dirayaaan ilmahaaga booliiska iyo maxkamad ooma siinayaan ilmahaaga xogtiisa waxbarasho booliiska iyo maskamada?

IDEA ayaa ogol in degmo dugsiyeed ama wakaalad ka warbixiso denbi uu galay ilmo naafo ah ilaa xafiisyada haboon. IDEA waxa kale oo ay ogoshahay nabadilaalinta gobolka iyo maxkamadaha inay fuliyaan waajibaadkooda si ay u meelmariyaan sharciyada gobolka iyo federaalka ee denbiga uu gaystay ilmo naafo ah.

Haddii degmo dugsiyeed ama wakaalad ay soo sheegaan denbi uu falay ilmahaagu, degmo dugsiyeedku waa inay hubiyaan in nuqulada xogta waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga iyo xogta anshaxa lala wadaago xafiisyada ay degmada ama wakaaladu warka gaadhsiisay.

degmo dugsiyeed ama wakaalad ka warbixinaysa denbi waa inay nuqulka xogta waxbarashada gaarka iyo xogta anshaxa u diraan keliya haddii uu ogol yahay Xeerka Xuquuqda iyo Asturnaanta Waxbarashada Qoyska.

BUGSIYADA AAN DAWLIGA AHAYN (GAARKA AH)

Gudaha Ohio dugsi gaara waxa loo yaqaan dugsi aan dawli ahayn

.

Waa noocma dugsiyada aan dawliga ahayn ee jiraa, oo miyey farqi usamaynaysaa aniga ama ilmahaaga?

Dugsi aan dawli ahayn waa dugsi ay maamulaan dad gaara ama sharikad ama urur gaara. waxa jira laba nooc oo dugsi aan dawli ahayn: (1) ruqsad leh, oo amar ka haysta gobolka Ohio iyo (2) aan ruqsad lahayn, oo la ogol yahay inay shaqeeyaan laakiin aan buuxin *dhamaan* shuruudaha gobol u baahan yahay. (fiiri macnaha dugsi aan dawli ahayn qaybta “Macnaha”).

Ardayda naafoda ah ee ay waalidkoodu ku meeleeeyaan dugsiyada aan dawliga ahayn (ruqsad leh aam aan ruqsad lahayn) waxa laga yaabaa inay adeegyo ka helaan dugsiyada

dadweynaha sida lagu sharxay qaybtan. Hase ahaatee, damaanad ma leh. Fiiri su'aasha soo socota si aad u barato waxa qeexaya haddii ilmahaagu helayo adeegyo.

Maxay yihiin xuquuqdaydu haddii aan ilmahayga naafoda ah ku meelaynayo dugsi aan dawli ahayn ruqsad la'aan ama iyada oo degmo dugsiyeedku ii dirin?

Haddii aad ka fekiirayso inaad ilmahaaga ku melayso dugsi aan dawli ahayn ogolaansho la'aan iyo iyada oo degmo dugsiyeed kuu dirin:

- o Degmo dugsiyeedka aad deggan tahay loogama baahna inuu bixiyo kharashka waxabarshada, oo ay ku jirto waxbarashada gaarka iyo adeegyada la xidhiidha, haddii oo mooyaane aanay degmo dugsiyeedku lahayn waxabarasho dadweyne oo bilaasha oo ilmahaagu helo. (Tani macnaheedu waa degmo dugsiyeedka ayaa kuu fidiyey waxbarasho gaara iyo adeegyada la xidhiidha oo adna aad diiday).
- o Haddii ilmahaagu u qalmo adeegyo, degmo dugsiyeedka aad ku nooshahay (oo la yidhaa degmo dugsiyeed deganaanshaha) ayaa ka mas'uul ah helitaanka waxbarasho bilaasha oo haboon ee ilmahaaga. Haddii aad ujeedadaada ka dhigto cadaan inaad ilmahaaga ku hayso dugsi aan dawli ahayn, degmo dugsiyeedka aad ku nooshahay uma baahna inay kobciyaan barnaamij waxbarasho qof ahaaneed ee ilmahaaga.
- o Haddii aad doorato inuu ku jiro dugsi aan dawli ahayn halkii dugsiga degma dugsiyeedka deganaanshaha, degmo dugsiyeedkaagu uma baahna inay kobciyaan barnaamij waxbarasho qof ahaaneed ee ilmahaaga, oo ay ku jirto waxbarashada gaarka iyo adeegyada la xidhiidha, haddii oo mooyaane aanay degmo dugsiyeedku lahayn waxabarasho dadweyne oo bilaasha oo ilmahaagu helo.
- o Waxaad xaq u leedahay in ilmahaaga lagu qiimeeyo degmo dugsiyeedka uu ku yaal dugsiga aan dawliga ahayn, oo noqon kara meel degmo dugsiyeed aanad ku noolayn.
- o Degmo dugsiyeedka uu ku yaal dugsiga aan dawliga ahayn wuxu la kaashan doonaa dugsiga aan dawliga ahayn sida degmo dugsiyeedku ay lacagta qaar u bixin lahaayeen

si loogu adeego ilmaha ku jira dugsiga aan dawliga ahayn.

- o Degmo dugsiyeedku waxay lacagtaas qaar ku isticmaali doonaan u adegista ilmahaaga, laakiin degmada loogama baahna inay u adeegto ilmahaaga. Haddii si kale loo yidhaa ma jiro xaq qof ahaaneed oo uu ilmahaagu u leeyahay inuu helo adeegaas. In other words, there is no individual right for your child to receive service.
- o Degmo dugsiyeedka ayaa leh go'aanka kamadanbaysta ee haddii ilmahaagu helayo adeego iyo, haddii ay dhacdo, adeegyada uu helayo.
- o Haddii degmadu go'aansato inay u adeegto ilmahaaga, waxay kobcin qorshe adeeg.
- o Qorshe adeeg waa ka duwan yahay barnaamijka waxbarasho qof ahaaneed waayo qorshe adeeg ma bixiyo waxbarasho dadweyne haboon oo bilaash ah.

Fiiri *Guidelines for Providing Services to Children with Disabilities Parentally Placed in Ohio Chartered and Nonchartered Nonpublic Schools* wixii macluumaad dheeraad ah. Kuwaasi waxay ku yaalaan bogga internetka ee ODE, www.ode.state.oh.us, erayga baadhitaanku waa: *Guidelines for Providing Services to Children with Disabilities*.

Maxaan samayn karaa haddii dugsiga aan dawliga ahayn ee ilmahaygu tagaa aan la kaashan degmo dugsiyeedka uu ku yaal dugsiga aan dawliga ahayn xagga kharashka loogu adeegayo ilmaha ku jira dugsiga aan dawliga ahayn?

Arrinta caynkan ah waxaad toos ula xidhiidhi kartaa degmo dugsiyeedka oo aad u codsan kartaa adeegyo ilmahaaga.

Degmo dugsiyeedka uu ku yaal dugsiga aan dawliga ahayn ma la wadaagi karaa macluumaad degmo dugsiyeedka aan degganahay?

Waa inaad siiso ogolaansho kahor intaan la wadaagin macluumaadka shakhsi ee ilmahaaga oo dhex marta saraakiisha degmo dugsiyeedka uu ku yaal dugsiga aan dawliga ahayn iyo degmo dugsiyeedka aad ku nooshahay.

Miyaan dhaafaa xuquuqdayda marka aan ku meeleeyo ilmahayga dugsiga aan dawli ahayn?

Waa inaad ogaato in dhawritaanka xuquudaada nidaam aanay la mid ahayn haddii aad doorato inaad ilmahaaga ku meelayso dugsiga aan dawli ahayn.

Nidaam Jira: Waxaad leedahay xuquuq nidaam jira oo dhaafsan “helis ilmo” mas’uuliyada degmada inay qeexdo, hesho oo qiimayso ilmahaaga; degmada bixinaysa barnaamij haboon ilmahaaga, haddii aad doorato inaad ka faa’iidayso iyo haddii kaleba; iyo degmada inay siiso qadar lacag ah sida xeerku sheegayo bixinta waxbarashada gaarka ah qaar iyo adeegyada la xidhiidha kooxda ilmaha ee naafado ah ee ay waalidiintu ku meeleeyen dugsiga aan dawli ahayn.

Waxa kale, ma haysto damaanad adeeg kasta ama qadar adeeg oo ilmahaagu helayo haddii uu ku jiro dugsiga dadweyne.

Cabashooyin: Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho qoraal ah u gudbisno Waaxda Waxbarashada Ohio ee la xidhiidha:

- o Helista ilmaha (qeexida, helista iyo qiimaynta ilmahaaga);
- o Qeexida iyo qiimaynta;
- o Fulinta adeegyada uu dugsigu ogolaaday inuu bixiyo;
- o Qadarka lacagta uu dugsigu isticmaalayo;
- o Goobta adeegyada;
- o Gaadiidka;
- o Kala sooca fasalada;
- o Rabitaanada in aanay lacagtu anfacayn dugsiga aan dawli ahayn;
- o Isticmaalka shaqaalaha dugsiga dadweynaha;
- o Isticmaalka shaqaalaha dugsiga aan dawli ahayn; iyo
- o Rabitaanada la xidhiidha hantida, qalabka iyo alaabta.

Fiiri qabyta “Cabashooyinka” ee macluumaadka la xidhiidha sida loo buuxiyo cabasho qoraal ah.

Goorma ayaa degmo dugsiiyeedka dadweyne bixisaa dhamaan ama qayb waxbarashada ilmaha dugsiga aan dawli ahayn?

Haddii ilmahaagu ka helay waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha degmo dugsiiyeed oo aad ilmahaaga qorto dugsiga aan dawli ahayn ogolaansho la’aan ama diris la’aan degmo dugsiiyeed, sarkaalka nidaam jira ama maxkamad ayaa loo baahan si loo bixiyo kharashka meelaynta dugsiga aan dawli ahayn haddii:

- o Degmo dugsiiyeedka aad deggan tahay aanay siin waxbarasho daweyne haboon oo bilaasha ilmahaaga wakhti macquula kahor qoritaanka dugsiga aan dawli ahayn; iyo
- o ku meelaynta ilmahaaga dugsiga aan dawli ahayn oo haboon.

Sarkaal dhagaysi ama maxkamad ayaa heli karta in meelaynta waalid (oo ah go’aanka aad ku meelaysay ilmahaaga dugsiga aan dawli ahayn) inuu haboon yahay xataa haddii aanay buuxinayn shuruudaha lagu dabihiyay waxbarashada ay bixiyaan gobolka iyo degmo dugsiiyeedyadu.

Soo-celinta kharashka (qadarka dugsiga dib kuu siinayaan) waxbarashada dugsiga aan dawli ahayn waxa dhimi kara ama diidi kara sarkal dhagaysi ama maxkamad haddii:

- o Kulankii ugu danbeeyey ee kooxda IEP ee aad timid kahor kasaaritaanka ilmahaaga dugsiga dadweynaha, aanad u sheegin kooxda IEP inaad diidayso meelaynta la soojeediyey (macnaheeduna qabanqaabada degmada ee waxbaritaanka ilmahaaga) oo aanad sheegin tabashadaada iyo ujeedadaada inaad ilmahaaga ku qorayso kharash dadweyne dugsiga aan dawli ahayn;
- o Maad siin ogeysiis qoraal ag degmo dugsiiyeedka ugu yaraan 10 maalin shaqo gudahood (oo ay ku jiraan fasaxyo ku dhacay maalin shaqo) kahor kasaaritaanka ilmahaaga dugsiga dadweynaha ee aad ka diidanayd qabanqaabada degmada caddaynta waxbarasho haboon oo bilaasha ilmahaaga. Qoraalka ogeysiiska waa inuu ku jiro caddaynta tabashadaada iyo ujeedadaada inaad ku qorayso ilmahaaga dugsiga aan dawli ahayn kharash dadweyne;
- o Kahor kasaaritaanka ilmahaaga dugsiga dadweynaha, dugsiga oo kuu sheegay ujeedadooda inay qiimaynayaan ilmahaaga oo aanad keenin ilmahaaga qiimayntii; AMA

O Inuu jiro go'aan sharci ah oo ficilada aad qaaday ka dhigaya waxaan macquul ahayn.

Kharashka soo-noqonaya (mar kale, qadarka lagu soo celinayo) meelaynta dugsiga aan dawliga ahayn waa la dhimi kara ama diidi kara hadda ogeysiis u keenin sababaha soo socda:

O Mana qortid mana akhridid Ingiriisi;

O Keenitaanka ogeysiis qoraal ahi wuxu ku keeni karaa ilmahaaga dhaawac jidh ama niyad ahaaneed;

O Dugsiga ayaa kaa horjoogsaday inaad keento ogeysiiskaas; ama

O maad helin dhawritaanka nidaamka xuquudaada (nuqulka dhokomentigan, *Whose IDEA Is This?*), oo laguuma sheegin inaad keento ogeysiis qoraal ah.

Ma laga yaabaa inuu ilmahaygu adeeg ku helo sarta dugsiga aan dawliga ahayn?

Haddii degmo dugsiiyeedka doortaan oo dugsiga aan dawliga ahayn ogolaado, ilmahaagu wuxu adeegyada ku heli karaa sarta dugsiga aan dawliga ahayn.

Gaadiid miyaa la siinayaa ilmahayga?

Haddii ilmahaagu tagay dugsi aan dawli ahayn oo ruqsad leh, ilmahaagu waxa madmuun ah inuu helayo gaadiidka ay helaan ilmaha naafoda ah ee taga ee taga dugsi aan dawli ahayn oo ruqsad leh.

Haddii ilmahaagu tagay dugsi aan dawli ahayn oo bilaa ruqsad ah, ilmahaagu waxa madmuun ah ma helayo gaadiid haddii aanay mooyaane gaadiid ku qoran yahay adeegyada la xidhiidha ee qorshaha adeega ilmaha.

Haddii ilmahaagu tago mid dugsi aan dawli ahayn oo ruqsad leh ama aan lahayn oo qorshaha adeega ilmahaaga ay ku jirto adeegyo lagu bixinayo meel kale, markaas gaadiid waa inuu helo geeya meesha kana soo qaada.

Gaadiidka waa in la bixiyaa min dugsiga aan dawliga ahayn ilaa guriga ama meesha adeega, taas oo ku xidhan wakhtiga adeegyada.

Dib-u-fiirinta Maamul Ahaaneed

Fadhi aad ugu soo bandhigi karto isuduwaha degmo dugsiyeedkaaga cabashooyinka la xidhiidha qiimaynta ilmahaaga, meelaynta waxbarasho ama bixinta waxbarashada gaarka ah.

Da'da Aqlabiyada

Da' waxbarashada gaarka ah ay u kala wareegayso min adigaa ilaa ilmahaaga (18 sanno gudaha Ohio). Sharaxa xuquuqdaas (nuqulka *Whose IDEA Is This?*) waa in la siiyo ilmahaaga ugu yaraan hal sanno kahor intaanu gaadhin da'da 18.

Hadafyada Sannadka

Bayaanada ilmaha barnaamijkiisa waxbarashada qof ahaaneed ee sharxaya waxa laga filayo inuu qabsado hal sanno.

Qiimaynta

Siyaabaha ama qalabka loo isticmaalo qiyaasta:

- o Hadda hawlihiisa waxbarasho iyo baahiyaha waxbarasho;
- o U-qalmanaanta adeegyada;
- o Horumarka xagga gaadhitaanka himilada; iyo
- o Nooca naafonimada.

Qalab Tiknoolajiyo Gargaar

Walax kasta oo Qalab ama badeeco lagu isticmaalo kordhinta, waditaanka ama hagaajinta awooda ilmaha naafoda ah. Erayga kuma jirto Qalab caafimaad oo ilmaha lagu rakibay, ama bedelaada adeegaas.

Adeega Tiknoolajiyo Gargaar

Adeeg aksta oo si toos ah u gargaar ilmahaga naafoda ah xagga doorashada, haysashada ama isticmaalka Qalab tiknoolajiyo gargaar oo ay ka mid tahay:

- o qiimaynta baahiyaha ilmahaaga;
- o Bixinta qalabyada tiknoolajiyada gargaarka ee ilmaha naafoda ah;
- o Isuduwida iyo isticmaalka dabiibyo kale ama adeegyo kale oo Qalab tiknoolajiyo gargaar;
- o Tababarka ama taageerada gargaar ee ilmaha naafoda ah, ama, haddii ay haboon tahay, ilmahaas qoyskiisa; iyo

- o Tababarka ama taageerada farsamo ee xirfadyahanada ku hawlan hawlaha nolosha ee ilmaha ee muhiimka ah.

Qorshaha Dhexgelitaanka Dhaqanka

Qorshe waxlooga qabanayo dhaqanka ilmaha ee aan ku haboonayn dugsiga.

Bartilmaameed

Bayaan gaar ah waxa ay tahay inuu ilmahaago ogaado ee uu awoodo inuu sameeyo wakhti mucayan ah sannad dugsiyeedka. Bartilmaameedyadu waxay sharxaan inta ay gaadhsiisan tahay hormuarka ilmuhu ilaa himilada sannadka iyo goorta ay dhamaanayso.

Isbedelka Meelaynta Anshaxa

Ka saaritaan dugsi oo asbaabo anshax ah ayaa loo tixgelin kara isbedel meelayneed marka:

- o Ka-saaritaanka oo ka badan 10 maalin dugsi oo israacsan isla sannad dugsiyeed isku mid ah; ama
- o Ilmahaaga oo helay ka-saaritaano xidhiidhsan taas oo muujinaysa taxane:
 - Waayo taxanaha ka-saaritaanadu waxay isku noqon karaan in ka badan 10 maalin dugsi sannad dugsiyeedkii,
 - Waayo ilmahaaga dhaqankiisu wuxu la mid yahay dhaqankiisii hore ee marar hore oo keenay taxane ka-saaritaano ah; iyo
 - Waayo waxyaabaha ay ka mid yihiin muddada ka-saaritaan kasta, isugaynta wakhtiga ilmahaaga laga saaray, iyo isudhawaanshaha ka-saaritaanada.

Ilmaha Naafoda ah

Ama:

- o ilmo naafo ah oo buuxiyey macnaha erayga naafonimada eek u jira qaybta "Macnaha erayada Naafonimada" ama
- o ikhtiyaarka degmo dugsiyeedka, ilmo qaba daahitaan koriin (fiiri macnaha hadhow qaybtan) ee u baahan waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha.

Dugsi Bulsho

Dugsi dadweyne, la abuuray sida waafaqsan Jaabterka 3314. ee Xeerka La-saxay, oo ka

madaxbanaan degmo dugsiyeed kasta iyo qaybta barnaamijka waxbarashada gobolka. Dugsiyada bulshada waxa loo tixgeliyaa degmo dugsiyeed marka ay timaad waxbaritaanka ilmaha naafoda ah sida Jaabtarka 3323. ee Xeerla La-saxay iyo Jaabtarka 3301-51 ee Xeerka Maamulka.

Cabasho

Dhokomenti qoraal rasmi ah (foom) uu waalid ama qolo kale ka xerayso Waaxda Waxbarashada Ohio, Xafiiska Ilmaha Gaarka ah, oo sheegaya in degmo dugsiyeed ama ha'ad dadweyne oo kale aanay raacayn sharciga ama xeerarka la xidhiidha ilmo u qalmay ama hela waxbarasho gaar ah ama adeegyada la xidhiidha.

Siiwaditaanka Ikhtiyaarka Meelaynta Kale (Goob Waxbarasho)

Xul adeegyo ah, oo ay ku jiraan fasalo gaar ah iyo dugsiyo gaar ah; waxbaritaan guri, cisbitaal iyo dugsi; iyo adeegyo sooraaca (sida qolka ilaha khayraadka ama macalin booqde ah) ee la siiyo ardayga naafoda ah halkii fasalka caadiga ah.

FIIRO: Bedelka qadarka wakhtiga ilmaha naafoda ah uu ku qaato meel gaar ah LOOMA xisaabinayo bedel meelayneed (meel waxbarasho) oo looma baahna ogolaanshaha waalidiinta. Foomka bedelka min dhisme ilaa dhisme isna ma aha bedel meelayn ee u baahanogolaansho waalid mar haddii meelayntu ay tahay gudaha isla jawi keliya (tusaale sida qolka ilaha khayraadka) ee gudaha dhismihii hore. Tusaale ahaan, haddii ilme uu ku jiray fasal hore oo caadi ahaan qayb wakhti ahaan iyo qolka khayraadka qaybta kale, oo loo raro dhisme cusub oo ilmuhu tagayo fasal caadi ah qayb-ahaan iyo qolka khayraad qayb-ahaan, ma jiro wax bedel ah oo meelayneed oo u baahan ogolaansho waalid. Haddii ilmaha fsalka caadiga ah uu ku jiro afar fasal oo qolka khayraadkana laba oo ilmaha jadwalkiisa loo bedelo saddex fasal oo fasalka caadiga ah iyo saddex fasal oo qolka khayraadka ah, ma aha bedel meelayneed oo u baahan ogolaansho waalid.

Daahitaan Koriin

Ilmaha 3 ilaa 5 sanno jir ah ee koox qiimayneed oo xirfadyahano ah ay u gartaan inuu leeyahay daahitaan koriin hal ama meel badan ee soo socda: koriinka jidhka; koriinka garadka;

koriinka xidhiidhka; koriinka niyada ama bulshanimada; ama koriinka la-qabsiga . Erayaga waxa lagu isticmaali karaa bedelka noocyada naafonimo ee soo socda: naafonimada garaadka; khalkhal niyadda ah; dhinaansho xagga hadalka ama afka ah.

Nidaam Jira

Taxane talaabooyin ku yaal Individuals with Disabilities Education Improvement Act (IDEA) ee 2004) oo qeexaya xuquuqda waalidiinta haysta ilmaha naafoda ah.

Cabashada Nidaamka Jira iyo Dhagaysiga Nidaamka Jira

Dhagaysiga nidaam jira oo dhiman waa dhagaysi rasmi ah oo lagu qabto codsiga waalidiinta ama wakaalad dadweyne. Tani waxa loo sameeyaa si loo xaliyo cabashada nidaam jira oo la xidhiidha ilme u qalmaya ama helitaanka waxbarasho gaara ama adeegyo la xidhiidha.

Adeegyada Dhexgelitaanka Hore

Adeegyada la siiyo ilmaha naafoda ah ama daahitaan korrin qaba min dhalashada ilaa da'da 2 jirka.

Qiimaynta

Nidaamyada loo isticmaalo qeexida haddii ilmahaagu naafo yahay oo uu u baahan yahay waxbarasho gaara iyo adeegyada la xidhiidha.

Kooxda Qiimaynta

Kooxda barnaamijka Waxbarashada ilmaha ee qof ahaaneed (IEP) iyo xirfadyahano aqoon leh ee loo arko baahidooda daruuri.

Waxbarasho Dadweyne Haboon oo Bilaasha (FAPE)

Waxbarasho gaara iyo adeegyada la xidhiidha ee lagu bixiyo kharashka dadweynaha, ee hoos yimaad kormeerka iyo maaraynta dadweynaha, ee aan waxba ku joogin waalidiinta. Adeegyadaas waa inay buuxiyaan shuruudaha Waaxda Waxbarashada Ohio; waa inay ku jiraan malcaamad haboon, dugsi hoose, ama waxbarasho dugsi sare ee gudaha gobolka, oo waa inay ku salaysnaato barnaamijka waxbarashada qof ahaaneed ee ilmahaaga (IEP).

Qiimaynta Dhaqan ee Shaqaynaya

Nidaam ay ka mid noqon karaan waraysiyo, fiirsasho toos ah iyo qiimayn kale ee ardayga dhaqankiisa. Nidaamka waxa loo isticmaali jiray qeexida waxa ku jira ilmaha jawigiisa ee kicinaya dhaqanka aan haboonayn, iyo weliba dhaqanka bedelka ah ee la bari karo ilmaha si uu helo ilmhu natiijo fiican iyo jawaabcelin. Su'aalaha qaar loo weydiyo qayb ahaan qiimaynta dhaqanka shaqaynaya waxa ku jiri kara: Maxaa dhacay dhaqanka kahor? Maxaa dhacay muddadii dhaqanka? Maxay ahayd natiijada dhaqanku? Jawigee ayuu ku dhacay dhaqanku? Miyaa la bedelay daawada ilmaha? ilmaha ma la siiyey daawada wakhtigii haboona?

Qiimaynta Shaqada ee Shaqaynaya

Nidaam lagu qeexayo ardayga sifooyinkiisa shaqo iyo baahiyaha tababar iyo taageero ee la xidhiidha rabitaanada shaqo dhab ah. Macluumaadka qiimaynta shaqaynaysa waxa loo ururiyaa si shaqada ugu fiican loogu helo ilmaha.

Manhajka Guud

Isla manhajka loo dhigo ilmaha aan naafoda ahayn.

Ilmaha Aan Guriga Lahayn

Fiiri erayga “ilmaha iyo dhalinta aan guriga lahayn” ee qaybta (42 U.S.C. 11434a) ee Xeerka Gargaarka Guri Laawaha ee McKinney-Vento ee la bedelay, 42 U.S.C. 11431 *et seq.*

IDEA

The Individuals with Disabilities Education Improvement Act ee 2004 at 20 U.S.C. 1400, Public Law 108-446 of the 108th Congress, Diisambar 3, 2004.

Qiimaynta Waxbarashada Qof ahaaneed (IEE)

Qiimaynta ilmaha ee uu sameeyey xirfadyahan tababaran oo aan u shaqayn degmo dugsiyeedka ilmaha.

Barnaamijka Waxbarashada Qof Ahaaneed (IEP)

Bayaan qoraal ah loo kobciyey ilmahaaga, dib loo saxay, oo lagu noqday sida waafaqsan nidaamyada gobolka iyo federaalka.

Kooxda Barnaamijka Waxbarashada Qof Ahaaneed (IEP)

koox dad ka mas'uul ah kobcinta, sixida iyo ku noqoshada barnaamijka waxbarashada qof ahaaneed ee ilmaha naafoda ah.

Goob Bedel Waxbarasho Kumeelgaadha (IAES)

Marka ilmaha la edbinayo, degmo dugsiyeedku waa ka saari kartaa ilmaha goobta waxbarashada ee hadda. kooxda IEP ee ilmaha ayaa qeexi doonta ku meelaynta ilmaha bedel kumeelgaadha oo haboon, oo la yidhaa goob bedel waxabarasho kumeelgaadha (IAES). Xaaldaha soosocda, sarkaalka kasta oo dugsi ayaa qeexi kara IAES:

Marka ilmuhu:

- o Qaato ama leeyahay hub dugsiga, meel dugsigu leeyahay ama xaflad dugsi oo ah maamulka degmo dugsiyeedka ama Waaxda Waxbarashada Ohio;
- o Kas ahaan u haysto ama leeyahay daroogo, ama iibiyo ama isku dayo wax mamnuuc ah intii dugsiga lagu jiro ama dugsi dhexdiisa ama xaflad dugsi ooay qabanqaabiyeen degmo dugsiyeedka ama Waaxda Waxbarashada Ohio; ama
- o Sameeyey dhaawac halis inta dugsiga lagu jiro ama xaflad dugsi oo ay maamuleen dugsiyeedka ama Waaxda Waxbarashada ee Ohio.

Barnaamijka Waxbarashada Qof Ahaaneed (IEP)

Marka xirfadyahan tababaran oo dhexdhexaad ah ka caawiyo kooxda IEP kobcinta barnaamij waxbasho qof ahaaneed oo tayo leh ee ilmaha.

Kooxda Gargaarka Dhexgalka (IAT)

Koox mutacalimiin ah oo ka socda dugsiga ilmaha ee habeeeyey qaabab kala duwan oo gargaar ee ilmaha la kulma dhibaatooyinka. Waxa lagu martiqaadi karaa fadhiga IAT ee la xidhiidha ilmahaaga.

Jawiga Ugu Xadidaada Yar (LRE)

Sida ugu suurtagalsan, ilmaha naafoda ah (oo ay ku jiraan ilmaha ku jira dugsiyada dadweynaha ama aan dawliga ahayn ama goobaha kale ee daryeelka) waxwax lala baraa ilmo aan naaf

ahayn. Ilmaha naafoda ah waxa laga saari karaa jawiga waxbarashada caadiga ah keliya marka ilmaha naafoda ah aad u ba'an yahay oo aanu ilmuhu wax lagu bari Karin fasal caadi ah oo leh qaalab iyo taageero dheeraad ah.

Kuhadalka Ingiriisi Xadidan (LEP)

Marka ilmaha ay xadidan tahay hadalka, fahamka ama aanu awoodin luqada Ingiriisida. waxa kale oo eraygan lagu macneeyey qaybta 9101 ee Xeerka Waxbarashada Hoose iyo sare ee 1965.

Go'aanka Muuqda

Go'aan in ilmahaaga dhaqankiisu ku yimi ama yahay natiijada naafonimadiisa. Go'aankan waxa gaadha degmo dugsiiyeedka, adiga waalid ka, iyo xubnaha muhiimka ah ee kooxda IEP ("xubnaha muhiimka ah" waxa qeexa adiga iyo degmo dugsiiyeedka).

Dhexdhexaadin

Nidaam tabaruca oo lagu xaliyo khilaafka dhexyaal laba qolo oo uu hogaamiyo qolo dhexe oo u tababararan oo la yidhaa dhexdhexaadiye. dhexdhexaadiye waxa aga dooran karaa liisto dhexdhexaadiyayaal ay hayaan Waaxda Waxbarashada Ohio.

Bedelaad

Isbedel kasta oo lagu sameeyo shaqadaada dusiga, shaqada ama jawiga si loo buuxiyo baahiyaha waxbarasho ee qofka.

Afka Hooyo

Qofa Ingiriisidiisu xadidan tahay waxa ku jira:
o Afka oo badiyaa qofku isticmaalo, ama, haddii ilmo yahay, afka ay isticmaalaan labada waalid, marka laga reebo qodobada hoose.
o Dhamaan xidhiidhkaaga ilmaha (oo ay ku jirto qiimaynta ilmahaaga), afka badiyaa aad ilmahaag kula isticmaasho guriga ama jawiga waxbarasho.

Qofka dhago la' ama indho la', ama qofka aan lahayn af qoran, qaabka xidhiidhku ee badiya la isticmaalo (sida afka indhoolaha, calaamadaha, Braille ama af kahadalka).

Dugsi Aan Dawli Ahayn

Dugsi aan dawli ahayn waa goob waxbarasho oo ay wadaan dad gaara ama sharikado ama ururo gaara. Dugsiga aan dawlaga ahayn ee ruqsada

leh waxa loo tixgeliyaa "dugsi gaara" oo ah inuu buuxiy "Shuruudaha Shaqada ee Dugsiyada Ohio" ee lagu habeeyey jaabtar 3301-35 ee Sharciga Maamulka dugsiyada aan ruqsada lahayn, kuwa aan lagu taageerin cashuurta ee aan ruqsada lahayn ama ruqsada ka raadsanaya Guddiga Waxbarashada gobolka sababo la xidhiidha aaminaad diineed. Nonchartered, nontax-supported schools are not chartered or seeking to be chartered by the State Board of Education because of truly held religious beliefs.

Himilo

Hawl baritaan oo yar oo la maarayn karo ee ah in ilmahaagu barto si uu talaabo hore ugu qaado gaadhitaanka himilada sannadka. Himilooyinku waxay u jajabiyaan xirfadaha lagu sharxay himilooyinka sannadka qaybo goongooni ah oo, marka la barto, u saamaxo ilmaha inuu buuxiyo himilada.

Waalid

(A) "Waalid" macnihiisu waa:

- (1) Waalidiinta dhalay ama korsaday ilmo aan ahayn ka haya ilmaha, (FIRO: Waalidiinta haya "foster parent" waa ka mamnuuc sharciga Ohio inuu ku shaqeeyo waalid ahaan waayo dumada sharciga ee ilmuhu waxay la taal wakaalada adeegyada ilmaha, ee ma ahan waalidiinta haya. Waalidiinta haya waxa loo magacaabi karaa waalid kumeelgaadha haddii waalidiinta hayaa uu buuxiyo rabitaanada waafaqsan);
- (2) Waali badiyaa loo amray inuu metelo waalidiinta ilmaha, ama loo amray inuu gaadho go'aan waxbarasho ee ilmaha (laakiin aan ahayn gobolka haddii gobolku yahay ilaalayaha ilmaha);
- (3) Qof metalaya halkii aabaha dhaladka ama koriyey ilmaha (waxa ka mid ah awoow/ayeeyo, aayo, ama ehel kale) oo ilmuhu la nool yahay, ama qof sharciyan mas'uul uga ah daryeelka ilmaha; ama
- (4) Waalidiinta koreiyey ilmo aanu dhalin oo lagu magacaabay sida waafaqsan 34 C.F.R. 300.519 ama qaybta 639(a)(5) ee IDEA;

(B) Kareeban yahay sida lagu sheegay (C) macnaha waalidiinta dhabta ah iyo kan

korsaday, marka la iskudayayao inwalid la metelo ee hoox timaad qaybta B ee IDEA iyo marka qolo u qalanto sida hoox timaad (A) ee macnahan si loo metealo waalid, waa in loo qaato waalid ahaan ujeedadaas iyada oo mooyaane waalidkii dhabta ahaa ama kii korsaday aanu wax awood sharci u lahayn inuu go'aan waxbarasho u gaadho ilmaha.

- (C) Haddii dkreect maxkamadeed ama amar lafu qeexo qof gaara ama dada sida hoox timaad (A)(1) ilaa (3) ee macnahan si uu u metelo waalidiinta ilmaha ama u sameeyo go'aan waxbarasho isaga oo ka wakiil ah ilmaha, markaas qofkaas waxa loo qeexi doonaa waalid sida macnahan ujeedo.

FIIRO: Arday 18 jir ah isaga ay ismeteli kara.

Meelayn

Waxa ku jira adeegyada la siiyo ilmaha naafoda ah, meesha adeegyada, iyo bixiyayaasha adeegyada.

Ilmo Malcaamad ku jira oo Naafo ah

Ilmo ugu yaraa 3 sanno jira aan gaadhi 6 sanno weli; oo buuxiya macnaha ilmo naafo ah ama, ikhtiyaarka degmo dugsiyeedka, ilmuhu:

- Leeyaha daahitaan koriin jiid ama ka badan kuwa soo socda koriinka jidhka; koriinka garadka; koriinka xidhiidhka; koriinka niyada ama bulshanimada; ama koriinka la-qabsiga; oo:
- Isago, taas darted, u baahan waxbarasho gaara iyo adeegyada la xidhiidha.

Waxbarashada Gaarka ah ee Malcaamada

waxbaritaan gaar loo habeeyey oo buuxinaya baahiyaha ilmaha naafoda ah ee jira inta u dhaxysa 3 sanno iyo 5 sanno jir.

Heerka Hadda ee Waxqabadka

Bayaano laga kobciyey macluumaadka ilmaha la xidhiidha. Macluumaadkan waxa ku jira horumarka ilmaha ee barnaamijka waxbarashada qoif ahaaneed, warbixinta kooxda qiimaynta, warka ad adiga iyo ilmahaagu ku biiriseen, dhexgalada, fiirsashooyinka iyo xaalado gaar ah. Macluumaadkani waxa bixinayaan sawirka ilmaha oo ay ka mid yihiin itaalkiisa iyo baahiyihiisa.

Dhawritaanka Nidaam

nidaamyada lagu habeeyey sharciyada gobolka iyo federaalka ee dhawraya xuquuqda ilmaha naafoda ah iyo waalidiinta ee la xidhiidha helitaanka ilmaha waxbarasho dadweyne haboon oo bilaasha.

Wakaalad Dadweyne

Waxa ka mid ah degmo dugsiyeed, guddi degmada ee naafonimada maskaxda iyo korriinka dhiman, wakaalad kale oo waxbarasho iyo qayb-hoosaad kale oo siyaasad gobolka ah oo ka mas'uul ah bixinta waxbarashada ilmaha naafoda ah.

Kharash Dadweyne

Ay bixisay degmo dugsiyeed ama aan wax lacag ah ku joogin waalidiinta.

Dib-u-qiimayn

Nidaamka lagu isticmaalo qeexida haddii ilmaha lagu wadayo naafo ahaan iyo baahida waxbarasho ee ilmaha.

Xigasho

Codiga waalidiinta, degmo dugsiyeedka ama wakaalad waxbarasho oo kale ee qiimaynta hore ama dib-u-qiimaynta ilmaha ama lagu tuhumay ama la xaqiijiyeey inuu nafo yahay.

Adeegyada La Xidhiidha

Gaadiidka iyo adeegyada taageeda korriinka, sixitaanka ama kale ee looga baahan yahay gargaarka ilmaha si uu uga faa'iidaysto waxbarashada gaarka ah. Kuwaas waxa ku jira adeegyada ku taxan nidaamka federaalka ee 34 CFR 300.34.

Fudaydinta Fadhiiga Xalinta

Marka xirfadyahan tababaran oo dhexdhexaad au degmo dugsiyeed ugu yeedho fadhi xalin si uu isugu dayo xalinta cabasho nidaam jira, taas waxa la yidhaa fudaydinta fadhiiga xalinta. Fudaydiyaha ay iskudaya gargaarista waalidiinta iyo xunaha IEP inay xaliyaan khilaafaadka.

Degmo Dugsiyeed

Magaalo, xaafad, degmo dugsiyeed tuulo, ama dugsi bulsho.

Deganaanshaha Degmo Dugsiyeed

Degmo dugsiyeedka waalidiinta ilmaha naafoda ay ku nool yihiin. Haddii ilmahaagu ku jiro dugsi bulsho, dugsiga bulshada waxa loo arkaa

inuu yahay degmo dugsiyeedka aad deggan tahay.

Qorshaha Adeegyada

Bayaan qoraala oo sharxaya waxbarashada gaarka iyo adeegyada la xidhiidha ee degmo dugsiyeed ay siinayso ilmo naafo ah oo waalidiintu ku meeleeeyeen dugsi aan dawli ahayn oo loo gartay inuu helo adeegyadaas. Qorshahan waxa ka mid ah goobta adeegyada iyo wixii gaadiid ah ee daruuri ah.

Waxbarashada Gaarka ah

waxbaritaan gaar loo habeeyey, si loo buuxiyo baahiyaha gaarka ah ee ilmaha naafada ah, aan kharash ku joogin waalidiinta, oo ay ku jirto baritaanka fasalka gudihiisa, cisbitaal ama dugsi iyo meel kale; iyo casharada dhiska jidhka, oo ay ku jiraan erayada lagu cayimay nidaamka federaalka ee 34 CFR 300.39.

Imtixaano La Mideeyey

Imtixaanada waxa loo qaadaa si isku mid ah markasta oo loo jarjaray qaybo yaryar si loo qiimeeyo jiidaha kala duwan ee awooda. Imtixaanka IQ, horumarka ama afka, koriinka, dhaqanka laqabsiga, dhaqanka qiimaynta iyo dhaqdhaqaaqa quman, dhaqdhaqaaq guud iyo imtixaanada araga hore ayaa ah tusaalooyin imtixaanada la mideeyey.

Dib-u-hubi Heer-Gobol ah

Dib-u-hubinta dhagaysiga nidaamka jira ee ama waalidiinta ama degmo dugsiyeed racfaanay. Waxa qabta sarkaal dib-u-hubin heer gobol oo uu magacaabo Xafiiska Ilmaha Gaarka ah.

Sii joogitaan

ilmahaaga heerkiisa waxbarasho muddada dhagaysiga nidaamka jira. Ilmahaagu wuxu ku sii jirayaa meesha uu hadda wax ka barto haddii aanay gobolka ama wakaalada degamdu si kale garan.

Taageerada iyo Adeegyada Sooraaca

Kuwaasi waa taageero, adeegyo ama gargaar kale oo lagu bixiyo fasalada caadiga ah, meel kale oo waxbarasho, iyo meelo ka baxsan waxbarashada caadiga ah. Kuwaas waxa loola jeedaa si wax loo baro ilmaha naafoda ah mutacaliimiin inta suurtagala sida kuwa aan naafod ahayn.

Waalidiinta Koriya Ilmo Aanu Dhalin

Waalidiinta koriya ilma aanu dhalin waa qof ka wakiila ilmo naafo ah dhan kasta oo la xidhiidha ilmaha u-qalmanaantiisa iyo helitaankiisa waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha. Waalidiinta koriya ilmo aanu dhalin waxa la magacaaba marka aanu joogin ama aan la garanayn waalidiinta ilmaha, ilmuhu yahay maganta gobolka ama ilmaha uu yahay ilmo aan cid iyo guritona lahayn.

Eryitaan

Marka dugsi ka saaro ilmahaaga meelayntiisa waxbarasho ilaa toban maalmood ama ka badan oo is-raacsan saba gef anshax.

Adeegyada Kalaguurka

Taxane waxqabadyo habaysan ee ilmaha da'da 15 sanno ama kayar oo culayska la saarayo hagaajinta aqoonta ee ilmaha naafoda ah. Adeegyada kalaguurka waxay taageeraan ilmaha ka guuristiisa dugsiga ilaa nolosha qaangaadhnima, oo ay ku jirto waxbarasho sare; tababar shaqo; shaqaalayn; siiwaditaan ama waxbarasho dadka waaweyn; adeegyada qofka weyn; iyo gooni u noolaanta ama kaqaybgalka bulshada. Adeegyada kala guurku waxay ku salaysan yihiin baahiyaha ilmaha, iyada oo la tixgelinayo itaalka ilmaha, wuxu jecel yahay, ee daneeyo. Adeegyada kalaguurka waxa ka mid ah baritaan; adeegyo la xidhiidha; waayo-aragnimo bulsho; iyo kobcinta shaqaalayn ama himilooyin nolosha qof weyn, iyo haddii ay haboon tahay, kobcinta xirfadaha nolo maalmoodka iyo bixinta qiimayn shaqogelin shaqaynaysa. Ilmaha da'da 14 ama ka yar, haddii ay kooxda IEP gartaan inay haboon tahay, adeegyada kalaguurka waxa culayska la saari doonaa casharada waxrashada ardayga.

Maganta Gobolka

Erayga “maganta gobolka” meacnaheeda waxa qeexa gobolka uu degan yahay ilmaha la korinayaa, maganta gobolka ah, ama dumada wakaalad daryeel oo dadweyne ku jira.

MACNAHA ERAYADA NAAFONIMADA

Ootisam “Autism”

Naafonimo korriinka oo si weyn u saamaysa xidhiidhka hadalka iyo kan hadalka ahayn iyo dhexgalka bulshanimo, badiyaa muuqda kahor 3 sanno jirka oo si ba'an u saamaysa ilmaha hawshiisa waxbarasho. Sifooyinka kale ee la xidhiidha autism waa ku celcelinta ficil iyo dhaqdhaqaaq u ekaansho, u-adkaysiga isbedelka cimilada ama isbedelka hawsha maalinlaha, iyo jawaabcelin aan caadi ahayn xagga waayoaragnimada dareenada. Erayga laguma dabiqi karo haddii hawsha waxbarasho ee ilmaha saamayn aad ahi ku timaad sababta hore oo ah ilmaha oo qaba xaalad ba'an niyad kacsanaan ah. Ilmaha muujiya sifooyinka autism kadib da'da saddex jirka waxa lagu sheegi karaa inuu qabo autism haddii sifooyinka laba odhaahood ee macnahan ugu horreeya la buuxiyo.

Cognitive Disability

Naafonimada Garashada “Cognitive Disability” (maskax dhiman)

Si ba'an uga hoosaysa karaanka garashada guud oo ka barbar jirta dhinaan xagga dhaqanka laqabsiga (marka si kale loo dhigo, maqnaanshaha awooda laqabsiga). Waxay muuqataa muddada koriinka ilmaha oo ay si qalafsan u saamaysaa ilmaha hawshiisa waxbarasho.

Dhago iyo-indho la'aan

Dhinaanshaha maqalka iyo araga oo dhaca si lamaan. Lamaanaha waxay keenaan ba'naan xagga xidhiidhka iyo dhibaatooyin xagga korriinka iyo waxbarashada oo ilmaha dhago-iyo indh la' aan wax loogu qaban Karin barnaamijyada loogu talagalay keliya ilmaha dhago la' ama kan caruurta indhaha la'.

Dhago la'aan

Dhinaanshaha maqalka ee aad u ba'an ee aanu ilmuu aanu ku fahmin hadlka maqalka, haddii uu haysto Qalab iyo haddii kaleba, oo ay ilmaha waxbarashaddiisa ay saamayso.

Khalkhalka Niyadjabka

Xaalad muujisa ha lama ka badan sifooyinka soo socda muddo wakhti dheer ah ilaa xad ay saamayso waxqabadka waxbarasho ee ilmaha, taas oo dhalisa:

- o Karaan la'aan waxbarasho oo loo fasiri Karin asbaab garasho, dareen ama caafimaad;
- o Karaan la'aan dhisitaanka ama haynta xidhiidhka faca ama macalimiinta;
- o Noocyo dhaqano aan haboonayn ama dareeno imaan kara xaaladaha caadiga ah;
- o Niyad guud ahaan ay ku jirto dudmo iyo niyadjab; ama
- o U-dabacsanaan kobcinta calaamado jidh ahaaneed ama cabsi la xidhiidha dhibaatooyinka qofka ama dugsiga.

Erayga waxa ku jira schizophrenia. Erayga laguma dabiqi karo ilmaha aan bulshanimo la qabsan, ilaa la garto in khalkhal weyn oo niyabjab ahi jiro.

Maqalka Dhiman (dhago-culayska)

Dhago-culayska, ama rasmi ah ama isbedela, ee xoog u saameeya ilmaha hawshiisa waxbarasho, laakiin aan ku jirin macnaha dhago-la'aanta.

Laxaad la'aan Dhawr ah

Dhinaanshaha dhawr jeer dhaca (sida maskax dhiman-indho la'aan ama maskax dhiman-laxaad la'aan muruqyada ah), wadajirka oo keena dhibaatooyin ba'an xagga waxbarashada oo aan lagu bixin Karin keliya mid ka mid ah dhinaanshaha. Erayga kuma jiraa dhago-iyoindha la'aantu.

Laxaad la'aanta Muruqyada “Orthopedic Impairment”

Xaalad laxaad la'aan muruq oo aad u saamaysa waxbarashada ilmaha. Erayga wxa ku jira dhinaansha ay keento wax lagu soo dhashay (sida qalaafo, ama xubin jidhka maqan); dhinaansho ku timid jirro (sida., poliomyelitis, qaaxada lafaha); iyo dhinaansho ay waxyaabo kale keenaan (sida naafonimo, adin la jaray , iyo jabitaan ama dab keenay urursanaan jidh).

Dhinaanshaha Kale ee Caafimaad

lahaanshaha itaal xadidan, tamar, ama feejignaana, ay ku jirto dareen kacsan xagga feejignaanta cimilada dareenkeeda, taas oo keenta feejignaana dhiman oo la xidhiidhka waxbarashada oo ka timid sababo caafimaado daro ba'an sida xiiq (neef), sonkorow, wadne-xanuun, suuxitaan, dhinaan xagga feejignaanta ah, firfircoonaan xad dhaaf ah, dhiig yaraan, suntan naxaasta dhiiga,

ifilo lafaha, iyo xaalada Torette, nephritis; ee saamaynta ba'an ku yeesha waxbarashada ilmaha.

Naafonimada Waxbarashada Gaarka ah

Xaalad hal iyo in ka badan nidaamyada caadiga ah ee saykoolajiga oo ku lug leh fahamka ama isticmaalka luqada, hadal ama qoraal ahaan, oo isu muuqan karta karti daro xagga maqalka, fekirka, hadalka, qoriinka, higaada, ama samaynta xisaabta. Erayga waxa ka mid ah sida xaaladaha naafonimada garaadka, dhaawac maskaxda ah, qalafsanaan yar xagga maskaxda, dyslexia iyo koriinka aphasia. Erayga kuma jiraan ilmaha qaba dhibta waxbarashada ay keentay karaanka aragtida, maqalka iyo dhaqdhaqaaqa, maskaxda dhiman, ama khalkhalka niyadjabka, ama nasiibdaro dhaqan, cimilo ama dhaqaale.

Dhinaanta Hadalka ama Luqada

Xaalad xidhiidh, sida haghagada, qumanaan u hadalka oo aan haagasanaayn, dhinaan xagga afka ama codka oo si ba'an u saamaysa ilmaha waxbarashaddiisa.

Dhaawac Ba'an oo Maskaxda ah

Dhaawac maskaxeed oo ka imaaday xoog dibeda ah ama xaalad caafimaad oo kale, oo ay ka mid tahay aanse ku ekayn dabayl, anoxia, jirro infekshan leh, aneurysm, fix maskaxeed iyo cay dareenada ah oo ka dhashay daaweyn ama qaliin caafimaad. Dhaawaca wuxu keenay naafonimo dhan ama dhiman xaga naafonimada waxqabadka ama dhinaan saykoolaji, ama labadabah, oo si ba'an u saameeya waxbarashada ilmaha. Erayga wuxu dabaqaa furitaanka iyo xidhitaanka nabarada madaxa, iyo weliba xaalado caafimaad oo kale oo dhaliya dhaawac maskada ah. Dhaawacyadu waxay keenaan dhinaansho ha lama ka badan jiidaha, sida garaadka; afka; xasuusta; fejignaanta; macquulnimada; fekirka naasibka ah; xiska; xalinta dhibaataada; awooda dareenka iyo dhaqdhaqaaqa; xaaladaha waxqabadka maskaxda iyo jidhka; jilcinta macluumaadka; iyo hadalka. Erayga laguma dabihi karo dhaawac garadka ama ama dhaawac ku yimid dhalsho ahaan.

Araga Dhiman oo ay Ku Jirto Indho La'aantu

Dhinaanta araga ee, xataa haddii la saxo,

saamaynta ba'an ku leh ilmaha waxbarashaddiisa. Erayga waxa ku jira aragtida dhiman iyo indho la'aanta labadaba. Araga dhiman ee ilmaha waxay tahay:

- o Arag dhiman, oo aan hore iyo horaanba ahayn u qaadasho, keena arati qiyaas ahaan dhan 20/70 ama ka yar isha roon marka la saxo; ama
- o Xaalad jidh ahaaneed o oil oo saamaysa shaqada aragtida ilaa heer meelayn waxbarasho gaar ah, Qalab, iyo/ama adeeg loo baahdo goob waxbarasho.

Taariikhda hirgelitaanka: Febraayo 1, 2007

Taariikho Hore ee Hirgelinta: Febraayo 2000; Noofambar 2004; Soo-raac ilaa Noofambar 2004; hirgalay Juulaay 1, 2005; Sibtambar 2005 (Technical Corrections 9/23/2005, 11/7/2005, 11/17/2005); Maarso 1, 2007; Corrected April 3, 2007; July 1, 2008: Addendum Sept. 2009.

FOOMAMKA DHEX DHEXAADINTA, ASHTAKADA IYO HABKA SHARCIGA



CODSIGA TOOSKA AH EE DHEXDHEXAADINTA

Waxaan ka codasanayaa dhexdhexaadin degmo dugsiyeedka ilmahayga si aanu u xalino arrimo la xidhiidha naafonimada ilmahayga. fadlan la xidhiidh degmada adiga oo iga wakiil ah.

Taariikhda: _____

Magac cunuga: _____

Fasalka cunuga: _____

Dugsiga cunga iyo degmada uu ka dhigto: _____

Waalidiinta (daabac magaca): _____

Saxiixa waalidiinta: _____

Cinwaanka: _____

Magaalo, gobol iyo zip code: _____

Iambarka telefonka: _____

Fadlan u dir ama/iyo faagis ugu dir:

Ohio Department of Education

Office for Exceptional Children

Mediation Coordinator

25 South Front Street, Mail Stop 202

Columbus, OH 43231-4183

Talefonka: (614) 752-1679

DIR: (614) 728-1097

FOOMKA CABASHADA

Magaca cabtaha: _____

Xidhiidhka cabtaha iyo ardayga: _____

Cinwaanka cabtaha: _____

Magaalo, gobol iyo zip code: _____

Cabtaha lambaradiisa taleefonka:

Shaqo: _____

Guri: _____

Cinwaanka E-mail (Ikhtiyaar): _____

Magaca ardayga: _____

Cinwaanka ardayga (haddii uu ka duwan yahay kan cabtaha):

Da'da ardayga: _____ Heerka darajada ardayga: _____

Jiidda la qeexay/tuhunsan yahay ee naafonnimada ardayga: _____

Degmo dugsiyeedka degaanka ardayga: _____

Magaca dugsiga ardaygu tago: _____

_____ Fadlan fiiri haddii cunugaada ka qeybgalo Barnaamijka Deeqda Waxbarashada Autisimka

This image shows a blank sheet of white paper with horizontal ruling lines. The lines are evenly spaced and run across the width of the page. There are no margins, text, or other markings on the paper.

* Sida 34 CFR §300.153 (c) [buuxinta cabashada], taariikhda lagu eedeeyey gefka kama badan karto hal sanno kahor taariikhda aad buuxisay cabashada.

[illegible]

Booga 2

This image shows a single sheet of white paper with horizontal ruling lines. The lines are evenly spaced and run across the width of the page. There are no margins, text, or other markings on the paper.

[illegible]

Booga 3

This image shows a single sheet of white paper with horizontal ruling lines. The lines are evenly spaced and run across the width of the page. There are no margins, text, or other markings on the paper.

* Sida 34 CFR §300.153 (c) [buuxinta cabashada], taariikhda lagu eedeeyey gefka kama badan karto hal sanno kahor taariikhda aad buuxisay cabashada.

Booga 4

[illegible]

* Sida 34 CFR §300.153 (c) [buuxinta cabashada], taariikhda lagu eedeeyey gefka kama badan karto hal sanno kahor taariikhda aad buuxisay cabashada.

[illegible]

Booga 5

This image shows a blank sheet of white paper with horizontal ruling lines. The lines are evenly spaced and run across the width of the page. There are no margins, text, or other markings on the paper.

* Sida 34 CFR §300.153 (c) [buuxinta cabashada], taariikhda lagu eedeeyey gefka kama badan karto hal sanno kahor taariikhda aad buuxisay cabashada.

[illegible]

Booga 6

This image shows a single sheet of white paper with horizontal ruling lines. The lines are evenly spaced and run across the width of the page. There are no margins, text, or other markings on the paper.

* Sida 34 CFR §300.153 (c) [buuxinta cabashada], taariikhda lagu eedeeyey gefka kama badan karto hal sanno kahor taariikhda aad buuxisay cabashada.

[illegible]

Booga 7

Qor liiska sarakiisha dugsiga aad arrimahaan kala xariirtay (ku dar magaca iyo mansabka uu haayo):

SAXIIXA CABTAHA: _____

Sida 34 C.F.R. 300.153 foomkan waa in la saxiixo haddii kale lagama shaqayn karo oo waxla lagu soo celin doonaa saxiix la'aan.

- Xafiiska Caruurta Aan Caadiga Ahayn (Office for Exceptional Children) wuxuu qabtaa oo keliya asalka ashtakooyinka rasmiga ah ee la soo saxiixay. Lama ogolaan doono ashtakooyinka lagu soo diro faks ama email.
- Sida 34 C.F.R. 300.153 (c), nuqulka cabashada waa inuu cabatuhu u soo diro degmada laga xereeyey cabashada.

☐ **Fadlan sax sanduuqan haddii aad u soo dirtay nuqulka cabashadan isuduwaha degmo dugsiyeedka cabashada laga xereeyey.**

Gunaanadka dib-u-hubinta Xafiiska Carruurta Gaarka ah, helitaanada waxa loo gudbin doonaa keliya waalidiinta, ama ardayga qaan gaadhay, iyo degmada, haddiise mooyaane aanu cabtuhu helin oo xerayn ogolaanshaha daruuriga ah ee fasaxida macluumaadka. Haddii cabashadu aanay lahayn fasaxaida ogolaanshaha daruuriga ah ee macluumaadka, cabtuhu wuxu heli doonaa waraaq xaqiijinaysa in jiidaha la qeexay ee laga hadlay oo dhanwax laga qabtay.

Fiiro: Isticmaalka foomkan looma baahnaa. Bedelka isticmaalka foomkan, waxaad soo gudbin kartaa cabashadaada, laakiin codsiga waa inay ku jiraan dhamaan macluumaadka looga baahan yahay xeerka federaalka ee 34 CFR §300.153.

Fadlan u soo dir dhamaan cabashooyinkaaga cinwaanka soo socda:

**Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Attn: Assistant Director of Procedural Safeguards
25 South Front Street, 2nd Floor
Columbus, OH 43215**

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan dhameystirka foomkaan ama hawsha ashtakada, la xariir Xafiiska Caruurta Aan Caadiga Ahayn (Office for Exceptional Children ee laga helo (614) 466-2650.

Hirgalaysa Agoosto 2009

CABASHADA NIDAAM JIRA IYO CODSIGA DHAGAYSIGA NIDAAM JIRA

Fariimaha

Fadlan bixi macluumaadka loo baahan yahay dhamaan meelahan.

1. *Magaca, taariikhda dhalashada iyo fasalka* ilamah.
2. *Heerka naafonimada*: Keen liistada dhamaan naafonimada hadda lagu dabihi karo ilmaha. Haddii ilmaha aan loo garan ilmo naafo ah, ku sheeg "Ilmaha looma garan" meesha banana ee lagu siiyey
3. *cinwaanka u deggan yahay* ilmaha; ama haddii guri la' yahay ilmaha ama dhlintu, macluumaadka meesha xidhiidhka.
4. *Magaca iyo cinwaanka* dugsiga ilamha tago.
5. *magaca iyo cinwaanka waalidiinta* haddii cinwaanku ka duwan yahay kan ilmaha; ama haddii guri la' yahay ilmaha ama dhlintu, macluumaadka meesha xidhiidhka: "Guri la'aan" macnaheedu waa dibji sida loogu macneeyey qaybta 725(2) ee the McKinney-Vento Homeless Assistance Act, 42 U.S.C. 11434a(2); iyo lambarada talefoonada.
6. *Dhexdhexaadin*: Dhexdhexaadin waa adeeg bilaasha oo ay bixiyaan Gobolka si loo xaliyo khilaafaat. kaqaybgalka dhexdhexaadinta waa tabaruc oo waa in labada qolaba ku heshiyaan. dhexdhexaadiye ayaa qaban doona taariikhaha labada qolo ka wada hadlayaan xalka. Dhexdhexaadin waxay barbar socotaa nidaamka jira, laakiin fadhiga dhexdhexaadinta badiyaa wuxu dhacaa kahor intaanu dhicin dhagaysiga nidaamka jira. Haddii aad xiisaynayso dhexdhexaadin, fadlan sax khadka ku haboon.
7. *Sharaxa dhibaataada iyo xaqiiqada la xidhiidha dhibaataada*: bixi sharaxa nooca dhibaataada oo ah salka codsiga dhagaysiga nidaamka jira, oo bixi xaqiiqada la xidhiidha dhibaataada. **Tusaalaha Dhibaato**: Dhibaataadu waa ku guuldaraysiga degmo dugsiiyeedka fulinta barnaamijka waxabarashada qof ahaaneed ee ilmaha. **Tusaalaha Xaqiiqqda La Xidhiidha Dhibaataada**: ilmahayga ma helin adeegyada afka iyo hadalka eek u sheegan barnaamijka waxabarashada qof ahaaneed.
8. *Sharaxa xalinta La Soo-jeediyey*: Sheeg xalinta aad soo-jeedinayso ilaa inta aad ogtahay ama aad helayso wakhtigan. **Tusaale Xalin La Soo-jeediyey**: Waxaan soo-jeedinayaa in ilmahaygu helo adeegyada afka iyo hadalka sida ku sheegan barnaamijka waxabarashada qof ahaaneed.
9. *Afhayeen ama Wakiil*: haddii aad leedahay afhayeen ama wakiil kiiskan, fadlan keen magaca iyo cinwaanka afhayeenka ama wakiilka. Haddii qaybtan aan u buuxin waalidku ama ama LEA, dhamaan xidhiidhka iyo macluumaadka nidaamka jira waxa loo diri doonaa afhayeenka ama wakiilka aan ahayn waalidiinta ama LEA.
10. *Saxiix*: qolada codsatay dhagaysi waxa looga baahan yahay inay daabacaan, saxiixaan oo taariikheeyaan ogeysiiska cabashada/ dhagaysiga nidaamka jira.
11. *Dhagaysi La Dedejiyey, haddii uu Jiro*: Waalid ayaa codsan kara dhagaysi la dedejiyey **keliya** haddii waalidku diido go'aan la xidhiidha meelayn kasaaritqan anshax ama go'aan muuqda. Wakaalad waxbarsho gudaha (LEA) ayaa codsan kara dhagaysi la dedejiyey **keliya** haddii LEA aaminto in siwaditaanka meelaynta haddu ee ilmuhu inay ku keeni karto dhaawac ilamaha ama kuwo kale. dhagaysi la-dedejiyey siyaabo kale **looma** codsan karo.
12. *Bixinta Codsiga*: u soodir nuqulka codsiga asalka oo dhan qolada kale, oo nuqulna u dir Ohio Department of Education, Office for Exceptional Children, Procedural Safeguards, 25 South Front Street, Columbus, Ohio 43215-4183 ama nuqul faagis ugu dir (614) 728-1097.
Fiiro: Isticmaalka foomkan looma baahnaa. Halkaad ka isticmaali lahayd foomka, waxaad u gudbin kartaa codsigaaga nidaamka jira, laakiin codsigaaga waa inay ku jiraan dhamaan macluumaadka looga baahan yahay xeerka federaalka ee 34 C.F.R. § 300.508.

CABASHADA NIDAAM JIRA IYO CODSIGA DHAGAYSIGA NIDAAM JIRA

MAGACA ILMAHA DARTIIS LOO CODSADAY DHAGAYSIGA	TAARIIKHDA DHALSHADA ILMAHA <i>(bil/Maalin/Sannad)</i>	FASALKA
HEERKA NAAFANIMO		
CINWAANKA ILMUHU DEGGAN YAHAY; AMA GOORTA AANU GURI QABIN ILMUHU, MACLUUMAADKA MEESHA LAGALA XIDHIIDHAYO		
MAGACA IYO CINWAANKA DUGSIGA ILMUHU TAGO		
MAGACA WAALIDIINTA IYO CINWAANKA HADDII CINWAANKA UU KA DUWAN YAHAY KAN ILMAHA. AMA GOORTA AANU GURI QABIN ILMUHU, MACLUUMAADKA MEESHA LAGALA XIDHIIDHAYO	LAMBARKA TALEFONKA ()	
	LAMBARKA TALEFONKA MAALINTII ()	
TURJUBAAN LABA-AF KU HADLAN AMA KAN FARAHA AYAA LA RABAA		
☐ HAA ☐ MAYA HADDII AY HAA TAHAY , Sheeg afka/nooca xidhiidhka		
MAGACA ISUDUWAHA IYO DEGMO DUGSIYEEDKA DEGAANKA		
DHEXDHEXAADIN		
☐ HAA ☐ MAYA Ma xiisaynayo dhexdhexaadin.		
SHARAXA DHIBAATADA <i>(Sharax nooca dhibaatada ilmaha ee la xidhiidha soojeedinta hore ama isbedelka meelaynta ama bixinta waxbarasho haboon oo dadweyne)</i> (Ku lifaaq boggag dheeraad ah haddii loo baahdo).		

CABASHADA NIDAAMKA JIRA IYO CODSIGA DHAGAYSIGA NIDAAMKA JIRA (socda)
SHARAXA DHIBAATADA (socda)

XAQIIQADA (*Bixi xaqiiqo la xidhiidha dhibaataada kor lagu sharxay*) (Ku lifaaq boggag dheeraad ah haddii loo baahdo).

SHARAXA XALINTA LA SOO JEEDIYEEY EE AAD RAADINAYSO (*Bixi xalinta la soo jeediyey ee dhibaataada ilaa heerka la ogyahay ama ay haystaan qolada kale*) (Ku lifaaq boggag dheeraad ah haddii loo baahdo).

MAGACA IYO CINWAANKA QAREENKA AMA WAKIILKA WAALIDIINTA/WAKIILKA AMA LEA. <i>Haddii qaybtan la dheemyo, dhamaan macluumaadka iyo wada-xidhiidhka la xidhiidha nidaamka jira waxa loo diri doonaa qareenka ama wakiilka ee looma dirayo waalidiinta ama LEA.</i>	LAMBARKA TALEFONKA ()
	LAMBARKA FAAGISKA ()

QOLADA CODSANAYSA DHAGAYSIGU WAA (sax mid): _____ Waalidiinta/wakiilka ilmaha ee dhagaysiga loo qabanayo _____ degmo Dugsiyeedla Degaanka (Isuduwaha) _____ Wakaalad kale oo Waxbarasho (Magac): _____ _____ Ardayga Naafada ah ee Ugu Yaraan Jira 18 sanno jir Aanse Ka Wenayn 21 Sanno Jir	Magac (daabac) ee Qolada Dhagaysiga Codsaday Saxiixa Qolada Dhagaysiga Codsaday Taariikhda Saxiixa
--	--

CODSI DHAGAYSI LADEDEJIYEEY (DHAMEE QAYBTAN KELIYA HADDII AAD CODSANAYSO DHAGAYSI LA DEDEJIYO)

*DHAGAYSI LA DEDEJIYEEY WAXA LA CODSAN KARAA **KELIYA** HADDII AY JIRAAN ASBAABAHA SOO SOCDA.*

Waalid: Waalid/wakiil ahaan ama arday, waxaan codsanayaa dhagaysi la dedejiyey waayo (Sax mid kuwa soo socda):

_____ Waxaanan ogolayn go'aan la xidhiidha meelaynta ku salaysan anshax; *ama*

_____ Waxaanan ogolayn go'aanka bayaanka.

Degmo Dugsiyeed: Degmo dugsiyeed ahaan, waxaan codsanayaa dhagaysi la dedejiyey waayo:

_____ Waxaan aaminsanahay ku socodka meelaynta hadda ee ilmaha inuu yahay waxa suurtagal ah inuu dhaliyo dhaawac ilmaha ama kale.

Bixinta Codsiga: U dir codsiga dhamaystiran ee qolada kale, oo u dir nuqul u dir Waaxda Waxbarashada Ohio, Office for Exceptional Children, Procedural Safeguards, 25 South Front Street, Columbus, Ohio 43215-4183 ama faagis u dir (614) 728-1097. ***Fiiro gaar ah:*** Isticmaalka foomkan looma baahnaa. Halkaad ka isticmaali lahayd foomka, waxaad u gudbin kartaa codsigaaga nidaamka jira, laakiin codsigaaga waa inay ku jiraan dhamaan macluumaadka looga baahan yahay xeerka federaalka ee 34 C.F.R. § 300.508. ***Fiiri bogga koowaad wixii fariimo ah.***

7/1/2005, rev. 2/1/ 2007, rev. 7/1/2008; rev. 8/28/2008

KANOQOSHO

Foomka Nidaamka Jira iyo/ama Cabashada
In la buuxiyo keliya Cabashada iyo/ama Nidaamka Jira Kanogoshada keliya

LAMBARKA DACWADA: _____

☐

KANOQOSHO CABASHO

☐

KANOQOSHO NIDAAM JIRA

Tani waxay xaqiijinaysaa dhexdhexaadinta ama hesiiska xalinta ee dhexmaray _____

iyo _____, oo halkan looga yaqaan hadda kadib

“qolooyinka,” ku danbaysay heshiis loo dhan yahay oo dhaxmarta qolooyinka. Natijada heshiiska,

_____ waxa halkan lagula noqonayaa cabashada

ee la xereeyey _____.

Saxiixa waalidiinta: _____ Taariikhda: _____

Saxiixa wakiilka degmada: _____ Taariikhda: _____

Saxiixa markhaatiga: _____ Taariikhda: _____

Fadlan u dir ama/iyo faagis ugu dir:

Ohio Department of Education
Office for Exceptional Children
Mediation Coordinator
25 South Front Street, Mail Stop 202
Columbus, OH 43231-4183
Telefonka: (614) 752-1679
Dir: (614) 728-1097

Hirgalaysa Juulaay 1, 2008